3. Taabagelinta heshiisyadii mataaneynta Dawladaha Hoose la galeen Dawladaha Hoose ee adduunka qaarkood iyo raadin Mataaneyn kuwo kale.

4. Abaabul iyo taabagelin wargeysyo lagu faafiyo wararka muhiimka ah ee saameyn kara dalka.

5. La socodka iyo adkeynta ururada Dawladaha Hoose ee Carabta ay xubin ka yihiin Dawladaha Hoose qaarkood;

6. La socodka iyo isuduwidda shirarka Wasaaradaha Arrimaha Gudaha;

7. La socodka iyo wax ka qabadka shirarka Ciidamada Nabadgelyada Dawladaha Carabta iyo faa'iido ka gaaridooda;

8. La socodka horumarka hiddaha iyo dhaqanka

9. Lasocodka iyo wax ka qabadka maamulka Dugsiyada Shaqaalaha;

10. La socodka iyo wax ka qabadka Xannaanada Carruurta iyo Hooyada;

11. La socodka waxbarashada Hoose/Dhexe ee Gobollada iyo Degmooyinka;

12. La socodka caafimaadka asaasiga iyo gurmadka degdegga ah.

13. Agaasinkaas Guud, wuxuu yeelanayaa laba Waaxood iyo lix Qeybood oo kala ah:

b) WAAXDA XIRIIRKA DIBEDDA:

— Qeybta xiriirka Hay'adaha Dibedda;
— Qebyta maamulka heshiisyada mataaneynta Dawladaha Hoose la galaan Dawlado kale.
— Qeybta soo saaridda wargeysyada.
— Qeybta la socodka horumarka hiddaha iyo dhaqanka;

) WAAXDA BULSHADA:

— Qeybta maamulka dugsiyada dhaqaalaha iyo xannaanada carruurta iyo hooyada (M.C.H.);
— Qeybta la socodka waxbarashada Hoose/Dhexe, caafimaadka asaasiga iyo gurmadka deg-degga.

Qod. 10aad

Agaasinka Guud Miisaaniyadda iyo Hantidhawrka Gudaha, wuxuu fulinayaa hawlaha Wasaaradda loo xilsaaray oo ku saabsan;

1. Habeynta iyo diyaarinta Miisaaniyadda Wasaaradda ee caadiga ah iyo tan horumarinta ee loogu talagalay Gobollada;

2. Maamulka iyo ku dhaqanka xisaabaadka Miisaaniyadda;

3. Nidaaminta iyo isuduwidda hawlaha xafiisyada iyo gaadiidka xarunta;

4. Kormeerka xisaabaadka guud iyo mid gaar ahaaneed iyo hantida maguurtada iyo guurtada, si loo hubiyo in Gobollada iyo Degmooyinka ay fuliyaan sharciyada iyo twareegtooyinka hab-xisaabeedka dalka;

5. Toosinta habka xisaabaadka meeshii u baahan si loo xaqiijiyo hantida ummadda Soomaaliyeed;

6. Ugu yaraan 2 jeer sanadkii waa in Waaxda Hantidhowrku kormeerto Gobol walba.

7. Diiwaan gelinta iyo tirakoobidda hantida maguurtada iyo guurtada Xarunta iyo Gobollada.

8. Agaasinkaas Guud, wuxuu yeelanayaa laba Waaxood iyo shan Qeybood oo kala ah:

b) WAAXDA MIISAANIYADDA:

— Qeybta Maamulka iyo ku dhaqanka xisaabaadka Miisaaniyadda;
— Qeybta habeynta xafiisyada iyo gaadiidka.

t) WAAXDA HANTIDHOWRKA GUDAHA:

— Qeybta Kormeerka Guud, gaar ahaaneed iyo toosinta habka Xisaabdaaka.
— Qeybta Diiwaangelinta iyo tirakoobka hantida maguurtada iyo guurtada ee xarunta dhexe, Gobollada iyo Degmooyinka.

Qod. 11aad

Xoghayaha Joogtada ee Wasaaradda waxaa toos u hoos imaanaya Qeybha soo socda:
— Qeybta Arkiifiyada caadiga ah;
— Qeybta Arkiifiyada sirta.

Qod. 12aad

Wixii Xeer ah ee ka hor imaanaya ama aan la socon karin xeerkan waa la tirtiray.

Qod. 13aad

Xeerkani wuxuu dhaqan gelayaa maalinta uu saxiixo Madaxweynaha J.D.S., waxaana lagu soo saarayaa Faafinta Rasmiga ah ee Dawladda.

Muqdisho, 15ka Maarso 1985

MADAXWEYNAHA J.D.S.

(Jaalle Maxamed Siyaad Barre)

XEER WAS. GAASHAANDHIGGA, L. 5 ee 16 Abr. 1985 Xeer Nidaamiyaha ee Xeerka Basiga iyo Hub ururinta

W A S I I R K U

MARKUU ARKAY: Xeerka Gaarka ah ee Madaxweynaha J.D.S. L. 11 ee 20 Maarso 1985 oo lagu soo saaray Faafinta Rasmiga ah ee 25 Maarso 1985 L. 2 r 3;

MARKUU GARTAY: In ay lagama maarmaan tahay in la dejiyo Xeer Nidaamiye lagu hirgeliyo laguna fuliyo Xeerka Gaarka ah ee kor ku tilmaaman;

ISAGOO CUSKANAYA: Awcodda ku xusan Qod. 70aad Xeerka Habka Ciqaabta Ciidamada ee waqtiga Nabadda iyo Dagaalka ee lala akhriyo Qod. 5aad ee Xeerka kor lagu soo sheegay.

WUXUU SOO SAARAYAA

Xeer Nidaamiyaha soo socda

Qod. 1aad

MUDDADA NOOCYADA BAXSASHADA

Iyadoo ay sideeda u taagan tahay ciqaabta DILKA AH ee noocyada baxsashada ee ku taal Qod. 1aad ee Xeerka la hadal hayo, gelitaanka dembiyadooda, waxaa la raacayaa muddooyinka soo socda:

1) 45 (Afartan iyo Shan) casho dhammaan noocyada baxsashada ee la galay ka hor intaanu dhaqan gelin Xeerka lambarkiisu yahay 11 ee 20 Maarso 1985, iyagoo ka bilaabanaya taariikhda la faafiyey;

2) 7 (Toddoba) casho dembiga baxsashada ee ku yaal Qod. 132 X.C.C.N. oo la galay ka hor intaanu dhaqan gelin Xeer L. 11 ee 20-3-1985;

Qod 2aad

3) Dhammaan dembiyada kale ee baxsashada waxaa la raacayaa muddooyinka iyo hababka ku qoran madaxa VIII (8°) Qaybta I°, II° iyo III° khaas ahaan laga bilaabo Qod. 328 ilaa 341 Xeerka Ciqaabta Ciidammada Dagaalka (X.C.C.D.);

RAADINTA IYO QABASHADA BAXSADEYAASHA

1) Marka ay dhammaato muddada ku tilmaaman Qod. 1aad ee Dekreetadan, raadinta iyo qabashada dadka baxsiga ah, waxaa mas'uul ka ah Colka uu ka baxsaday iyagoo raadraacooda si isdabajoog ah u wadi doono ilaa ay ka soo qabtaan oo ay gacanta ka saaraan Hay'adaha Garsoorka Ciidammada Qalabka Sida, ama ay u caddeeyaan in baxsaduhu uusan ku sugnayn Dalka J.D.S., iyadoo mas'uuliyiinta Colka looga digayo wixii ciqaab ah ee kaga imaan kara gudashada Xilkaas;

2) Mas'uuliyiintaas, marka ay gudanayaan waajibaadkooda, waxay la kaashan karaan, haddii ay u baahdaan nooc kasta oo ka mid ah Ciidammada Qalabka Sida, Saldhigyada Booliska iyo Hay'adaha Nabadgelyada Gudaha.

Qod. 3aad

TEBIN BAXSI

1) Taliyeyaasha C.Q.S., Taliyeyaasha nooc Ciidan, Taliyeyaasha Qaybaha, Saldhigyada, Kulliyadaha, Madaxda Hoggaamada Wasaaradda Gaashaandhigga iyo w.l.m. waa inay si degdeg ah ugu gudbiyaan Hay'adaha Garsoorka C.Q.S. ee khuseeya liiska dadka baxsaday ka hor taariikhda la faafiyey Xeerka la hadal hayo, ogeysiisna ku siiyaan Maxkamadda Sare ee C.Q.S., Xeer ilaaliyaha Guud ee C.Q.S., Hoggaanka Ciidanka iyo Hoggaanka Maamulka Lacagta oo ay askarta baxsiga ah ka tirsanyihiin;

2) Marka ay dhammaato muddada ku cayiman Qod. 1aad ee Xeerka Baxsiga iyo Hub ururinta, Madaxda ay dadka baxsadka ah ka tirsanyihiin waa inay u sco gudbiyaan Hay adaha Garsoorka C.Q.S. oo awoodda u leh qaadista dacwaddooda (Territorialmente competente), dadka iskood isu sco xaadiriyey, si looga jaro iiska, kuwa harayna lagu tiriyo inay si buuxda u galeen dembiga baxsiga ah galdacwadeedkoodana laga furo Xafiiska Xeerilaaliyaha C.QS. ee khuseeya iyo Maxkamadda ku beegan;

3) Marka lebin Maxkamadeed laga sameynayo dadka baxsada kaddib markuu dhaqan galo Xeerka baxsiga ee kor ku tilmaaman, waxaa loo hoggaansanaanayaa Qod. 17aad X.H.C. oo lala akhriyo Qod, 1aad iyo 19aad ee X.H.C.C. ee Nabadda;

Qod. 4aad

BILLAABIDDA IYO HOR U WADIDA DACWADDA

(Inizio ed esercizio dell'azione penale)

1) Marka la billaabayo ama hore loo wadayo dacwooyinka ku shaqa leh Maxkamadaha Ciidammada ee Dagaalka waa in oggolaansho laga helaa Taliye Ciidan, Qayb ama Taliyaha Goboolka ee Guulwadayaasha uu Degaankiisa Askariga ka tirsan yahay ama qof Sarkaal ah oo uu asaga wakiishay darajadiisana ka yar oo G/le Sare;

2) Haddii uu eedeysanaha darajadiisa gaarsiisan yahay SAREEYE (Janan nooc kasta) dacwa qaadidiisa waxaa fasaxaya Taliyaha ugu sareeya ee C.Q.S.

Qod. 5aad

HUB URURINTA

1) Guud ahaan xagga hub ururinta waxaa ka

iyo Hay'adaha C.Q.S. ee u qaybsan xasilloonaanta iyo nabadgelyada gudaha, haddii ay u baahdaana, [illegible] la kaashanayaan Colaika X. D. Soomaaliyeed [illegible] dhow;

2) Hay'adaha kor lagu soo sheegay waa in ay ugu tala galaan Talisyada Saldhigga Booliska meel [illegible] keydiyo hubka iyo saanadda la ururinayo ayagoo u [illegible] meyn doono diiwaano lagu muujinayo nooca hubka iyo saanadda, magaca saddexan iyo tilmaan buuraha ee nin ka keenay ama lagu qabtay. Iambarka iyo wixii tilmaan kale ah oo lagu garan karo hubaaas iyo saanadaan, habka uu markii hore ku soo galay iyo taariikhda laga qabtay;

3) Diiwaankaas wuxuu noqon doonaa mid lagu hayo Saldhigyada Booliska ee Degmooyinka, kuwaasoo laga doonayo in ay hubka, saanadda, noocyada qalabka wax lagu qarxiyo iyo hubka kiimikada iyo baarlyoleojikada oo ay ururiyeen ku wareejiyaan, maalin kasta. Talisyada tooska ugu sareeya, kuwaasoo ayagana isla markaas u gudbin doona Taliyaha Qaybta Xoogga Dalka Soomaaliyeed uu Degaankiisa ka tirsan yahay oo asagana isla markaas u gudbin doona Hoggaanka Hubka iyo Rasaasta ee Wasaaradda Gaashaandhigga;

4) Marka Xeer Nidaamiyahaan loo eego, Saldhigga 43aad ee Kismaayo wuxuu la mid yahay Qayb K.D S;

5) Hubka laga ururinayo Gobollada Shabeelaha Dhexe, Banaadir iyo Shabeelaha Hoose waxay Taliyayaasha Qaybta Booliska ee hubka maalin kasta ku soo ururayo waxay si toos ah u gudbinayaan Hoggaanka Hubka iyo Rasaasta ee Wasaaradda Gaashaandhigga;

6) Ilaa iyo laga sameynayo sharciga hub [illegible] shada, Xildhibaanada Golaha Shacbiga, mas'uuliyiinta sare ee Dawladda oo fasax u haysta hubka ay sitaan iyo rayidka kale oo Wasiirka Wasaaradda Gaashaandhigga horay ugu fasaxay hawl Qaran awgeed, waa inay ka

diiwaan geliyaan hubkooda, Saldhigyada Booliska ee Degmooyinkooda ku aadan, kaddibna nuqulka asaasiga (l'originale) ee fasaxa loo soo gudbiyaa Wasaaradda Gaashaandhigga si loogu xalaaleeyo.

Qod. 6aad

QABASHADA, XAFIDAADDA IYO BAARITAANKA HUBKA

Hoggaanka Hubka iyo Rasaasta ee Wasaaradda Gaashaandhigga waxaa loo xilsaaray qabashada hubka ku soo ururayo, diiwaan-gelintiisa, kala saariddiisa iyo xafidaaddiisa, kaddibna baaritaan adag ku ameeyo, soona hubiyo lahaanshaha asalka ah ee hubkaas iyo habka uu ku soo galay waddanka J.D.S.

Qod. 7aad

AWOODDA QAADISTA DACWADAHA

1) Awoodda qaadista dacwadaha dembiyada la xiriira Xeerka lambarkiisu yahay 11 ee 20ka Maarso 1985 waxaa iska leh Maxkamadaha Ciidamada Qalabka Sida ee Dagaalka;

2) Ayadoo la tixgeliyey in J.D.S. ay dagaal kula jirto cadowga, oo sidaas darteedna la dhisay Maxkamadaha C.Q.S. ee Dagaalka, dembi kasta oo uu galo Militeri ka tirsan Ciidammada Qalabka Sida awoodda dacwa qaadistiisana waxaa iska leh Maxkamadaha ku xusan xubinta hore ayadoo waafaqsan Qod. 54aad ee Xeerka Habka Ciqaabta Ciidammada Dagaalka.

Qod. 8aad

DHAQAN GAL

Xeer Nidaamiyahan wuxuu dhaqan gelayaa marka uu saxiixo Wasiirka, waxana lagu soo saarayaa Faafinta Rasmiga ah ee Dawladda.

Muqdisho, 16.4.1985

WASIIRKA WASAARADDA GAA/DHIGGA J.D.S.
(S/Guud Maxamed Cali Samantar)

XEER WASAARADDA GAASHAANDHIGGA L. 6 ee 16 Abr. 1985, Magacaabid Kaaliye.

WASIIRKU

MARKUU ARKAY:

MAXKAMADDA GOBOLKA TOGDHEER

UJ: Baafin Jeegag Lumay.

(Guddoomiyaha Maxkamadda G. Togdheer Burco)

HADDUU ARKAY: Dacwadda ku saabsan Jeegagga Wareega ee lumay;

HADDUU ARKAY: Ogeysiinta Bangiga Ganacsiga iyo Kaydka;

HADUU ARKAY: Qod. 69,(9-65 N. 2, Lumid Jeegagga Wareega J.W. Lr. 499880 20,000/= J/W Lr, 409881 20,000/— J/W Lr. 49882 20,000/= J/W Lr, 409883 20,000/= J/W Lr. 409884 20,000/= J/W Lr. 409885 20,000/= J/W Lr. 409886 20,000/= J/W Lr. 409887 20,000/= J/W Lr. 409888 20,000/=, kuna qoran Saciid Maxamed Ismaaciil Buraale.

WUXUU XEERIYEY

In loo Cusbooneysiiyo Jeegaggaas Wareega ee kor ku xusan J/le Saciid Maxamed Ismaaciil Buraale markii ay ka soo wareegto mudada 20 maalmood laguna shaaciyo Faafinta Rasmiga ah ee Dawladda.

WAXAA LAGA CODSANAYAA

In Jeegagga Cusub ee la samayn doono gacanta laga saaro J/le Saciid Maxamed Ismaaciil Buraale iyadoo la sugayo muddada kor ku xusan.

Burco, 23.9.1984

Guddoomiyaha Maxkamadda G. Togdheer
(Dr. Cab/raxmaan Sh. Maxamed)

Kaaliyaha Maxkamadda G. Togdheer Burco
(Xaliimo X. Cabdi Aadan)

# FAAFINTA RASMIGA AH

الرسميـة الجريـدة

Sannadka 13aad Muqdisho 30 Maajo 1985 L. 1 r 5

JAMHUURIYADDA DIMOQRAADIGA SOOMAALIYA

لجمهورية الصومال الديمقراطية

FAAFIN BIL SOO BAXA جريدة شهرية

**QIIMADU**: waa 5 shilin lambar waliba — **RUKUNKA**: Sanadii waa Sh. 100 Soomaaliya gudeheeda - dibaddedana waa Shs. 300. Rubunka la weydiisto waqtiga loo gooyey wuxuu ka bilabmaa 1 Janaayo. Qiimaha qortitaanku F. R. halkii sadar iyo waxii ka yar waa 2 laba Sh. Rukunka iyo qoritaanku waxaa la weydiistaa Laanta Maamulka Faafinta Rasmiga ah Lacagta waxaa lagu bixinayaa Xafiiska Canshuuraha ee Wasaaradda Lacagta.


K O O B N I I N


QAYBTA KOOWAAD

QAYBTA KOWAAD

SHARCI

SHARCI L. 5 ee 20 Abr. 1985, Oggolaansho Heshiis Dhaqameed oo dhexmaray J.D.S. iyo Jamhuuriyadda Kenya. » 320

SHARCI L. 6 ee 20 Abr. 1985, Oggolaansho Heshiis lagu dhisayo Xarunta Carbeed ee Baarista Dhulalka lama degaanka oo ka dhexeeya Dawladaha ku jira J. Carabta. » 321

SHARCI L. 7 ee 27 Abr. 1985, Wax ka beddelid Sharciga Hawsha Difaaca Qaranka. » 322

SHARCI L. 8 ee 2 Maajo 1985, Oggolaansho Heshiis Amaheed oo dhexmaray JDS iyo Sanduuqa Carabta ee Horumarinta Dh/ha iyo Bulshada kuna saabsan Maalgelinta Mashruuca. » 323

SHARCI L. 9 ee 6 Maajo 1985, Oggolaansho Axdiga Heshiiska Lome' III oo ka dhexeeya Dalalka ACP iyo EEC ee Sannadka 1984. » 325

QAYBTA LABAAD
X E E R

XETR-SHARCI L. 1 ee 1 Maajo 1985, Kuna saabsan Maadxbannaaneynta Miraha Beeraha. » 326

XEER-SHARCI L. 2 ee 1 Maajo 1985, Kuna saabsan wax ka beddelidda Canshuurta Furdooyinka. » 327

XEER MADAXWEYNAHA JDS L. 16 ee 20 Abr. 1985, Meel-marin Heshiis Dhaqameed oo dhexmaray JDS iyo Jamhuuriyadda Kenya. » 329

DECREE N. 16 on 20 Apr 1985, Instrument of ratification. » 330

XEER MADAXWEYNAHA JDS, L. 17 ee 20 Abr. 1985, Meel-marin Heshiis lagu dhisayo Xarunta Carbeed ee Baaraha. » 331

مرسوم رئيس الجمهورية رقم ١٧ بتاريخ ١٩٨٥/٤/٢٠ التصديق على اتفاقية انشاء المركز العربى لـدراسات المناطـق الجافة والاراضى القاحلة ٠ ٣٣٢

XEER MADAXWEYNAHA JDS, L. 18 ee 2 May 1985, Meel-marin Heshiis Amaaheed oo dhexmaray JDS iyo Sanduuqa Carbeed ee Horumarinta Dh/laha iyo Bulshada » 333

مرسوم رئيس الجمهورية رقم ١٨ بتاريخ ١٩٨٥/٥/٢ التصديق على اتفاقية قرض بين جمهورية الصومال الديمقراطية ٠ ٣٣٤

XEER MADAXWEYNAHA JDS, L. 19 ee 6 May 1985, Meel-marin Axdiga Heshiiska lamee III oo ka dhexeeya Dalalka ACP iyo EEC ee Sannnadka 84. Bulshada. » 335

DECREE N. 13 on 6 May 1985, Instrument of ratification. » 336

QAYBTA SAD/XAAD

TALOOYIN ISGAARSIIN OGEYSIIS IWM

MAXKAMADDA GOBOLKA W/GALBEED 1.3.85, Lumid Jeeg War. L. 002g577 ku qoran Cabdiraxmaan Axmed Nuur L. 139 » 337

MAXKAMADDA GOBOLKA BANAADIR, 29.4.85, Lumid Jeeg War. L. 10103 ku qoran Ibraahim Aadan Maxamed L.140 » 338

MAXKAMADDA G. BANAADIR, 24.4.85, Lumid Buug Kayd L. 19034 ku qoran Xabiibo Xayle Cali L. 141 » 339

MAXKAMADDA G. TOGDHEER, 4.5.85, Lumid Jeeg War. L. 0030691 ku qoran Shuun Yuusuf Maxamed L. 142 » 340

MAXKAMADDA G. TOGDHEER, 20.5.85, 024' 297 0034844, ku qoran Maxamed 003' 844, ku qoran Maxamed Cali Cabdullaahi Jaamac L. 143 » 341

MAXKAMADDA GOBOLKA BANAADIR 28.5.85, lumid Buug kayd L. 3680 ku qoran Ismaaciil Xaaji Faarax » 342

MAXKAMADDA GOBOLKA BANAADIR Cali Cabdullaahi Jaamac L. 143 Qoran Caasha Yuusuf Cabdi » 343

MAXKAMADDA GOBOLKA TOGDHEER 31 Jen. 1985 lumid Jeeg war L. 196308, ku qoran Cabdiraxmaan Maxamed Yuusuf » 344

QAYBTA KOWAAD

SHARCI

Sharci lambar 5 taariikh 20 Abr. 1985, Oggolaannsho Heshiis Dhaqameed oo dhexmaray J.D.S. iyo Jamhuuriyadda Kenya.

MADAXWEYNAHA JDS

ISAGOO TIXGELINAYA: Oggolaanshaha Guddiga Joogtada ah ee Golaha Shacbiga;

WUXUU SOO SAARAYAA

Sharciga soo socda:

Qod. 1aad

1. Waxaa la oggolaaday meel-marinta heshiis dhaqameed oo dhexmaray Jamhuuriyadda Dimoqraadiga Soomaaliya iyo Jamhuuriyadda Kenya, kuna saabsan wax isdhaafsiga iyo wax wada qabsiga xagga Waxbarashada, Sayniska, Caafimaadka, Warfaafinta iyo Isboortiga.

2. Heshiiska waxaa lagu kala saxiixday Magaalada Nayroobi, taariikhdu markay ahayd 28ka Nofembar 1984.

3. Heshiisku wuxuu ka mid yahay Sharcigan isagoo lifaaq u ah.

Qod. 2aad

Shuruudaha iyo xaaladaha ay qorayaan heshiiska ku tilmaaman qod. 1aad ee Sharcigan waxay leeyihiin qiimo iyo astaan sharci la heer ah Sharciyada iyo Xeerarka Dalka, waxaana dhaqan gelintooda la waafajinayaa Dastuurka J.D.S.

pɐɐƹ ·poϑ

Madaxweynaha Jamhuuriyadda Dimoqraadiga Soomaaliya, waxaa awood loo siiyey inuu meel-mariyo heshiiska Sharcigan lagu tilmaamay.

Qod. 4aad

Sharcigan wuxuu dhaqan gelayaa isla marka uu saxiixo Madaxweynaha JDS, waxaana lagu soo saarayaa Faafinta Rasmiga ah ee Jamhriyadda.

Muqdisho, 20 Abriile 1985

MADAXWEYNAHA JDS

(Maxamed Siyaad Barre)

Sharci lambar 6 taariikh 20 Abr. 1985 Oggolaansho Heshiis lagu dhisayo Xarunta Carbeed ee Baarista Dhulalka lama degaanka oo ka dhexeeya Dawladaha ku jira Jaamacadda Carabta.

MADAXWEYNAHA JDS

ISAGOO TIXGELINAYA: Oggolaanshaha Guddiga Joogtada ah ee Golaha Shacbiga;

WUXUU SOO SAARAYAA

Sharciga soo socda:

Qod. 1aad

1. Waxaa la oggolaaday meel-marinta heshiis dhexmaray Dawladaha ka tirsan Jaamacadda Carabta oo lagu dhisayo Xarunta Carbeed ee Baarista Dhulalka lama Degaanka ah.

2. Heshiiskan waxaa lagu kala saxiixday Magaalada Qaahira, sannadku markuu ahaa 1979kii.

3. Heshiisku wuxuu ka mid yahay Sharcigan isagoo lifaaq u ah.

Qod. 2aad

Shuruudaha iyo xaaladaha ay qorayaan qodobada heshiiska ku tilmaaman qodobka 1aad ee sharcigan waxay leeyihiin qiimo iyo astaan sharci la heer ah Sharciyada iyo Xeerarka Dalka, waxaana dhaqan gelintooda la waafajinayaa Dastuurka J.D.S.

Qod. 3aad

Madaxweynaha JDS, waxaa awood loo siiyay inuu meel-mariyo heshiiska Sharcigan ku tilmaaman.

Qod 4aad

Sharcigan wuxuu dhaqan gelayaa isla marka uu saxiixo Madaxweynaha JDS, waxaana lagu soo saarayaa Faafinta Rasmiga ah ee Jamhuuriyadda.

Muqdisho, 20 Abriil 1985

MADAXWEYNAHA JDS

Sharci lambar 7 taariikh 27 Abr. 1985, Wax ka beddelid Sharciga Hawsha Difaaca Qaranka.

MADAXWEYNAHA JDS

ISAGOO TIXGELINAYA: Oggolaanshaha Guddiga Joogtada ah ee Golaha Shacbiga;

WUXUU SOO SAARAYAA

Sharciga soo socda:

Qod. 1aad

Qodobka 1aad ee Sharciga Hawsha Difaaca Qaranka lambar 32 ee 28.4.1981, waxaa loo beddelay sida soo socota:—

«Ka qeyb galka hawsha Difaaca Qaranka waa waajib muqaddas ah oo saaran muwadin kasta.

Hawsha Difaaca Qaranka waxay ku waajibaysaa muwaadinka labka (ragga) ah ay da'diisu u dhexeyso 18 sano ilaa 40 sano, dheddiggana (dumarka) ay da'doodu u dhexeyso 18 sano ilaa 30 sano, jirkooda iyo caafimaadkoodana ay dhan yihiin.

Muddada qof kasta ku waajib ah inuu guto hawsha Difaaca aQranka waa 2 (laba) sano oo xiriira. Kuwa heysta Shahaado Jaamacadeed, Shhaaado Dugsi Sare iyo Shahaadooyinka u dhigma waxay gudanayaan waajibaadkooda 18 (toban iyo sideed) bilood oo xiriira ah».

Qod. 2aad

Sharcigani wuxuu dhaqan gelayaa 15 maalmood kaddib marka lagu soo saaro Faafintna Rasmiga ah ee Jamhuuriyadda.

Muqdisho, 27 Abriile 1985

MADAXWEYNAHA JDS
(Maxamed Siyaad Barre)

Sharci lambar 8 taariikh 2 Maajo 1985, Oggolaansho Heshiis Amaaheed oo dhexmaray J.D.S. iyo Sanduuqa Caabta ee Horumarinta Dhaqaalaha iyo Bulshada, kuna saabsan ka qeyb galka maalgelinta Mashruuca Horumarinta Kalluumeysiga Badaha Waqooyi.

MADAXWEYNAHA JDS

ISAGOO TIXGELINAYA: Oggolaanshaha Guddiga Joogtada ah ee Golaha Shacbiga;

WUXUU SOO SAARAYAA

Sharciga soo socda:

Qod. 1aad

1. Waxaa la oggolaaday meel-marinta heshiis dhexmaray Jamhuuriyadda Dimoqraadiga Soomaaliya iyo Sanduuqa Carbeed ee Horumarinta Dhaqaalaha iyo Bulshada, kuna saabsan amaah lacageed oo dhan (1.500.000/= oo ah Kuweyt Dinar) ee loogu tala galay ka qeyb galka maal-gelinta Mashruuca Horumarinta Kalluumeysiga Badaha Waqooyi.

2. Heshiiskan, waxaa lagu kala saxiixday Magaalada Kuweyt, taariikhdu markay ahayd 10.9.1984.

3. Heshiisku wuxuu ka mid yahay Sharcigan isagoo lifaaq u ah.

Qod. 2aad

Shuruudaha iyo xaaladaha ay qorayaan heshiiska ku tilmaaman qodobka 1aad ee Sharcigan, waxay leeyihiin qiimo iyo astaan sharci la heer ah Sharciyada iyo Xeerarka Dalka, waxaana dhaqan gelintooda la waafajinayaa Dastuurka Jamhuuriyadda Dimoqraadiga Soomaaliya.

Qod. 3aad

Madaxweynaha Jamhuuriyadda Dimoqraadiga Soomaaliya, waxaa awood loo siiyay inuu meel-mariyo heshiiska Sharcigan ku tilmaaman.

Qod. 4aad

Sharcigan, wuxuu dhaqan gelayaa isla marka uu saxiixo Madaxweynaha JDS, waxaana lagu soo saarayaa Faafinta Rasmiga ah ee Jamhuuriyadda.

Muqdisho, 2 May 1985

MADAXWEYNAHA JDS
(Maxamed Siyaad Barre)

Sharci lambar 9, taariikh 6 Maajo 1985, Oggolaansho Axdiga Heshiiska Lome' III oo ka dhexeeya Dalalka ACP iyo EEC ee Sannadka 1984.-

MADAXWEYNAHA JDS

ISAGOO TIXGELINAYA: Oggolaanshaha Guddiga Joogtada ah ee Golaha Shacbiga;

WUXUU SOO SAARAYAA

Sharciga soo socda:

Qod. 1aad

1. Waxaa la oggolaaday Axdiga Lome' III iyo Borotokoolada la xiriira oo dhexmaray Dalalka Afrika, Karaybi iyo Dalalka Badweynta (ACP) iyo Dalalka Suuqa Dhaqaalaha Yurub (EEC).

2. Axdiga Lome' III ee ACP-EEC oo ay ka mid tahay Jamhuuriyadda Dimoqraadiga Soomaaliya, waxaa lagu saxiixay Magaalada Lome' ee Dalka Togo taariikhdu markay ahayd 8dii Disembar 1984.

3. Axdiga Lome' ee sannadka 1984 iyo borotokoolada la xiriira waxay ka mid noqonayaan Sharcigan.

Qod. 2aad

Shuruudaha iyo xaaladaha ay qorayaan qodobada uu ka kooban yahay Axdiga iyo borotokoolada la xiriira kuna tilmaaman qodobka 1aad ee Sharcigan, waxay leeyihiin qiimo iyo astaan sharci la heer ah Sharciyada iyo Xeerarka Dalka, dhaqan gelintooduna waxaa la waafajinayaa Dastuurka J.D.S. iyo qodobada uu ka sameeyo ee Axdiga iyo borotokooladiisa.

Qod. 3aad

Sharcigani wuxuu dhaqan gelayaa isla maalinta uu saxiixo Madaxweynaha JDS, waxaana lagu soo saarayaa Faafinta Rasmiga ah ee Jamhuuriyadda.

Muqdisho, 6 May 1985

MADAXWEYNAHA J.D.S.
(Maxamed Siyaad Barre)

QAYBTA LABAAD

XEER—SHARCI

XEER-SHARCI Lr. 1 kuna saabsan Madaxbanaaneyn ta Miraha Beeraha.

MADAXWEYNAHA JDS

ASAGOO ARKAY: Qod. 69 ee Dastuurka J.D.S;

ASAGOO ARKAY: Sharci Lr. 60 ee 8.9.70 iyo isbeddel ladiisii ka dan'beeyay;

ASAGOO ARKAY: Barnaamijka dib u habeynta dha qaalaha iyo maaliyadda ee 1.1.1985;

ASAGOO GARAWSADAY: Layama maarmaanimada in Miraha Beeraha lagu habeeyo barnaamijkaas;

ASAGOO DHAGEYSTAY: Talada Golaha Wasiirrada;

IYADOO UU SOO JEjDIYAY: Wasiirka Wasaaradda Beeraha.

WUXUU SOO SAARAYAA

Xeer-Sharciga soo socda:—

Qod. 1aad

1) laga bilaabo 1.1.1985 Beeraleydu miraha ay soo saaraan waxay u madax'bannaan yihiin inay suuqa ugu gataan qiimaha ay joogaan (Prezzo di mercato).

2. Wakaaladda Horumarinta Beeraha, miraha ay keyd ahaan ugu baahan tahay waxay ka ka iibsaneysaa suuqa hadba qiimaha ay joogaan.

Qod. 2aad

Waxaa la buriyay sharci kasta ee ka soo horjeeda ama aan la socon karin xeer-sharcigan.

1. Xeer-Sharcigan wuxuu dhaqangelayaa marka uu saxiixo Madaxweynaha J.D.S. waana in loo gudbiyaa Golaha Shacbiga si uu sharci ugu rogo.

2. Xeer-Sharcigaan waxaa lagu soo saari doonaa Faafinta Rasmiga ah.

Muqdisho, 1da May 1985

MADAXWEYNAHA JDS

XEER-SHACI Lr. 2 kuna saabsan wax ka bedelidda Canshuurta Furdooyinka.-

MADAXWEYNAHA J.D.S.

ASAGOO ARKAY: Qod. 69 ee Dastuurka J.D.S;

ASAGOO ARKAY: Sharci Lr. 5 ee 11.12.68;

ASAGOO ARKAY: Sharci Lr. 3 ee 10.1.78;

ASAGOO ARKAY: Xeer-Sharci Lr. 5 ee 13.10.82;

ASAGOO GARAWSADAY: Baahida loo qabo in culeyska canshuurta laga yareeyo cunnooyinka daruuriga ah iyo daawooyinka dadka iyo xoolaha;

WAXOO UU SOO JEEDIYAY: Wasiirka Waxaa ladda Maaliyadda;

ASAGOO DHAGEYSTAY: Golaha Wasiirrada.

WUXUU SOO SAARAYAA

Xeer-Sharciga soo socda:

Qod. 1aad

Canshuurta soo dejinta iyo tan maamulka iyo tirada ee ku waajiba cunnooyinka daruuriga ah iyo daawooyinka dadka iyo xoolaha waxaa laga dhimay 50% halka ay maanta joogaan.

Qod. 2aad

Badeecooyinka iyo daawooyinka ku yusan Qodobka sare waa kuwa halkan hoose ku tirsan, canshuurtooda (Fiscal Duty, Costum Duty & Amministrative & Sta-

tistical Fee) oo la dhimayna waxay noqoneysaa boqol-eyda mid walba ku hor qoran:-

| TAC.Lr. | RADEECO | SOO DEJIN | | CANSHUURTA |
|---|---|---|---|---|
| | | F/D | C/D | A&S/F |
| 08.01 | Timirta Nooc kasta/Date all kinds | 7.50% | — | 10% |
| 10.06 | Bariis Nooc kasta/Risc | 2.50% | — | 10% |
| 11.01.01 | Burka Flour | 2% | — | 10% |
| 15.07 | Saliid la cuno/nooc kasta/- Edible oil | 2% | — | 10% |
| 19.03 | Baasta nooc kasta/Past | 22.50% | 2.50% | 10% |
| 30.03 | Daawooyinka dadka iyo xoolaha Medicin all kinds Human &Animal | 5% | — | 10% |

Qod. 3aad

Xeer-Sharcigan wuxuu dhaqan gelayaa 20.4.85; waana in loo gudbiyo Golaha Shacbiga si uu sharci ugu rogo.

Muqdisho, 1da May 1985

MADAXWEYNAHA J.D.S.
(S/Gaas Maxamed Siyaad Barre)

XEERKA Madaxweynaha JDS lambar 16 taariikh 20 Abriil 1985 Meel-marin Heshiis Dhaqameed oo dhexmaray J.D.S. iyo Jamhuuriyadda Kenya.

MADAXWEYNAHA JDS

MARKUU ARKAY: Qod. 67aad, faqradda 5aad iyo Qod. 82iid, faqradda 4aad ee Dastuurka;

MARKUU ARKAY: Sharciga lambar 49, taariikh 23.12.1984, kuna saabsan wax ka beddelidda Dastuurka Jamhuuriyadda Dimoqraadiga Soomaaliya;

MARKUU ARKAY: Sharciga lambar 5 Taariikh 20.4.85 oo Golaha shacbigu ku oggolaaday heshiiska Xeerkan ku tilmaaman;

MARKUU TIXGELIYEY: In ay lagama maarmaan tahay in Heshiiskan la meel-mariyo;

WUXUU SOO SAARAYAA

Xeerka soo socda:

Qod. 1aad

Waxaa la meel-mariyay heshiiska dhaqameed oo dhexmaray Jamhuuriyadda Dimoqraadiga Soomaaliya iyo Jamhuuriyadda Kenya, oo lagu kala saxiixday Magaalada Nayroobi, taariikhdu markay ahayd 28ka Nofembar 1984, kuna saabsan wax isdhaafsiga iyo wax wada qabsiga xagga Waxbarashada Sayniska, Caafimaadka, Warfaafinta iyo Isboortiga.

Qod. 2aad

Heshiiskan wuxuu Dalka Jamhuuriyadda Dimoqraadiga Soomaaliya, ku yeelanayaa astaan Sharci ah.

Qod. 3aad

Xeerkani wuxuu dhaqan gelayaa isla marka uu saxiixo Madaxweynaha Jamhuuriyadda Dimoqraadiga Soomaaliya, waxaana lagu soo saarayaa Faafinta Rasmiga ah ee Jamhuuriyadda.

Muqdisho, 20 Abriile 1985

Decree no. 16 of 20 Apr. 1985, Instrument of ratification.

THE PRESIDENT

HAVING SEEN: Article 67, para 5, and Article 82, para 4, of the Constitution of the Somali Democratic Republic;

HAVING SEEN: The law no. 49 of 28.12.1984;

HAVING SEEN: The law no 5 of 8.2.1985 on the base of which the People's Assembly has approved the Agreement specified in this Decree;

HAVING CONSIDERED: The necessity to ratify this Agreement;

HEREBY PROMULGATES
the following Decree:

Article I

The Cultural Agreement Between the Government of the Somali Democratic Republic and the Government of the Republic of Kenya, signed on NAIROBI on November 28th 1984, is hereby ratified.

Article II

This Agreement shall have the force of law in the Territory of the Somali Democratic Republic.

Article III

This Decree shall come into force upon signiture by the President of Sali Democratic Republic and shall be published in Official Bulletin of the State.

Mogadishu, 20 Apr. 1985

THE PRESIDENT OF S.D.R.

XEERKA Madaxweynaha JDS lambar 17 taariikh 20 1985, Meel-marin Heshiis lagu dhisayo Xarunta Carbeed ee Baarista Dhulalka lama Degaanka oo ka dhexeeya Dawladaha ku jira Jaamacadda Carabta.

MADAXWEYNAHA JDS

MARKUU ARKAY: Qod. 67aad, faqradda 5aad, Qod. 82aad, faqradda 4aad ee Dastuurka;

MARKUU ARKAY: Sharciga lambar 49, taariikh 23.12.1984, kuna saabsan wax ka bedelidda Dastuurka Jamhuuriyadda Dimoqraadiga Soomaaliya;

MARKUU ARKAY: Sharciga lambar 6, taariikh 20.4.85 —— oo Golaha Shacbigu ku ogolaaday Heshiiska Xeerkan ku dhmaaman;

MARKUU TIXGELIYAY: In ay lagama maarmaan tahay in Heshiiskan la meel-mariyo;

WUXUU SOO SAARAYAA

Xeerka soo socda:

Qod. 1aad

Waxaa la meel-mariyay heshiiska dhexmaray Dawladaha ka tirsan Jaamacadda Carabta oo lagu dhisayo Xarunta Carbeed ee Baarsta Dhulalka lama Degaanka ah oo lagu kala saxiixday Magaalada Qaahira sannadku markuu ahaa 1979.

Qod. 2aad

Heshiiskan wuxuu Dalka Jamhuuriyadda Dimoqraadiga Soomaaliya, ku yeelanayaa astaan Sharci ah.

Qod. 3aad

Xeerkani wuxuu dhaqan gelayaa isla marka uu saxiixo Madaxweynaha Jamhuuriyadda Dimoqraadiga Soomaaliya, waxaana lagu soo saarayaa Faafinta Rasmiga ah ee Jamhuuriyadda.

Muqdisho, 20 Abriil 1985

MADAXWENYAHA JDS
(Maxamed Siyaad Barre)

مرسوم رئيس الجمهورية رقم ١٧ بتاريخ ١٩٨٥/٤/٢٠
التصديق على اتفاقية انشاء المركز العربى لدراسات المناطق الجافة والاراضى القاحلة .

رئيس الجمهورية

بعد الاطلاع على الفقرة الخامسة من المادة ٦٧ والفقرة الرابعة من المادة ٨٢ من الدستور .

وعلى القانون رقم ٤٩ بتاريخ ٢٣ ديسمبر ١٩٨٤ ، الخاص بتعديل الدستور .

وعلى القانون رقم بتاريخ والذى بموجبه وافق مجلس الشعب على الاتفاقية المذكورة اعلاه .

ونظرا للضرورة الداعية الى التصديق على هذه الاتفاقية .

يرسم

بما هو آت :

المادة الاولى

تم التصديق على اتفاقية — انشاء المركز العربى لدراسات المناطق الجافة والاراضى القاحلة — فى نطاق جامعة الدول العربية ، المبرمة فى مدينة القاهرة عام ١٩٧٩م .

المادة الثانية

تكون للاتفاقية قوة القانون فى قطر جمهورية الصومال الديمقراطية .

المادة الثالثة

يسرى هذا المرسوم اعتبارا من تاريخ التوقيع عليه من قبل رئيس الجمهورية وينشر فى الجريدة الرسمية للجمهورية .

مقديشو ، فى ٢٠ ابريل ١٩٨٥م .

رئيس جمهورية الصومال الديمقراطية
محمد سياد برى

XEERKA Madaxweynaha JDS, lambar 18, taariikh 2 Maajo 1985 Meel-marin heshiis amaaheed oo dhexmaray J.D.S. iyo Sanduuqa Carbeed ee Horumarinta Dhaqaalaha iyo Bulshada, kuna saabsan ka qeyb galka Maal-gelinta Mashruuca Horumarinta Kalluumeysiga Badaha Waqooyi.

MADAXWEYNAHA JDS

MARKUU ARKAY: Qod. 67aad, faqradda 5aad iyo Qod. 82aad, faqradda 4aad ee Dastuurka;

MARKUU ARKAY: Sharciga lambar 49 ee 23.12.1984, kuna saabsan wax ka beddelidda Dastuurka JDS;

MARKUUU ARKAY: Sharciga lambar 7 taariikh 27.4.85 oo Golaha Shacbigu ku oggolaaday heshiiska Xeerkan ku tilmaaman;

MARKUU TIXGELIYAY: In ay lagama maarmaan tahay in la meel-mariyo heshiiska Xeerkan ku tilmaaman;

WUXUU SOO SAARAYAA

Xeerka soo socda:

Qod. 1aad

Waxaa la oggolaaday meel-marinta heshiis dhexmaray J.D.S. iyo Sanduuqa Carbeed ee Horumarinta Dhaqaalaha iyo Bulshada, kuna saabsan amaah lacageed oo dhan (1.500.000/= oo ah Kuweyt Dinar) ee loogu tala galay ka qeyb galka maal-gelinta Mashruuca Horumarinta Kalluumeysiga Badaha Waqooyi, waxaa lagu kala saxiixday Magaalada Kuweyt, taariikhda markay ahayd 10.9.1984.

Qod. 2aad

Heshiiskan wuxuu Dalka Jamhuuriyadda Dimoqraadiga Soomaaliya, ku yeelanayaa astaan Sharci ah.

Qod. 3aad

Xeerkan wuxuu dhaqan gelayaa isla marka uu saxiixo Madaxweynaha JDS, waxaana lagu soc saarayaa Faafinta Rasmiga ah ee Jamhuuriyadda.

Muqdisho, 2 May 1985

MADAXWEYNAHA J.D.S.
(Maxamed Siyaad Barre)

مرسوم رئيس الجمهورية رقم ١٨ بتاريخ ١٩٨٥/٥/٢
التصديق على اتفاقية قرض بين جمهورية الصومال الديمقراطية
والصندوق العربى للانماء الاقتصادى والاجتماعى .

رئيـــس الجمهـــوريـــة

بعد الاطلاع على الفقرة الخامسة من المادة ٦٧ والفقرة الرابعـــة من المـــادة ٨٢ من الدستور .

وعلى القانون رقم ٤٩ بتاريخ ٢٣ ديسمبر ١٩٨٤ المتعلق بتعديل الدستور .
وعلى القانون رقم بتاريخ والذى بموجبه وافق مجلس الشعب

على الاتفاقية المبنية فى هذا المرسوم .
ونظـــرا للضرورة الداعية الى التصديق على الاتفاقية .

يـــرســـــم

بمـــا هـــو آت :

المادة الاولى

تم التصديق على اتفاقية القرض بين جمهورية الصومال الديمقراطية والصندوق العربى للانماء الاقتصادى والاجتماعى للمساهمة فى تمويل مشروع تطويـــر الصيد البحرى فى الشمال ، الموقع عليها فى مدينة الكويت بتاريـــــخ ١٠ سبتمبر ١٩٨٤م.

المادة الثانية

تكون للاتفاقية قوة القانون فى قطر جمهورية الصومال الديمقراطية .

المـــادة الثالثة

يكون المرسوم سارى المفعول اعتبارا من تاريخ التوقيع عليه من قبل رئيس جمهورية الصومال الديمقراطية وسينشر فى الجريدة فى الرسمية للجمهورية .

مقدشو ، فى ٢ مايو ١٩٨٥

رئيس جمهورية الصومال الديمقراطية
محمد سياد برى

XEERKA Madaxweynaha JDS lambar 19, taariikh 6 Maa'o 1985 Meel-marin Axdiga heshiiska Lome' III oo ku dhexeeya Dalalka ACP iyo EEC ee Sannadka 1984.

MADAXWEYNAHA JDS

MARKUU ARKAY: Qod. 67aad. faqradda 5aad iyo Qod. 82aad, faqradda 4aad ee Dastuurka;

MARKUU ARKAY: Sharciga lambar 49 ee 23.12.1984. kuna saabsan wax ka bedelidda Dastuurka Jamhuuriyadda Dimoqraadiga Soomaaliya;

MARKUU ARKAY: Sharciga lambar 9, taariikh 6.5.85 oo Golaha Shacbigu ku oggolaaday heshiiska Xeerkan ku tilmaaman;

MARKUU TIXGELIYAY: In ay lagama maarmaan tahay in la meel-mariyo heshiiska Xeerkan ku tilmaaman;

WUXUU SOO SAARAYAA

Xeerka soo socda:

Qod. 1aad

Waxaa la meel-mariyay Axdiga Lome' III oo dhex maray Dalalka Afrika, Karaybi iyo Dalalka Badweynta Basifik (ACP) iyo Dalalka Beesha Dhaqaalaha ee Yurub (EEC), laguna kala saxiixday Magaalada Lome' ee Dalka Togo 8dii Disembar 1984.

Qod. 2aad

Axdigan wuxuu Dalka Jamhuuriyadda Dimoqraadiga Soomaaliya ku yeelanayaa astaan Sharci ah.

Qod. 3aad

Xeerkani wuxuu dhaqan gelayaa isla maalinta uu saxiixo Madaxweynaha JDS, waxaana lagu soo saarayaa Faafinta Rasmiga ah ee Jamhuuriyadda.

Muqdisho, 6 May 1985

DECREE no. 19 of 6 May 1985, Instrument of Ratification.

THE PRESIDENT

HAVING SEEN: Article 67 (para 5) and Article 82 (para 4) of the Constitution of Somali Democratic Republic;

HAVING SEEN: The law no. 49 of 23.12.1984;

HAVING SEEN: The law no 9, of 6.5.85, on the base of which the People's Assembly has approved third ACP-EEC Convention;

HAVING CONSIDERED: The necessity to ratify this convention;

HEREBY PROMULGATES

The Following Dacree:

Article I

The third ACP-EEC Convention (Lome' III), signed at lome on 8 December 1984, is hereby ratified.

Article II

This convention have the force of law in the territory of the Somali Democratic Republic.

Article III

This Decree shall come into force upon signature by the President of Somali Democratic Republic and shall be Published in Official Bulletin of the State.

Mogadishu, 6 May 1985

THE PRESIDENT OF S.D.R.
(Mohamed Siad Barre)

MAXKAMADDA G. W/GALBE)D HARGEYSA

UJEEDDO:- Digireeto cusboonaysiin Jeeg Wareega oo lumay lambar yahay 0028577.

Guddoomiyaha Maxka/da G. W/Galbeed ee Hargeysa

MARKUU ARKAY: Arjiga uu soo qortay Jaalle Cabdiraxmaan Axmed Nuur, ee ku taariikheysan 26.3.85 uuna ku codsanaayo cusboonaysiinta Jeegga Wareega ee sare ku qoran oo lumay;

MARKUU ARKAY: Caddaynta Bangiga ee Lambarkeedu yahay 0372 ee taariikhdeeduna tahay 5.3.85, ayna ku caddeeyeen in Jeeggaas Lambarkiisu sax yahay lana sameeyey taariikhdu markay ahayd 9.2.85 Lacagtiisuna tahay 50.000/= Shillin, lagana sameeyey Laanta Burco, kuna qoran yahay Cabdiraxmaan Axmed Nuur;

MARKUU ARKAY: Taarka Faafinta ah ee Bangigu Laamihiisa u wada diray ee taariikhdiisu tahay 4.3.1985.

MARKUU ARKAY: Qod. 69-70 ee X.L.Y. 2 ee soo baxay 9.9.65kii;

MARKAY ARAGTAY: In Lacagta Jeeggaas uu ku qoran yahay iskana leeyahay Cabdiraxmaan Axmed Nuur.

WUXUU GO'AAMIYEY

In la kansal gareeyo Jeegga Wareega ee Lumay oo Lambarkiisu yahay 0028577, loona cusboonaysiiyo Cabdiraxmaan Axmed Nuur, cusboonaysiintana gacanta laga saaro Jaallahaas ama cid awood buuxda ka haysata, muddo 15 casho gudahood ah ka dib maalinta Go'aanka laga soo saaro Faafinta Rasmiga ah ee Laan-Madaxtooyada J.D.Soomaaliya.

WAXAA LA FARAYAA

Maamulaha Bangiga Ganacsiga ivo Kaydka Laanta Hargeysa, in lagu dhejiivo Nuqulka Go'aanka Bangiga Irdihiisa si ciddii haysata Jeeggaas lumay ee kor lagu kansal gareeyey uga soo qortaan cabasho had dii ay doonaan.

Hargeysa, 1.3.1985

Guddoomiyaha Maxka/da G. W/Galbeed ee Hargeysa

(Ibraahin Faarax Maxamed)

Kaalinyaha Maxkamadda G. W/Galbeed Hargeysa

MAXKAMADDA GOBOLKA BANAADIR
GUDDOOMIYAHA MGB

HADDUU ARKAY: Dacwadda kor ku qoran;

HADDUU ARKAY: In Jeeg Wareega oo dhumay oo lambarkiisu ahaa 10103 lagana soo saaray Bangiga Ganacsiga iyo Kaydka Soomaaliyeed Liinta Saddexaad kuna qoran lacag dhan 8.000/= uu iskalahaa Jaalle Ibraahim Aadan Maxamed sida ku cad warqadda Lam. ahaa 00075 taariikh 28.4.85 ee Bangiga Ganacsiga iyo Kaydka Soomaaliyeed Laanta Saddexaad;

WUXUU AMRAYAA

In la baabi'iyo (Ammortamento) Jeegga Wareega Lam. 10103 oo ku qoran magaca Ibraahim Aadan Maxamed ayna ku jirto Sh.So. 8.000/=.

WUXUU FASAXAYAA

In Bangiga Ganacsiga iyo Kaydka Soomaaliyeed Liinta Saddexaad u badalo J/Wareega ee kor ku tilmaaman Jaalle Ibraahim Aadan Maxamed una sameeyo mid la mid ah kadib markay ka soo wareegto muddo aan ka yarayn 15 maalmood, laga bilaabo maalinta lagu daabaco Faafinta Rasmiga ah ee JDS, haddii inta ka horaysa aan wax ishortaag ah laga keenin.

Muqdisho, 29.4.1985

GUDDOOMIYAHA MGB
(Dr. Cabdullaahi Maxamed Maax)

MAXKAMADDA GOBOLKA BANAADIR
GUDDOOMIYAHA MGB

HADDUU ARKAY: Dacwadda kor ku qoran;

HADDUU ARKAY: In Buug Kayd dhumay oo lambarkiisu ahaa 19034 lagana soo saaray Bangiga Ganacsiga iyo Kaydka Soomaaliyeed Laanta Xarunta kuna qoran lacag dhan Sh.So. 11.802,00/= uu iskalahaa Jaalle Xabiibo Xayle Cali sida ku cad warqadda lambarkeedu yahay 003703 taariikhdeedu 24.4.85 ee Bangiga Ganacsiga iyo Kaydka Soomaaliyeed Laanta Xarunta;

WUXUU XEERIYEY

In la baabi'iyo (Ammortamento) Buug Kayd Lam. 19034 oo ku qoran magaca Xabiibo Xayle Cabdi ayna ku jirto Sh.So. 11.802,00/=.

WUXUU FASAXAY

In Bangiga Ganacsiga iyo Kaydka Soomaaliyeed Laanta Xarunta u badalo Xabiibo Xayle Cabdi Buugga Kaydka ee kor ku tilmaaman una sameeyo mid la mid ah kadib markay ka soo wareegto muddo aan ka yarayn 30 maalmood maalinta Go'aanka lagu daabaco Faafinta Rasmiga ah ee JDS, haddii inta ka horaysa aan ishor taag laga keenin.

Muqdisho. 24.4.1985

GUDDOOMIYAHA MGB
(Dr. Cabdullaahi Maxamed Maax)

MAXKAMADDA GOBOLKA TOGDHEER BURCO

UJ:— Baafin Jeegga Wareega ee Lam· 0030691

GUDDOOMIYAHA M· G. TOGDHEER BURCO

HADDUU ARKAY: Dacwadda ku saabsan Baafinta Jeegga Wareega ee lumay Lr· 0030691;

HADDUU ARKAY: Ogaysiinta Bangiga Ganacsiga iyo Kaydka L. Burco ee Tr· 4.5.85;

HADDUU ARKAY: Qod· 69,65,) Lumid Jeegga Wareega ee Lam. yahay 0030691 kuna jirtay Lacagta dhan Sh.So. 30,000/= kuna qoran tahay J.le Shuun Yuusuf Maxamed.

WUXUU AMRAYAA

In loo cusbooneysiiyo Jeegga kor ku xusan J.le Shuun Yuusuf Maxamed markii ay ka soo wareegto 20 casho gudahood laguna shaaciyo X. Faafinta Rasmiga ah ee Dawladda·

WAXAA LAGA CODSANAYAA

In Jeegga cusub ee la samayn doono gacanta laga saaro Shuun Yuusuf Maaxmed iyadoo la sugayo muddada kor ku xusan·

Burco, **4.5.1985**

GUDDOOMIYAHA M· G. TOGDHEER BURCO
(Dr. Abuukar Islow Cumar)

MAXKAMADDA GOBOLKA TOGDHEER BURCO

UJ:- Baafin Jeegag Lumay
Guddoomiyaha Maxkamadda G. Togdheer Burco

HADDUU ARKAY: Dacwadda ku saabsan Baafin Jeegagga Wareega ee Lumay;

HADDUU ARKAY: Ogaysiinta Bangiga Ganacsiga iyo Kaydka Laanta Burco taariikh 19.5.85;

HADDUU ARKAY: Qod. 69,65,-) Lumid Jeegagga Wareega ee Lr. 1— J/W. 0306115, kuna jirtay Sh.So. 100,000/= kuna qorayd Xalwo Salaad Sahal L/Dh. Mareeb, 2—J/W. 0031201 Sh. So. 40,000/= kuna qoran Maxamed Cali Jaamac L/Burco Tr. 6.5.85, 3—J/W. 0247297 Sh.So. 100,000/= kuna qoran J.le Cabdullaahi Jaamac Xuseen L/Xamar. 4— J/W. 0034844 Sh.So. 50,000/= kuna qoraa Cabdi Jaamac Faduul L/Berbera.

WUXUU AMRAYAA

In loo cusbooneysiiyo Jeegaggaas kor ku qoran J.le Saynab Cali Xayle markii ay ka soo wareegto muddo 20 casho ah gudahood laguna Shaaciyo Xafiiska Faafinta Rasmiga ah ee Dawladda

WAXAA LAGA CODSANAYAA

In jeegaggaas cusub ee la samayndoono gacanta laga saaro J.le Saynab Cali Xayle iyadoo la sugayo muddada kor ku xusan.

Burco, 20.5.1985

K/S. Guddoomiyaha Max. G. Togdheer Burco
(Cabdullaahi Xasan Maxamed)

KAALIYAHA
(Jaamac Cabdullaahi Bil)

MAXKAMADDA GOBOLKA BANAADIR
GUDDOOMIYAHA MGB

HADDUU ARKAY: Dacwadda kor ku joran;

HADDUU ARKAY: In Buug Kayd dhumay oo lambarkiisu ahaa 3680 lagana soo saaray Bangiga Ganacsiga iyo Kaydka Soomaaliyeed Laanta 5aad kuna qoran lacag dhan Sh.So. 73.140/= uu iskalahaa Ismaaciil Xaaji Faarax sida ku cad warqadda lambarkeedu yahay 000032 taariikhdeedu 28.5.85 ee Bangiga Ganacsiga iyo Kaydka Soomaaliyeed Laanta 5aad;

WUXUU XEERIYEY

In la baabi'iyo (Ammortamento) Buug Kaydka Lam. 3680 oo ku qoran magaca Icmaaciil Xaaji Faarax ayna ku jirto Sh.So. 73.140/=.

WUXUU FASAXAY

In Bangiga Ganacsiga iyo Kaydka Soomaaliyeed Laanta 5aad ay baabi'iso Buugga Kaydka, ee kor ku tilmaaman una sameeyo mid la mid ah kadib markay ka soo wareegto muddo aan ka yarayn 30 maalmood maalinta Go'aanka lagu daabaco Faafinta Rasmiga ah ee JDS, haddii inta ka horaysa aan ishortaag laga keenin.

Muqdisho, 28.5.1985

GUDDOOMIYAHA MGB
(Dr. Cabdullaahi Maxamed Maax)

MAXKAMADDA GOBOLKA BANAADIR

GUDDOOMIYAHA MGB
HADDUU ARKAY: Dacwadda kor ku qoran;

HADDUU ARKAY: In Buug Kayd dhumay oo lambarkiisu ahaa 15417 lagana soosaaray Bangiga Ganacsiga iyo Kaydka Soomaaliyeed Laanta Saddexaad kuna qoran lacag dhan Sh.So. 2.124,00/= uu iskalahaa Caasho Yuusuf Cabdi sida ku cad warqadda lambarkeedu yahay 000276 taariikhdeedu 29.4.85 ee Bangiga Ganacsiga iyo Kaydka Soomaaliyeed Laanta Saddexaad;

WUXUU XEERIYEY

In la baabi'iyo (Ammortamento) Buug Kayd Lam. 15417 oo ku qoran magaca Caasho Yuusuf Cabdi ayna ku jirto Sh.So. 2.124.00/=.

WUXUU FASAXAY

In Bangiga Ganacsiga iyo Kaydka Soomaaliyeed Laanta Saddexaad u badalo Caasho Yuusuf Cabdi Buugga Kaydka ee kor ku tilmaaman una sameeyo mid la mid ah kadib markay ka soo wareegto muddo aan ka yarayn 30 maalmood maalinta Go'aanka lagu daabaco Faafinta Rasmiga ah ee JDS, haddii inta ka horaysa aan ishortaag laga keenin.

Muqdisho, 30.4.1985

GUDDOOMIYAHA MGB
(Dr. Cabdullaahi Maxamed Maax)

MAXKAMADA GOBOLKA TOGDHEER BURCO

MGT/26/85

BAAFIN JEEG LUMAY

GUDOOMIYAHA MAXKAMADA Gobolka Togdheer (Burco)

HADDUU ARKAY: Dacwada ku saabsan jeegga ee lumay.

HADUU ARKAY: Ogaysiinta Bangiga Ganacsiga iyo Kaydka L. Burco

HADDUU ARKAY: Qod. 69, D L (9 — 69 lumid jeega wareega ee Lam. yahay 196308 Tr. la sameeyey lama yaqaan kuna jirto Sh. So. 100.000 kuna qoran yahay Jaalle Cabdiraxmaan Maxamed Yuusuf lagana sa meeyey L. xarunta Muqdisho.

WUXUU AMRAYAA

In loo cusboonaysiiyo jeegaas kor ku xusan Jaalle Cusmaan Muuse Samatar markii ay ka soo wareegtay muddo 20 Bari ah laguna shaaciyo faafinta Rasmiga ah ee Dawladda.

WAXAA LAGA CODSANAYAA

In jeegaas wareega ee cusub la samayn doono ga canta laga saaro Jaalle Cusmaan Muuse Samatar iyadoo la sugayo mudada kor ku xusan.

Burco 31. 1. 1985

GUDDOOMIYAHA MAXKAMA G TOGDHEER ee burco

DR ABUUKAR ISLOW CUMAR

# FAAFINTA RASMIGA AH

الجريـدة الرسميـة

Sannadka 13aad Muqdisho 1 Jenaayo 1985 L. 6

JAMHUURIYADDA DIMOQRAADIGA SOOMAALIYA

لجمهورية الصومال الديمقراطية

FAAFIN BIL SOO BAXA جريدة شهرية

**QIIMADU**: waa 5 shilin lambar waliba — **RUKUNKA**: Sanadki waa Sh. 100 Soomaaliya gudeheeda - dibaddedana waa Shs. 300. Rubunka la weydiisto waqtiga loo gooyey wuxuu ka bilabmaa 1 Janaayo. Qiimaha qortitaanku F. R. halkii sadar iyo waxii ka yar waa 2 laba Sh. Rukunka iyo qoritaanku waxaa la weydiistaa Laanta Maamulka Faafinta Rasmiga ah Lacagta waxaa lagu bixinayaa Xafiiska Canshuuraha ee Wasaaradda Lacagta.

K O O B N I I N

QAYBTA KOOWAAD

SHARCI

W. M.

QAYBTA LABAAD

X E E R

XEER-SHARCI L. 3 ee 23 Maajo 1985, Canshuurta wax soo saarka. Bog; 347

DECREE N. 3 on 23 May 1985, Excise Tax Act. » 356

XEER MADAXWEYNAHA JDS, L. 20 ee 25 Maajo 1985, Billad Maar oo Waddanimo. » 364

XEER MADAXWEYNAHA JDS, L. 21 ee 25 Maajo 1985, Billad Qalin Waddanimo ah. » 365

Wakaaladda Madbacadda Qaranka

XEER MADAXWEYNAHA JDS, L. 22 ee 25 Maajo 1985, Billad Maar ah oo Waddanimo. » 366

XEER MADAXWEYNAHA JDS, L. 23 ee 30 Maajo 1985, Akademiyaha Sare ee Straateejiyada Sayid Maxamed Maxamed Cabdulle Xasan. » 367

QAYBTA SADDEXAAD

TALOOYIN ISGAARSIIN OGEY, & WIXII LA MID AH

SOCIETA' INCREMENTO PRODITTI AGRICOLI —S.I.P.A —S.P.A. Ogeysiis Isugu yeerid Shir Caadi ah. » 370

SOCIETA' INCREMENTO PRODITTI AGRICOLI —S.P.A. —S.P.A. Aviso di Convocazione di Assemblea Ordinaria L. 146 » 371

HORSEED —S.P.A. Ogeysiis Isugu yeeird Shir Caadi ah L. 147 » 372

HORSEED —S.P.A. Ovviso di Convocazione Assemblea Ordinaria L. 147 » 373

GODIR SPORT — S.P.A.— Ogeysiis Isugu yeerid Shir Caadi ah L. 148 » 374

SHIRKADDA BEER TACABKA LUUL — S.P.A. Ogeysiis Isugu yeerid Shir Caadi ah, L. 149 » 375

SHIRKADDA BEER TACABKA LUUL — S.P.A. Avviso di Convocazione Assemblea Ordinaria L. 149 » 376

QAYBTA LABAAD

XEER

Xeer-Sharci L. 3 ee 23 May 1985, Canshuurta Wax soo Saarka.

MADAXWEYNAHA JDS

ISAGOO ARKAY: Qod. 69 ee Dastuurka J.D.S;

ISAGOO ARKAY: Sharciga Lr. 3 ee 10.1.78;

ISAGOO ARKAY: Sharciga Lr. 46 ee 26.9.81;

ISAGOO ARKAY: Sharciga Lr. 5 ee 5.11.66;

ISAGOO ARKAY: Sharciga Lr. 5 ee 11.12.68;

ISAGOO ARKAY: Sharciga Lr. 12. ee 1.8.66;

ISAGOO TIXGELIYAY: Baahida loo qabo Abuuridda Canshuurta Wax Soo Saarka;

ISAGOO DHAGAYSTAY: Golaha Wasiirada;

IYADOO UU SOO EEDIYEY: Wasiirka Wasaaradda Maaliyadda;

WUXUU SOO SAARAYAA

Xeer-Sharciga soo socda:

Qod. 1aad

QEEXID

Erayadan soo socda ee ku jira sharcigan micnahoodu waa kulwan soo socda:

Cashuur: Cashuurta Wax soo saarka;

Lagu farsameeyay gudaha: wax soo saarka idil ahaan ama qayb ahaanba lagu farsameyey dalka gudihiisa oo ay ka mid yihiin habka isu duwidda, isku xirxirka dalo ku cabeynta, qasacyadeynta, dib u buuxinta ama hab kasta oo kale;

Wasiirka: Wasiirka Maaliyadda.

Qod. 2aad

1. Cashuurta waxaa la saarayaa badeecooyinka Dalka gudahiisa lagu farsameeyey oo ku magacaaban Ta'beellaha ku lifaaqan.

2. Marka Badeecooyinkaas Dibadda laga keeno isla tacriifada cashuurta wax soo saarka ee ku magacaaban Tabeelaha ayaa la saarayaa waxaana lala qaadayaa cashuurta Furdada.

3. b) Cashuurta waxaa lagu qaadi doonaa tacriifooyinka badeeco kasta ku hor qoran oo Ta'beelahan ku jirta.

t) Cashuurta Badeecooyinka Dibadda laga keenay waxaa lala qaadayaa cashuurta Furdada, badeecooyinka Dalka gudahiisa lagu farsameeyey waxaa la qaadayaa marka ay ka baxeyso badeecaddu xerada Warshadda.

Qod. 3aad

QIIMAHA LA CASHUURAYO

Qiimaha Cashuurta lagu qaadayaa wuxuu noqonayaa qiimeynta furdadaha ee soo dejinta badeecadda iyo qiimaha farsameeyuhu ku siiyo Jumladlaha ama wakiilka Ganacsiga ama cid kasta oo kale, sida ay caddeyso Wasaaradda ay khuseyso haddii badeecadda Dalka gudahiisa lagu farsameeyey.

Qod. 4aad

MAAMULKA

Waaxda Furdooyinka ama Xafiisyadeeda Gobolada iyo Degmooyinka ayaa ka mas'uul ah Maamulka Cashuurta Badeecadda Dibadda laga keeno, Waaxda Cashuuraha Beerriga ama Xafiisyadeeda Gobollada iyo Degmooyinka ayaa Mas'uul ka ah Maamulka Cashuurta Badeecadda Dalka gudahiisa lagu farsameeyey.

Qod. 5aad

WAAJIBKA XOG SIINTA

1. Wasaaradda Warshadaha ama Hey'ad kasta oo Dawli ah oo mas'uul ka ah oggolaanshaha bixinta shatiga ama abaabulka Warshad kasta waa inay soo ogeysiisaa Waaxda Cashuuraha Berriga ama Xafiisyadeeda Gobollada iyo Degmooyinka, mar kasta oo oggolaasho ama shati la siiyo, oo ku saabsan Magaca qofka oggolaashaha ama shatiga la siiyey, meesha loogu hagaagayo, meesha Warshadda ku taallo, nooca wax soo saarka iyo waqtiga la filayo wax soo saarka.

2. Qof kasta ha ahaado shakhsi ama qaanuuni, Dawli ama Rayid, ee la siiyo oggolaasho ama shati inuu ku farsameeyo badeeco, waa inuu Waaxda Cashuuraha Berriga ama Xafiisyadeeda Gobollada iyo Degmooyinka si deg deg ah u soo ogeysiiyaa helitaanka oggolaashaha ama shatiga, ee ku saabsan halka Warshadda lagu dhisi doono, meesha loogu hagaagayo, nooca badeecadda la soo saari doono iyo qiyaasta waqtiga wax soo saarka la billaabi doono.

3. Marka uu wax soo saarka billaabmo qofkaasi waa inuu ku soo ogeysiiyaa Waaxda Cashuuraha Berriga ama Xafiisyadeeda Gobollada iyo Degmooyinka bil gudaheeda laga billaabo bilowga wax soo saarka, waqtiga dhabta ah ee wax soo saarka, nooca wax soo saarka, isku celceliska wax soo saarka maalmeed, tirada Shaqaalaha iyo qiimaha lagu siiyo Jumladlaha ama wakiilka Ganacsiga.

Qod. 6aad

XUSUUS HAYNO

1. Hey'ad kasta oo soo saarta badeeco ay ku waajibto cashuurtani, waa iney haysataa Qoraallo iyo xusuus hayno sax ah oo muujinaya:

b) Alaabta ceyriin ee la soo qaday, inta laga isticmaalay iyo haraaga bakhaarka ku jira;

t) Inta la farsameeyey iyo inta farsamadeeda dhiman tahay;

j) Inta la gaday iyo haraaga bakhaarka ku jira;

x) Kharajka iyo Dakhliga;

kh) Cashuurta ku waajibtay iyo tan la bixiyey.

Qod. 7aad

QAANSHEEG

Gadidda Badeeco kasta oo lagu farsameeyey Dalka gudahiisa oo ay Cashuuri ku waajibto, cashuur bixiye kasta waxaa waajib ku ah inuu sameeyo Qaansheeg kuna kala muujiyo cashuurta waajibtay iyo sicirka.

Qod. 8aad

BIXINTA CASHUURTA

Cashuurta ku waajibtay badeecooyinka Gudaha lagu farsameeyey waa in la bixiyaa bil kasta Tobanka beri ee u horreeya Gudahooda Bisha xigta.

Qod. 9aad

CADDEYMO

Cashuur bixiyuhu waa inuu keenaa caddeyn muujineysa tirada badeecadda laga soo raray bishii hore, inta badeeco la farsameeyey bisha, inta la gaday iyo haraaga bakhaarka ku jira, ayna la socoto sicirka iyo wixii warar ee kael oo ay Waaxdu u baahato isla markaasna bixiyaa Cashuurta ku waajibtay.

Qod. 10aad

HUBINTA CASHUURTA

1. Waaxda Cashuuraha Dorriga ama Xafiisyadeeda Gobollada iyo Degmooyinka waa inay hubiyaan cashuurta la bixinaayo haddii:

b) Caddeynta lagu keenin waqtiga u go'an ama aanay dhammeystirneyn sida waafaqsan Qodobka 9aad.

t) Aan la haynin Qoraalio iyo Xusuus hayno ama kuwa la haya aanay dhammeystirneyn sida lagu sheegay Qodobka 6aad.

2. Waaxda Cashuuraha Berriga ama Xafiisyadeeda Gobollada iyo Degmooyinka waa iney hey'adda ama qofka ogeysiiyaan hubinta iyo waxa lagu saleeyey.

3. Cashuurta la hubiyey waa in la bixiyaa, haddii aaney hey'addu ama qofka wax dacwo ah ka keenin bil gudaheeda laga biilaabo maalinta ogeysiiska la gaarsiiyey.

Qod. 11aad

DACWADAHA

1. b) Cashuur bixiyuhu xaq buu u leeyahay inuu ka dacwoodo hubinta ay ku sameysay Waaxda Cashuuraha Berriga ama Xafiisyadeeda Gobollada iyo Degmooyinka sida waafaqsan Qod. 10aad ama Cashuur saaridda waafaqsan Qod. 2aad.

t) Dacwooyinka lagu sheegay Xarafka kore ee (b) waxaa lagu dhaqayaa isla habka iyo nidaamka ku qoran sharciga Cashuuraha toosan Xeer No. 5 ee 5.11.1966.

2) Dacwooyinka ku saabsan Cashuuraha ay uruuriyaan Waaxda Furdooyinka iyo Xafiisyadeeda Gobollada iyo Degmooyinka ee lagu qaaday sharcigan waxaa lagu dhaqayaa si waafaqsan Xeerka Furdooyinka.

Qod. 12aad

BAARIDDA QORAALADA IYO DIIWAANADA

1. Waaxda Cashuuraha Berriga ama Xafiisyada Gobollada iyo Degmooyinka, si ay u hubiyaan cashuur-

b) Inay weydiistaan qofka inuu ku keeno waqti go'an Diiwaan xisaabeed kasta, Xisaab xirka Miisaaniyadda, iyo dokumenti kasta oo kale ee loo arko lagama maarmaan;

t) Inay ka codsadaan qeybaha Ilaalinta Cashuuraha Booliska ama Shaqaalaha Waaxdaba iney soo kormeeraan rug kasta oo lagama maarmaan u ah hubinta cashuurta waajibtay.

2. Waaxda Cashuuraha Berriga ama Xafiisyadeeda Gobollada iyo Degmooyinka waa inay ku sameeyaan nooc kasta oo kormeer ah rugta Warshadda si ay u hubiyaan habsami u fulinta sharcigan.

Qod. 13aad

BIXIN LA'AANTA CASHUURTA

Haddii qofka Cashuurta lagu leeyahay bixin waayo cashuurta ku waajibtay ama bixin waayo ka hor maalinta ugu dambeysa waqtiga cashuur bixinta ee ku xusan qodobka 8aad wuxuumuteysanayaa inuu bixiyo cashuurta iyo Ganaax dhan 10%, cashuurta aan la bixin bil kasta ama qeyb ka mid ah bisha ee muddada riyaan Waaxda Furdooyinka iyo Xafiisyadeeda Gobol cashuur bixintu daahday ama inuu bixiyo ugu yaraan Sh.So. 1.000/=.

Qod. 14aad

LACAG CELIN

1. Qofka Cashuur bixiyaha ah codsi buu u soo sameysan karaa Waaxda ay Khuseyso muddada lagu sheegay qodobka 17aad oo ah lacag celinta cashuurta lagu baxshay.

b) Khalad ahaan;

t) Arrin la xiriirta badeecadda cashuurtu ku waajibtay ee Dibadda laga keenay ama lagu farsameeyey Dalka gudahiisa kaddibna loo dhoofiyey Dibadda, furdaduna ay hubisay ama xa-

2. Haddii Waaxda ay khuseysaa ku Qanacdo in codsaduhu xaq u leeyahay lacag celinta, waa inay xnartaa lacag celinta cashuurta laga qaaday badeecadaas.

Qod 15aad

DAMBIYADA

1. Cashuur bixiye kasta oo fulin waaya awaamiirta ku xusan Qodobbada 5, 6, 7 iyo 9 wuxuu galayaa dambi, waxaana ku waajibayaa Ganaax aan ka yareyn Sh.So. 3.000/= kana badneyn Sh.So. 12.000/=.

2. Cashuur bixiye kasta oo isku daya inuu cashuurta kuna baxsado warbixin been ah ama keeni waaya xisaab celin ama keena xisaab celin been ah ama haysta diiwaano been ah ama sabab kasta oo kale, wuxuu galayaa dambi, waxaana waajib ku ah Ganaax aan ka yareyn laba jeer kana badneyn 12 jeer ee Cashuurta aan la bixin.

3. Dambiyada Xeerkan waxaa lagu dhaqayaa Sharciga No. 12 ee 1.8.1969.

Qod. 1 aad

KHASAB KU URUURINTA

Khasab ku uruurinta cashuurtan iyo Ganaaxyadeeda waxaa lagu dhaqayaa Xeerka No. 5 ee 5.11.1966.

Qod. 17aad

GUBASHADA XUQUUQDA IYO AWOODAHA

1. Gubashada iyo Awoodaha ku saabsan uruurinta Cashuurta ku waajibtay badeecooyinka Dibadda laga keenay waxaa lagu dhaqayaa shuruucda Furdooyinka.

2. Awoodda Waaxda Cashuuraha Berriga ee ku saabsan Cashuurtan iyo Ganaaxa waxay ku gubaneysaa shan Sano laga billaabo Taariikhda Cashuurta iyo Ganaaxa ay waajibeen.

3. Sidaas oo kale, Xaqa uu ku leeyahay Cashuurbixiyuhu inuu ku doodo lacag celin wuxuu gubanayaa kaddib isla muddada lagu sheegay qaybta (2) ee Qodobkan.

Qod. 18aad

BURRIN SHARCI

Waxaa la buriyey Qodobka 24 iyo 25 ee Lifaaqa «A» Sharci No. 3 ee 10.1.78 kuna saabsan Cashuurta wax soo saarka iyo Lifaaqa «B» ee Xeer Sharci No. 46 ee 26.7.81 xubinta ku saabsan Sigaarka iyo Tarraqa, Qodobka 25, 26, 27 iyo 28 ee Sharciga No. 5 ee 11.12.68 iyo Sharci kasta ee kan ka soo horjeeda ama aan la socon karin.

Qod. 19aad

DHAQAN GELINTA

Xeer Sharcigan wuxuu dhaqan galayaa maalinta uu saxiixo Madaxweynaha J.D.S., waana in loo gudbiyo Golaha Shacbiga si uu Sharci ugu rogo.

Muqdisho, 23 May 1985

MADAXWEYNAHA J.D.S.
(S/Gaas Maxamed Siyaad Barre)

## CASHUURTA WAX SOO SAARKA

### LIFAAQA «A»

| BADEECADDA | BOQOLAYDA |
|---|---|
| 1. Nacnaca, Xanjada iyo wixii la mid ah | 15% |
| 2. Cabitaanka Miiran, Malmalaadada iwm. | 15% |
| 3. Shogleed, Xalwo lwm. | 15% |
| 4. Liquoric iyo cabitaanka kale ee macaan | 12% |
| 5. Frutta Sciroppata iyo dhecaanka Frutada la maceeyay | 10% |
| 6. Keega, Buskudka iyo wixii la nooca | 5% |
| 7. Waxyaabaha kale ee Sonkori ku darsan tahay | 10% |
| 8. Tarraq | 80% |
| 9. Sigaar | 100% |
| 10. Shaampoo, Saabuun iyo Saliidda Timaha | 20% |
| 11. Sonkor | 60% |
| 12. Biyaha Macdanta leh | 10% |
| 13. Khamri | 80% |
| 14. Aalkoolka saafiga ah | 100% |
| 15. Yaanyo iyo Khal | 10% |
| 16. Alaabta Dhismaha | 15% |
| 17. Maqaarka Farsamaysan iyo Alaabta laga sameeyo | 15% |
| 18. Barafuun | 20% |
| 19. Isbuunyada iyo wixii la nooc ah | 15% |
| 20. Maacuun | 10% |
| 21. Dhar | 5% |
| 22. Hilib | 5% |
| 23. Kaluun | 5% |
| 24. Saliid | 5% |
| 25. Baasta | 5% |
| 26. Caano iyo Caanaha wixii ka soo baxa | 5% |
| 27. Kartuun, Caag iyo wixii la nooc ah | 5% |
| 28. Qalabka Guryaha iyo Xafiisyada | 5% |
| 29. Qalabka Dayactirka | 5% |
| 30. Alaaboyinka kale ee lagu Farsameeyo Dalka si gaar ah loo cayimin | 5% |

DECREE No. 3 on 23 May 1985. Excise Tax Act.
THE PRESIDENT OF THE S.D.R.

HAVING SEEN: Article 69 of the Constitution of the S.D.R;

HAVING SEEN: Law No. 3 of the 10.1.1978;

HAVING SEEN: Law No. 46 of 26.9.1981

HAVING SEEN: Law No. 5 of 11.12.1968;

HAVING SEEN: Law No. 5 of 5.11.1966;

HAVING SEEN: Law No. 12 of 1.8.1966;

CONSIDERING: The necessity to establish the excise tax Act;

ON THE PROPOSAL: Of the Minister of Finance;
HAVING HEARD: The Council of Ministers.

PROMULGATES

the following Law:

Article 1

DEFINITIONS

In this Act the following means:
Tax: Excise Tax levied by this Act;
Manufactured locally: Production carried out wholly or partly in Somalia including assembling process, packing, bottling, canning, refilling or any other process;

Minister: The Minister of Finance.

Article 2

CHARGEABLE GOODS

1) Tax shall be charged on goods manufactured locally mentioned in schedule below.

2) When such goods are imported the same rate of excise tax mentioned in the schedule below shall be imposed in addition to customs duties.

3) a) Tax shall be levied according to the rate mentioned against each commodity in the schedule below.

b) Tax shall be collected on imports when goods are cleared for customs purposes and on goods manufactured locally at time such commodity is leving factory premises.

Article 3

TAXABLE VALUE

The price on which tax shall be levied is the customs valuation to imports and price charged by manufacturer to the wholesaler or agent or any other person as specified by Ministry concerned in case of goods manufactured locally.

Article 4

ADMINISTRATION

The Director Customs and his staff shall be responsible for the administration of the Tax on imports and Director Inland Revenue Department and his staff shall be responsible for the administration of tax on locally manufactured goods.

Article 5

OBLIGATION TO PROVIDE INFORMATION

1) The Ministry of Industry or any other governmental unit responsible for approving or issuing licences for establishment of any industry shall inform the Inland Revenue Department wherever a napproval is given or licence is issued, about the name of the person to whom approval or licence is given, his address, location of factory, type of product and expected date of production.

2) Every person physical or juridical to whom an approval or licence to manufacture any commodity is given, shall inform the Inland Revenue Department im-

mediately on rceeipt of the approval or licence, about the place where factory will be established, his address, type of product to be manufactured and the approximate date when production will start.

3) When production starts such person has to notify the Inland Revenue Department within a month from date production commences, of the exact date of production, type of product, average daily production, number of shifts, number of employees and sales price of his product to wholesaler or agent.

Article 6

RESERDS

1) Every person producing a commodity subject to tax shall keep accurate and up to date records showing:

a) Raw materials purchased, quantity consumed and balance in store.
b) Quantity produced and semi produced
c) Quantity sold and balance in store.
d) Expenditure and revenue.
e) Tax due and tax paid.

Article 7

INVOICE

On sale of any commodity produced locally subject to tax, every taxable person shall issue an invoice and shall show tax payable under this Law separate from price.

Article 8

PAYMENT OF TAX

Tax due on commodities manufactured locally shall be paid by taxable person every month within the first ten days of the following month.

Article 9

RETURNS

A return shall be made by the taxable person with the payment of tax showing quantity of goods carried forward from last month, quantity produced during the month, quantity sold and quantity in stores in addition to price and any other information asked for by the Inland Revenue Department.

Article 10

ASSESSMENT OF TAX

1) The Inland Revenue Department shall assess the tax payable if:

a) return is not filed in time or it is not complete according to article 9.

b) Records are not kept or the records kept are not complete as specified in article 6.

2) The Inland Revenue Department shall notify the enterprice concerned with the assessment and the basis on which it is made.

3) The tax assessed shall be payable if taxable person did not appeal within a month from date on which assessment is received.

Article 11

APPEALS

1) a) The taxpayer has the right to appeal against made by Inland Revenue Department according to article 10 or tax levied according to article 2.

b) Appeals under (a) above shall be made and dealt with in same manner and procedure specified in Body of Laws No. 5 of 5.11.66.

2) Appeals against tax collected by customs Department under this Law shall be made and dealt with in accordance with provisions of Customs Law.

Article 12

EXAMINATION OF RECORDS

1) The Inland Revenue Department may for ascertaining the tax liability of any taxable person:

a) Order the person to bring for examination at such time and place as the Department may specify any book of accounts, balance sheets or any other document or record which the Department considers necessary.

b) Ask the fiscal police or the staff of the Department to inspect any business premises and examine any record they deem necessary for ascertainment of tax liability.

2) The Inland Revenue Department shall make any sort of supervision in factory premises to ensure proper execution of this law.

Article 13

FAILURE TO PAY TAX

Where a taxable person fails to pay the tax due on or before the last day on which it is payable unnder article 8 he shall be liable to pay in addition to the tax a penalty of 10% of the unpaid tax every month or part of the month of the period of delay of payment with a minumum of 1,000/ shs.

Article 14

REFUNDOF TAX

1) A taxable person may make an application to the Department concerned within the prescribed period in article 17 for refund of tax paid:

a) In error

b) In respect of taxable goods imported or manufactured in Somalia and subsequently exported under Customs control.

2) Where the Department cocerned is satisfied that the applicant is entitled to a refund it shall order the refund of the tax due on such goods.

Article 15

OFFENCES

1) Any taxable person who fails to comply with the provisions of articles 5, 6, 7 and 9 shall commit an offence and shall be liable to a fine not less than 3.000 and not exceeding 12,000.

2) Any taxable person who attempts to evade the tax through given false information or submitting no return or false return, keeping false books or any other cause shall commit an offence and shall be liable to a fine not less than twice and not more than twelve times the amount of unpaid tax.

3) Offences under this Act shall be governed by Law No. 12 of 1.8.1966.

Article 16

ENFORCEMENT OF COLLECTION

Enforcement of collection of tax and related fines shall be governed by law No. 5 of 5.11.1966.

Aticle 17

STATUTE LIMITATION

1) The statute limitation for collection of tax under this act on goods imported shall be governed by the provisions of customs Law.

2) The right of the Inland Revenue Department to take [illegible]arding collection of tax and [illegible] shall lapse after five years from date that tax and fine become due.

3) Likewise the right of the taxable person to claim refund shall lapse after the same period in paragraph (2) of this article.

Article 18

AEROGATION

Articles number 24 and 25 of Schedule «A» of Law No. 3 of 10.1.78 dealing with excise tax, Schedule «B» of Law No. 46 of 26.7.81 which relates to tax on cigrat-

tes and matches, articles 25, 26, 27,, and 28 of Law No. 5 of 11.12.1968 and any other Law which contradicts with this law are abrogated.

Article 19

COMMENCEMENT

This law shall come into force on the day signed by the President and shall be published in the Official Bulletin. It shall be submitted to the National Assembly for approval.

Mogadishu, 23 May 1985

PRESIDENT OF THT S.D.R.

Mohamed Siad Barre

## EXCISE TAX

### SCHDULA «A»

| | GOODS | PERCENTAGE |
|---|---|---|
| 1. | Caramels, Boiled Sweets, Chewing Gum and the Like | 15% |
| 2. | Syrups for beverages, Jams, Marmalades and the Like | 15% |
| 3. | Choclolate, Candied Fruits, Halva and the Like | 15% |
| 4. | Syrups and other sweetened Beverages | 12% |
| 5 | Fruits in Syrup and sweetened Fruit Juice | 10% |
| 6. | «Panetooni», Cakes and Pastries, Biscuits and other timilar sweetened Products | 5% |
| 7. | Other Products containing added Sugar | 10% |
| 8. | Matches | 80% |
| 9. | Cigarettes | 100% |
| 10. | Shampoo, Soap and Hair Oil | 20% |
| 11. | Sugar | 60% |
| 12. | Mineral Water | 10% |
| 13. | Alcholic Beverages | 80% |
| 14. | Pure Alchol | 100% |
| 15. | Tomatoes and Khal | 10% |
| 16. | Co-nstruction Matrials | 15% |
| 17. | Leather and Matrials made of Leather | 15% |
| 18. | Perfumes | 20% |
| 19. | Foam Etc | 15% |
| 20. | Home Utensils | 10% |
| 21. | Cloths | 5% |
| 22. | Meat | 5% |
| 23. | Fish | 5% |
| 24. | Edible Oil | 5% |
| 25. | Pasta | 5% |
| 26. | Milka and its by-products | 5% |
| 27. | Carton, Plastic and the like | 5% |
| 28. | Furniture | 5% |
| 29. | Spare Parts | 5% |
| 30. | Other Products Manufactured Locally and not Specifically mentioned | 5% |

**XEER** MADAXWEYNAHA JDS, L. 20 ee 25 Maajo 1985 Billad Maar oo Waddaninimo ah lagu maamuusay Jaalleyaasha Dhamme Muxyadiin Axmed Cabdi, X/le Ismaaciil Xuseen Haaruun iyo S/A Axmed Faarax Abyan.

MADAXWEYNAHA JDS

**MARKUU ARKAY:** Qod. 82aad ee Dastuurka JDS;

**MARKUU ARKAY:** Sharciga Lam. 65 ee 19ka Oktoobar 1970;

**MARKUU TIXGELIYEY:** Codsiga Taliyaha Ciidanka Booliska S/Gaas Aadan Cabdi Ducaale;

**MARKUU TIXGELIYEY:** Geesinimadii dhabta ahayd ee ay muujiyeen muddadii lagu jirey Hawlgalkii ciribtirka Qurmistii isku dayday inay soo galaan Buuraleyda Gobolka Waqooyi Galbeed;

**MARKUU TIXGELIYEY:** Inay lagama maarmaan tahay in dadka ku shaqeeyey Waddaninimo, Geesinimo naftoodana khatar geliyey iyagoo isla markaana si karti dheeraad ah leh uga soo baxeen dadweynihii ay waajibaadkaas wada fulinayeen oo galay dab iyo holac aad u kulul, Jaalle Dhamme Muxyadiin Axmed Cabdi, X/le Ismaaciil Xuseen Haaruun iyo S/A Axmed Faarax Abyan la guddoonsiiyo aqoonsiga ay ka mudanyihiin Ummaddooda;

**MARKUU TIXGELIYEY:** Talada Guddiga Aqoonsiga M.J.D.

WUXUU SOO SAARAY

**Xeerka soo socda:**

QODOBKA KELIYA

**Waxaa** lagu maamuusay BILLAD MAAR AH EE WADDANINIMO, Jaalleyaasha Dhamme Muxyadiin Axmed Cabdi, X/le Ismaaciil Xuseen Haaruun iyo S/A Axmed Faarax Abyan oo ka tirsan Ciidanka Booliska Soomaaliyeed.

Xeerkan wuxuu dhaqangalayaa markuu Madaxweynaha J.D.S. soo saxiixo.

Muqdisho, 25 May 1985

MADAXWEYNAHA JDS

S/Gaas Maxamed Siyaad Barre

XEER MADAXWEYNAHA JDS, L. 21 ee 25 Maajo 1985 Billad Qalin Waddaninimo ah oo lagu maamuusay Jaalleyaasha Duuliye Sare Maxamuud Xaaji Cilmi «Xaaji Dhagax» iyo Sucaado Maxamed Sheekh.

MADAXWEYNAHA JDS

MARKUU ARKAY: Qod. 82aad ee Dastuurka JDS;

MARKUU ARKAY: Sharciga Lam. 65aad ee 19ka Oktoobar 1970 ee Abaalmarinta;

MARKUU TIXGELIYEY: Qoraallada iyo Warbixinta Wasiirka Waaasradda Gaadiidka Cirka iyo Dhulka;

MARKUU TIXGELIYEY: Sida Waddaninimada, Kacaanimada, Geesinimo iyo Biseyl siyaasadeed ay muujiyeen intii uu socday Afduubkii Diyaaradda ay wadeen Bisha Nofember 24dii 1934, ilaa 28.11.84, Jaalle Duuliye Sare Maxamuud Xaaji Cilmi «Xaaji Dhagax» iyo Sucaado Maxamed Sheekh;

MARKUU TIXGELIYEY: Inay lagama maarmaan tahay in dadka ku shaqeeyey niyad samir Waddaninimo, Kacaanimo, Geesinimo iyo iyagoo si hagar la'aanta ah u soo gutey waajibaadkii ka saaraa la guddoonsiiyo aqoonsiga ay ka mudanyihiin Ummaddooda, loogana reebo raad wax ku ool ah;

MARKUU TIXGELIYEY: Talada Guddiga Abaalmarinta MJDS.

WUXUU SOO SAARAY

XEERKA SOO SOCDA:

QODOBKA KELIYA

Waxaa lagu maamuusay BILLAD Qalin 1 00 WADDANINIMO Jaalle Duuliye Sare Maxamuud Xaaji Cilmi iyo Sucaado Maxamed Sheekh oo ka tirsan Shirkadda Somali Airlines.

Xeerkan wuxuu dhaqangalayaa markuu Madaxweynaha JDS soo saxiixo.

Muqdisho, 25 May 1985

MADAXWEYNAHA JDS
S/Gaas Maxamed Siyaad Barre

XEER MADAXWEYNAHA JDS, L. 22 ee 25 Maajo 1985 Billad Maar ah oo Waddaninimo oo lagu maamuusay Jaalleyaasha Cali Maxamed Nuur NSSta, Cabdi Isaaq Cali NSSta iyo Injineerka Nuur Aw Yuusuf.

MADAXWEYNAHA JDS

MARKUU ARKAY: Qod. 82aad ee Dastuurka JDS;
MARKUU ARKAY: Sharciga Lam. 65aad ee 19ka Oktoobar 1970;
MARKUU TIXGELIYEY: Qoraallada iyo Warbixinta Wasiirka Wasaaradda Gaadiidka Cirka iyo Dhulka;
MARKUU TIXGELIYEY: Sida Waddaninimada, Geesinimada uga qayb qaateen intii uu socday Afduubkii Diyaaradda ay ka shaqaynayeen Bishii November 24dii ilaa 28.11.1984, Jaalle Cali Maxamed Nuur NSSta, Jaalle Cabdi Isaaq Cali NSSta iyo Injineer Nuur Aw Yuusuf;
MARKUU TIXGELIYEY: Inay lagamamaarmaan tahay in dadka ku shaqeeyay Waddaninimo iyo Geesinimo, kana qayb qaatay difaaca dalka iyagoo muujiyey niyadsami, looga reebo raad wax ku ool ah;
MARKUU TIXGELIYEY: Talada Guddiga Abaalmarinta MJDS.

WUXUU SOO SAARAY

Xeerka soo socda:

QODOB KALIKA

Waxaa lagu maamuusay BILLAD MAAR WADDANINIMO AH Jaalleyaasha Cali Maxamed Nuur NSSta, Cabdi Isaaq Cali NSSta iyo Injineer Nuur Aw Yuusuf oo ka tirsan Sharikadda Soomaali Airlines.

Xeerkan wuxuu dhaqangalayaa markuu Madaxweynaha JDS soo saxiixo.

Muqdisho, 25 May 1985

MADAXWEYNAHA JDS
S/Gaas Maxamed Sifaad Barre

XEER MADAXWEYNAHA JDS, L. 23 ee 30 Maajo 1985 Akademiyaha Sare ee Straateejiyada Sayid Maxamed Cabdulle Xasan.

MADAXWEYNAHA JDS

MARKUU ARKAY: Dastuurka JDS;

MARKUU ARKAY: Sharciga 8 Abriil 1960 L. 15aad Dhimaha XDS;

MARKUU ARKAY: Qod. 9aad Sharciga tirsigiisu yahay 6 ee soo baxay 31-12-1969;

MARKUU DHAGEYSTAY: Talo soo jeedinta Golaha Wasiirada Jamhuuriyadda Dimoqaraadiga Soomaaliya;

ISAGOO TIXGELIYEY: Ujeedada iyo Himilada Kacaanka 21ka Oktoobar oo ku salaysan in aqoontu tahay furaha Horumarka Mujtamac kasta.

ISAGOO TIXGELIYEY: Ahmiyadda wayn ee sare u qaadida tabta tababarrada Ciidanka iyo guulihii laga gaaray jiritaanka Kulliyadda Ciidanka Lugta ee Jaalle Siyaad iyo Abbaanduulka Axmed Gurey;

ISAGOO TIXGELIYEY: Soo jeedinta Wasiirka Wasaaradda Gaashaandhigga Jamhuuriyadda Dimoqaraadiga Soomaaliya.

WUXUU XEERIYEY

Qod. 1aad

In la abuuro Akadeemi Sare oo lagu barto Istaraateejiyada, Dhaqaalaha, Siyaasadda, Bulshada, Caskariga iya Dublumaasiyada.

Waxaa Akadeemiga lagu magacaabay «AKADEEMIGA SARE EE ISTARAATEEJIYADA SAYID MAXAMED CABDULLE XASAN»

Akadeemigu wuxuu ka kooban yahay 2 Kulliyadood.

b) Kulliyadda Sare ee Istaraateejiyada Difaaca

iyo Nabadgeiyadda Qaranka, waxaana wax ku baranaya Mas'uuliyiinta sare ee Qaranka iyo saraakiisha sare ee Ciidamada Qalabka Sida Jamhuuriyadda Dimoqoraadiga Soomaaliya.

t) Kulliyadda sare ee Istaraateejiyada Dagaalka, waxaana wax ku baranaya saraakiisha sare ee Ciidamada Qalabka Sida Jamhuuriyadda Dimoqaraadiga Soomaaliya.

Qod. 2aad

Xarunta Akadeemiga waxay noqonaysaa magaalo Madaxda Jamhuuriyadda Dimoqaraadiga Soomaaliya.

Qod. 3aad

Heerka Waxbarasho ee Akadeemigu wuxuu noqonayaa heer Akademiyeedka Caalamiga ah iyo kuwa la midka ah ee ka jira Adduunka.

Qod. 4aad

Maamulka Akadeemigu wuxuu hoos imaanayaa Wasiirka Wasaaradda Gaashaandhigga Jamhuuriyadda Dimoqaraadiga Soomaaliya.

Qod. 5aad

Habka maamulka Akademiga, qaabkiisa dhismo, waxbarasho wuxuu ku soo baxayaa Xeer hoosaadka ay soo diyaariso Wasaaradda Gaashaandhigga Jamhuuriyadda Dimoqaraadiga Soomaaliya.

Qod. 6aad

Macallimiinta wax ka dhigeysa Akadeemiga waxay noqonayaan mas'uuliyiinta sare ee Qaranka iyo aqoon yahanno sare x laga soo xulay Hay'adaha kala duwan ee Dawladda iyo Ciidamada Qalabka Sida.

Qod. 7aad

Wasaaradda Gaashaandhigga waxay kala imaan kartaa Dalka Dibadiisa Khubaro iyo macallimiin wax ka dhiga Akadeemiga haddii loo baahdo.

Qod· 8aad

Xeerkan wuxuu dhaqan galayaa 30ka May 1985.

Muqdisho, 30 May 1985

MADAXWEYNAHA JDS

S/Gaas Maxamed Siyaad Barre

SOCIETA' INCREMENTO PRODOTTI AGRICOLI— S.I.P.A.— S.P.A.—

Saldhigga: Shalambot.- Ra'asumaal: Sh.So. 8.112.000,-

OGEYSIIS ISU YEERID SHIR CAADI AH

Saamileyda Shirkadda waxaa la isugu yeerayaa Shir Caadi ah oo lagu qaban doono Muqdisho, Xarunta Shirkadda Somalifruit, saacadda 10ka subaxnimo, maalinta 22ka Juun 1985, haddii loo baahdo, mar labaad, maalinta 23ka Juun 1985 isla saacadda iyo meesha kor ku xusan, si go'aan looga gaaro arrimaha soo socda:

AJENDADA SHIRKADA

1) Warbixinta Guddiga Maamulka iyo Guddiga Baarista.

2) Miisaaniyadda iyo Xisaabta Faa'iidada iyo Khasaaraha oo la xiray 31ka Disember 1984 iyo go'aanada la xiriira.

3) Wax alla waxii falanqeys u baahdo.

Waxaa xaq u leh in ay shirka ka soo qayb galaan saamileyda ku qoran Buugga Shirkadleyda oona soo dhigaan saamiyadooda, ilaa shan maalmood ka hor maalinta shirka la qaban doono, xarunta shirkadda.

L. 146

GUDDIGA MAAMULKA

SOCIETA INCREMENTO PRODOTTI AGRICOLI — S.I.P.A.—

Societa' per Azioni —Sede: Shalambot.- Capitale Sociale interamento versato: Sh.So. 8.112.000,—

AVVISO DI CONVOCAZIONE DI ASSEMBLEA ORDINARIA

I signori azionisti sono convocati in assemblea ordinaria presso la sede sociale della Somalfruit, in Mogadiscio, per il giorno 22 Giugno 1985 alle ore 10,- in prima convocazione ed occorrendo il giorno 23.6.1985 alla stessa ora e luggo in seconda convocazione per deliberare sul seguente:

ORDINE DEL GIORNO

1) Relazione del Consiglio e del Collegio Sindacale.

2) Bilancio e Conto Perdite e Profitti al 31 Dicemre 1984 e deliberazioni relative.

3) Varie ed eventuali.

Possono intervenire all' Assemblea gli azionisti iscritti nel libro soci e che abbiano depositato depositato le loro azioni, almeno cinque giorni prima dalla data dell' Assemblea, presso la sede sociale.

L. 146

IL CONSIGLIO DI AMMINISTRAZIONE

HORSEED — S.P.A. —

Saldhigga: Muqdisho — Ra'asumaal: Sh.So. 1.000.000,-

OGEYSIIS ISU YEERID SHIR CAADI AH

Saamileyda Shirkadda Horseed— S.P.A. — waxaa la isugu yeearyaa shir caadi ah oo lagu qaban doono Muqdisho, Xarunta Shirkadda, maalinta 22 Juun 1985, saacadda 9ka subaxnimo, haddii loo baahdo, mar labaad maalinta 23ka Juun 1985, isla saacadda iyo meesha kor ku xusan, si looga doodo go'aanna loo gaaro arrimaha soo socda.

AJENDAHA SHIRKA

1) Warbixinta Guddiga Maamulka iyo Guddiga Baarista.

2) Miisaaniyadda iyo Xisaabta Faa iidada iyo Khasaaraha la xiray 31.12.1984 iyo go'aanada la xiriira.

3) Wax alla waxii falanqeyb u baahdo.

Waxaa xaq u leh in ay shirka ka qayb galaan saamileyda ku qoran Buugga Shrikadleyda, oo na soo dhigaan saamiyadooda xarunta shirkadda, ilaa shan maalmood ka hor maalinta la qaban doono shirka.

GUDDIGA MAAMULKA

L. 147

HORSEED — S.P.A. —

Sede Sociale: Mogadiscio — Capitale Sh.So. 1.000.000,-

AVVISO DI CONVOCAZIONE ASSMBLEA

ORDINARIA

I signori azionisti della Societa HORSEED — S.P.A. — sono convocati in Assemblea ordinaria per il giorno 22 Giugno 1985 alle ore 9, ed occorrendo per il 23.6.1985, in seconda convocazione, alla stessa ora e luogo, per discutere e deliberare sul seguente.

ORDINE DEL GIORNO

1) Relazione del Consiglio di Ammistrazione e Raporto del Collegio Sindacale.

2) Bilancio e Conto Perdite and Perditti chiusi al 31.12.1984 e deliberazioni relative.

Possono intervenire all' assemblea gli azionisti iscritti nel libro soci che abbino depositato le loro azioni presso la sede sciale, almeno cinque giorni prima della data della Assemblea.

IL CONSIGLIO DI AMINISTRAZIONE

L. 147

GODIR SPORT — S.P.A.

Saldhigga: Muqdisho — Ra'asumaal: Sh.So. 6.000.000,-

OGEYSIIS ISU YEERID SHIR CAADI AH

Saamileyda shirkadda Godir Sport — S.P.A. — waxaa la isugu yeerayaa shir caadi ah oo lagu qaban doono xarunta shirkadda Muqdisho, maalinta 27ka Juun 1985, saacadda 4ta galabnimo haddii loo baahdo 24ka Luulyo 1985 fadhiga labaad, isla saacadda iyo meesha kor ku xusann si looga doodo, go'aanna looga gaaro arrimaha soo socda:

AJENDADA SHIRKA

1) Warbixinta Guddiga Maamulka iyo Guddiga Baarista.

2) Miisaaniyadda iyo xisaabta faa'iidada iyo Khasaaraha la xiray 31.12.1984 iyo go'aannada la xiriira.

Waxaa xaq u leh in ay ka soo qayb galaan shirka saamileyda ku qoran Buugga shirkadleyda, oo na soo dhigaan saamiyadooda xarunta shirkadda ilaa shan maalmood ka hor maalinta la qaban doono shirka.

GUDDIGA MAAMULKA

L. 148

SHIRKADDA BEER TACABKA LUUL — S.P.A. —

Saldhigga: Muqdisho — Ra'asumaal: ShSo. 1.100.000,-

OGEYSIIS IHU YETRID SHIR CAADI AH

Saamileyda Shirkadda Beer Tacabka Luul waxaa la isugu yeerayaa shir caadi ah oo lagu qaban doono Muqdisho, Xarunta Shirkadda, maalinta 22ka Juun 1985 saacadda 11ka subaxnimo, haddii loo baahdo, mar labaad maalinta 23ka Juun 1985, isla saacadda iyo meesha kor ku xusan si looga doodo, go'aanna loo gaaro arrimaha soo socda:

AJENDADA SHIRKA

1) Warbixinta Guddiga Maamulka iyo Guddiga Baarista.

2) Miisaaniyadda iyo Xisaabta Faa'iidada iyo Khasaaraha la xiray 31ka Disember 1984 iyo go'aannada la xiriira.

3) Wax alla waxii falanqeys u baahdo.

Waxaa xaq u leh in ay shirka ka soo qayb galaan saamileyda ku qoran Buugga Shirkadleyda oo na soo dhigaan saamiyadooda xarunta shirkadda, ilaa shan maalmood ka hor maalintna la qaban doono shirka.

GUDDIGA MAAMULKA

L. 149

SHIRKADDA BEER TACABKA LUUL — S.P.A. —

Sede Sociale: Mogadiscio — Capitale: Sh.So. 1.100.000,-

AVVISO DI CONVOCAZIONE ASSEMBLEA ORDINARIA

I signori azionisti sono convocati in Assemblea ordinaria in Mogadiscio, presso la sede sociale, per il giorno 22 Giugno 1985 alle ore 11, ed occorendo per il 23.6.1985 alla stessa ora e luogo, per deliberare sul seguente.

ORDINE DEL GIORNO

1) Relazione del Consiglio di Amministrazione e raporto del Collegio Sindacale.

2) Bilancio e Conto Perdite and Profitti al 31 Dicembre 1984 e deliberazioni relative.

Possono intervenire all' Assemblea gli Azionisti iscritti nel Libro soci. e che abbiano depositato le loro azioni presso la sede sociale, almeno cinque giorni prima della data dell' Assemblea.

IL CONSIGLIO DI AMMINISTRAZIONE

L. 149

IIB MA GALE

# FAAFINTA RASMIGA AH

الرسميـة الجريـدة

Sannadka 13aad Muqdisho 30 Juunyo 1985 L. 1 r 6

JAMHUURIYADDA DIMOQRAADIGA SOOMAALIYA

لجمهورية الصومال الديمقراطية

FAAFIN BIL SOO BAXA جريدة شهرية

**QIIMADU: waa 5 shilin lambar waliba — RUKUNKA: Sanadii waa Sh. 100 Soomaaliya gudeheeda - dibaddedana waa Shs. 300. Rubunka la weydiisto waqtiga loo gooyey wuxuu ka bilabmaa 1 Janaayo. Qiimaha qortitaanku F. R. halkii sadar iyo waxii ka yar waa 2 laba Sh. Rukunka iyo qoritaanku waxaa la weydiistaa Laanta Maamulka Faafinta Rasmiga ah Lacagta waxaa lagu bixinayaa Xafiiska Canshuuraha ee Wasaaradda Lacagta.**

K O O B N I I N

QAYBTA KOOWAAD

QAYBTA KOWAAD

SHARCI

SHARCI L. 10 ee 30 Maajo 1985, Oggolaansho Heshiis amaaheed dhexmaray JDS Iyo Sanduuqa Caalamiga ah ee H. Beeraha— Bog; 380

SHARCI L. 11 ee 30 Maajo 1985, Oggolaansho Heshiis amaaheed dhexmaray JDS Iyo Wakaaladda Hor. Caalamiga. » 381

QAYBTA LABAAD

X E E R

XEER MADAXWEYNAHA JDS 24 ee 30 Maajo 1985, Meelmarinta heshiiska amaaheed ee dhexmaray JDS iyo Sanduu

DECREE N. 24 on 30 May 1985, Instrument of ratification » 383

XEER MADAXWEYNAHA JDS L. 25 ee 30 Maajo 1984, meelmarinta heshiiska am aaheed ee dhexmaray JDS iyo Wakaa ladda horumarinta Caalamiga » 384

DECREE N. 25 on 30 May 1985, Instrument of ratification » 385

QAYBTA SAD/XAAD TALOOYIN ISGAARSIIN OGEYSIIS IYO WIXII LA MID AH.—

MAXKAMADDA GOBOLKA BANAADIR, 5.6.85 Lumid J. W. L.438539 ku qoran Qamar Ibraahim Xarbi L. 150 » 386

MAXKAMADDA GOBOLKA BANAADIR, 5.6.85 Lumid Jeeg War. L. 438544 ku qoran Qamar Ibraahim Xarbi L. 151 » 387

MAXKAMADDA GOBOLKA BANAADIR, 8.6.85 Lumid Buug Keyd L. 11670 ku qo ran Ibraahim Maxamed Sheekh L. 152 » 388

MAXKAMADDA GOBOLKA BANAADIR, 15.6.85 Lumid Buug Keyd L. 14191 ku qoran Axmed Ciise Maxamuud L. 153 » 389

MAXKAMADDA GOBOLKA BANAADIR, 16.6.85 Lumid J. W. L, 068434 ku qoran Cabdulqaadir Guuleed Jaamac L. 154 » 390

MAXKAMADDA GOBOLKA BANAADIR, 28.5.85 Lumid J. W. L. 340119 ku qoran Cabdiraxmaan Yuusuf Barre L. 155 » 391

MAXKAMADDA GOB. TOGDHEER, 6.6.85 Lumid Sadex Jeeg War. L. 0231853, 0031779, 31800 ku qoran Faarax Caamir Muuse L. 156 » 392

MAXKAMADDA G. BANAADIR, 23.6.85, Lumid Jeeg War. L. 0208595, ku qoran Sheekh Cabdi Faarax L. 157 » 393

MAXKAMADDA G. BANAADIR, 23.6.85, Lumid Jeeg War. L. 0208618 ku qoran Sheekh Cabdi Faarax L. 158 » 394

MAXKAMADDA G. BANAADIR, 23.6.85, Lumid Jeeg War. L. 581623 ku qoran Timiro Cilmi Gidir L. 159 » 395

MAXKAMADDA G. BANAADIR, 23.6.85, Lumid Jeeg War. L. 0208596 ku qoran Sheekh Cabdi Faarax L. 160 » 396

MAXKAMADDA GOBOLKA BANAADIR, 29.6.85, Lumid Jeeg War. L. 0056615 ku qoran Maxamed Axmed Xersi L. 161 » 397

MAXKAMADDA GOBOLKA BANAADIR, 29.6.85, Lumid Jeeg War. L. 0356616 ku qoran Maxamed Axmed Xersi L. 162 » 398

MAXKAMADDA GOBOLKA BANAADIR, 29.6.85, Lumid Jeeg War. L. 0356617 ku qoran Maxamed Axmed Xersi L. 163 » 399

MAXKAMADDA GOBOLKA BANAADIR, 29.6.85, Lumid Jeeg War. L. 0356618 ku qoran Maxamed Axmed Xersi L. 164 » 400

MAXKAMADDA GOBOLKA BANAADIR, 29.6.85, Lumid Jeeg War. L. 0356619 ku qoran Maxamed Axmed Xersi L. 165 » 401

MAXKAMADDA GOBOLKA BANAADIR, 29.6.85, Lumid Jeeg War. L. 035378 ku qoran Maxamed Axmed Xersi L. 166 » 402

MAXKAMADDA GOBOLKA BANAADIR, 29.6.85, Lumid Jeeg L. 0050072 ku qoran Maxamed Axmed Xersi L. 167 » 403

MAXKAMADDA GOBOLKA BANAADIR, 29.6.85. Lumid Jeeg War. L. 007686 ku

QAYBTA KOWAAD

SHARCI

Sharci lambar 10 taariikh 30 Maajo 1985 Oggolaansho Heshiis amaaheed dhexmaray JDS iyo Sanduuqa Caalamiga ah ee Horumarinta Beeraha.—

MADAXWEYNAHA JDS

ISAGOO TIXGELINAAYA: Oggolaanshaha Guddiga Joogtada ah ee Golaha Shacbiga.

WUXUU SOO SAARAYAA: Sharciga soo socda.

Qodobka 1aad

1. Waxaa la oggolaaday meelmarinta heshiiska Dhexmaray J.D.S. Iyo Sanduuqa Caalamiga ee horumarinta Beeraha, kuna saabsan amaah Lacageed ee dhan 7.050.000 oo ah USD oo looga talo galay ka qaybgalka maalgelinta Mashruuca Horumarinta Beeraha gobolka Wacooyi galbeed, Qaybtiisa 2aad.

2. Heshiiskan waxaa lagu kala saxiixday magaala da Roma ee Dalka Talyaaniga, taariikhdu markey ahayd 25ka Jennaayo 1985.

3. Heshiiskan wuxuu ka mid yahay sharcigan isagoo lifaaq u ah.—

Qodobka 2aad

Shuruudaha iyo Xaaladaha ay qorayaan heshiiska ku tilmaaman qod. 1aad ee sharcigan, waxay leeyihiin qiimo iyo astaan la heer ah sharciyada iyo xeerarka Dalka, waxaana dhaqangelintooda la waafajinayaa Dastuurka Jamhuuriyadda Dimmoqoraadiga Soomaaliya.

Qodobka 3aad

Madaxweynaha J.D.S, Waxaa awood loo siiyey in uu meelmariyo heshiiskan sharcigan ku tilmaaman.

Qodobka 4aad

Sharcigan wuxuu dhaqan gelayaa isla marka uu sa xiixo Madaxweynaha J.D.S. Waxaana lagu soo saarayaa Faafinta Rasmiga ah ee Jamhuuriyadda.—

Muqdisho, 30 May 1985

MADAXWEYNAHA J.D.S.

Sharci lambar 11 taariikh 30 Maajo 1985 Oggolaansh Heshiis amaaheed dhexmaray JDS iyo wakaaladda Horumarinta Caalamiga.

MADAXWEYNAHA JDS

ISAGOO TIXGELIYEY: Oggolaanshaha Guddiga Joo gtada ah ee Golaha Shacbiga.

WUXUU SOO SAARAYAA: Sharciga soo socda.

Qodobka 1aad

1. Waxaa la oggoladaaday meelmarinta Heshiiska dhexmaray J.D.S. Iyo Wakaaladda Horumarinta Caalamiga kuna saabsan amaah lacageed ee dhan 10.700.000 oo ah oo loogu talo galay ka galka maalgelinta Mashruuca Horumarinta Beeraha ee Gobolka Waqooyi galbeed, Qaybtiisa 2aab.—

2. Heshiiskan wuxuu lagu kala saxiixday magaala daWashinton ee DalkaMareykanka taariikhdu markey ahaayd 28ka Feb. 1985.—

3. Heshiiskan wuxuu ka mid yahay sharcigan isa goo lifaaq u ah.—

Qodobka 2aad

Shuruudaha iyo xaaladaha ay qorayaan Heshiis ka kutilmaaman qod. 1aad ee sharcigan waxay leeyihiin qiimo iyo astaan sharci la heer ah sharciyada iyo xeerarka Dalka, waxaana dhangelintooda la waafajinayaa Dastuurka Jamhuuriyadda Dimoqoraadiga Soomaaliya

Qodobka 3aad

Madaxweynaha J.D.S. Waxaa awood loo siiyey inuu meelmariyo heshiiskan sharcigan ku tilmaaman.

Qodobka 4aad

Sharcigan wuxuu dhaqan gelayaa isla marka uu saxiixo Madaxweynaha J.D.S. Waxaana lagu soo saarayaa Faafinta Rasmiga ah ee Jamhuuriyadda.

Muqdisho, 30 May 1985

MADAXWEYNAHA J.D.S.
Maxamed Siyaad Barre

QAYBTA LABAAD

XEER

Xeerka Madaxweynaha J.D.S. lambar 24 taariikh 30 Maajo 1985 meelmarinta heshiiska amaaheed ee dhex maray JDS iyo Sanduuqa Caalamiga ah ee Horumarinta Beeraha.—

MADAXWEYNAHA JDS

MARKUU ARKAY: Qod. 67, faqradda 5, iyo qod. 82, faqradda 4, ee Dastuurka J.D. Soomaaliya.

MARKUU ARKAY: Sharciga tirgisiisu yahay 49 ee 23ka Disember 1984, kuna saabsan wax ka beddelid da Dastuurka J.D. ee Soomaaliya.

MARKUU ARKAY: Sharciga lam. 10 taariikh 30.5.85 ee Golaha Shacbigu ku oggolaaday eeshiiska xeer kan ku tilmaaman.—

MARKUU TIXGELIYEY: In ay lagama maarmaan ta hay in heshiiskan la meelmariyo.—

WUXUU SOO SAARAYAA: Sharciga soo socda.

Qodobka 1aad

Waxaa la meelmariyey hessiiska amaaheed ee dhex maray J.D.S. Iyo Sanduuqa Caalamiga ee Horumarinta Beeraha ee lagu kala saxiixday magaalada Roma ee Dalka Talyaaniga taariikhdu markay ahayd 25ka Jennaayo 1985, kuna saabsan ka qaybgalka maalgelinta qaybta labaad ee mashruuca aorumarinta Beeraha Gobolka Waqooyi galbeed.—

Qodobka 2aad

Heshiiskan wuxuu ku yeelanayaa Dalka Jamhuuriyadda Dimoqraadiga Soomaaliya awood sharci ah.

Qodobka 3aad

Xeerkani wuxuu dhaqan gelayaa isla marka uu saxiixo Madaxweynaha J.D.S. Waxaana lagu soo saarayaa Faafinta Rasmiga ah ee Jamhuuriyadda.

Muqdisho, 30 May 1985

MADAXWEYNAHA JDS

Maxamed Siyaad Barre

DECREE N. 24 of 30. 5 1985 Instrument of ratification

THE PRESIDENT

HAVING SEEN: Article 67 para 5, and article 82. para 4, of the Constitution of the Somali Democratic Republic.—

HAVING SEEN: The Law no. 49 of 23 December 1984.

HABING SEEN: The Law no. 10 of on 30.5.85 the base of which the people's Assembly has appreved the agreement specified in this Decree.—

HAVING CONSIDERED: The necessity to ratify this Agreement.—

HEREBY PROMULGATES
The fellewing Decree

ARTICLE I

The Loan Agreement (North West Region Agricultu ral Development Project Phase II) between the Somali Democratic Republir and the International Fund For Agricultural Development, signed in Rome (Italy) on 25, 1985, is hereby ratified.—

ARTICLE II

This Agreement Shall have the force of law in the Territory of Somali Democratic Reyublic.

ARTICLE III

This Decree shall come into force upon signature by the president of Somali Democratic Republic and shall be published in Official Bulletin of the State.

Mogadishu, 30 May 1985

THE PRESIDENT OF SDR
Mohamed Siad Barre

Xeerka Madaxweynaha JDS Lr: 25 taariikh ——— Meelmarinta heshiiska amaaheed ee dhexmaray JDS iyo Wakaaladda Horumarinta Caalamiga.

MADAXWEYNAHA JDS

MARKUU ARKAY: Qod. 67, faqradda 5, iyo qod. 82, faqradda 4, ee Dastuurka J.D.S.

MARKUU ARKAY: Sharciga lambar 49 ee 23ka Disem. 1984, kuna saabsan wax ka beddelidda Dastuurka J.D.S.

MARKUU ARKAY: Sharciga tirsigiisu yahay 11 ee 30.5.84 oo Golaha Shcbigu ku oggolaaday Heshiiska xeerkan ku tilmaaman.—

MARKUU TIXGTLIYEY: In ay lagama maarmaan tahay in Heshiiskan la meelmariyo.—

WUXUU SOO SAARAYAA: Sharciga soo socda.

Qodobka 1aad

Waxaa la meelmariyey Heshiiska amaaheed ee dhexmaray J.D.S, Iyo Wakaaladda Horumarinta Caalamiga oo lagu kala saxiixday magaalada Washinton ee Dalka Mareykanka taariikhdu markay ahayd 28ka Feb. 1985, 1984, kuna saabsan ka qaybgalka magaaleynta qaybta labaad ee Mashruuca Horumarinta Beeraha Gobolka Waqooyi Galbeed,—

Qodobka 2aad
MADAXWEYNAHA J.D.S,
Maxamed Siyaad Barre

Heshiiskan wuxuu Dalka J.D.S, ku yeelanayaa awod Sharci ah,—

Qodobka 3aad

Xeerkani wuxuu dhaqan gelayaa isla marka uu sa xiixo Madaxweynaha J.D.S, Waxaana lagu soo saarayaa Faafinta Rasmiga ah oo Jamhuuriyadda

Decree No. 25 of 30 MMay 1985 Instrument of ratification.—

THT PRESIDTNT

HAVING STEN: Article 67, para 5, and Article 82, para 4, of the Constitution of the Somali Democratic Republic.—

HAVING STEN: The Law no. 49 of 23 December 1984.

HAVING SEEN: The no. 11 of on 30.5.85 the base of which the people's Assembly has appreved the Agreement specified in this Decree.

HAVING CONSIDERED: The necessity to ratify this Agreement.—

HTREBY PROMULGATES

The following Decree.—

ARTICLE I

The Develepment Credit Agreement (North-West Region Agricultural Deveboument Project Phase II) between Somali Democratic Republic and International Development Association, signed at Washington, D.C. On 28 Feb. 1985, is hereby ratified.

ARTICLE II

The Agreement shall have the force of law in the Territory Somali Democratic Republic.

ARTICLE III

This Decree shall Come into force upon signature by the President of Somali Democratic Republic and shall be publisheed in Official Bulletin of the State.

Mogadishu, 30 May 1995

THT PRESIDENT OF SDR
Mohamed Siad Barre

MAXKAMADDA GOBOLKA BANAADIR,

HADDUU ARKAY: DACWADDA KOR KU QORAN.

HADDUU ARKAY: In J. War. dhumay oo lambarkiisu ahaa 438539 lagana soo saaray Bankiga Ganacsiga iyo Keydka Soomaaliyeed laanta Hargeysa kuna qo ran lacag dhan Sh.So. 20.000 uu iska lahaa Qamar Ibraahim Xarbi sida ku cad warqadda lam. yahay —— taariikh 6.5.95 ee Bankiga Ganacsiga iyo Keydka Soomaaliyeed laanta Xis-Guud.

WUXUU XEERIYEY

In la baabi'iyo (Amortamento) Jeegga War. Lambr 438539 oo ku qoran magaca ayna ku jirto Sh.So. 20.000.

WUXUU FASAXAY

In Bankiga Ganacsiga iyo Keydka Soomaaliyeed Laanta Hargeysa ubedelo Jeega War. ee kor ku tilmaa man una sameyo mid la mid ah ka dib Markay ka soo wareegto muddo aan ka yarayn 15 maalmood maalinta Go'aanka lagu daabaco Faafinta Rasmiga ah ee J.D.S. Haddii inta ka horeysa aan is hortaag laga keenin.

Muqdisho, 5.6.85

GUDDOOMIYAHA MAXKAMADDA GOB. BANAADIR
Dr. Cabdulaahi Maxamed Maax

L 150

MAXKAMADDA GOBOLKA BANAADIR.

HADDUU ARKAY: DACWADDA KOR KU QORAN.

HADDUU ARKAY: In J. War. dhumay oo lambarkiisu ahaa 438544 lagana soo saaray Bankiga Ganacsiga iyo Keydka Soomaaliyeed laanta Hargeysa kuna qo ran lacag dhan Sh.So. 10.000 ayna iska lahayd J/le Qamar Ibraahim Xarbi sida ku cad warqadda Lam. 6.58.5 ee Bankiga Ganacsiga iyo Keydka Soomaali yeed Qaybta Xis-Guud.

WUXUU XEERIYEY

In la baabi'iyo (Amortamento) Jeegga War. Lambr 438.544 oo ku qoran magaca Qamar Ibraahim Xarbi ay na ku jirto lacag dhan Sh.So. 10.000.

WUXUU FASAXAY

In Bankiga Ganacsiga iyo Keydka Soomaaliyeed Laanta Hargeysa u bedelo Jeega War. ee kor ku tilmaa man una sameeyo mid la mid ah ka dib Markay ka soo wareegto muddo aan ka yarayn 15 maalmood laga bilaa bo maalinta lagu daabaco Faafinta Rasmiga ah ee JDS Haddii inta ka horaysa aan wa ishortag ah laga keenin.

Muqdisho, 6.5.85

GUDDOOMIYAHA MAXKAMADDA GOB. BANAADIR
Dr. Cabdulaahi Maxamed Maax

L. 151

MAXKAMADDA GOBOLKA BANAADIR,

HADDUU ARKAY: DACWADDA KOR KU QORAN.

HADDUU ARKAY: In B. K. Dhumay oo Lambarkiisu

ahaa 11670 lagana soo saaray Bankiga Ganacsiga iyo Keydka Soomaaliyeed laanta Saddexaad kuna qoran lacag dhan Sh.So. 13.367 uu iska lahaa Jaalle Ibraahim Maxamed Sheekh sida ku cad warqadda lambarkeedu yahay 000385 taariikhdeedu 9.6.85 ee Bankiga Ganacsiga iyo Keydka Soomaaliyeed Laanta Saddexaad.—

WUXUU XEERIYEY

In la baabi iyo (Ammortamento) Buug Keyd Lambr 11670 oo ku qoran magaca Ibraahim Maxamed Sheekh ayna ku jirto Sh.So. 13.367

WUXUU FASAXAY

In Bankiga Ganacsiga iyo Keydka Soomaaliyeed Laanta Saddexaad u bedelo Ibraahim Maxamed Sheekh Buugga Keydka ee kor ku tilmaaman una sameeyo mid la mid ah ka dib markay ka soo wareegto muddo aan ka yarayn 30 maalmood maalinta Go'aanka lagu daabaco Faafinta Rasmiga ah ee J.D.S. Haddii inta ka horaysa aan is hortaag laga keenin.—

Muqdisho, 8.6.85

GUDDOOMIYAHA MAXKAMADDA GOB. BANAADIR
Dr. Cabdulaahi Maxamed Maax

L. 152

MAXKAMADDA GOBOLKA BANAADIR,

HADDUU ARKAY: DACWADDA KOR KU QORAN.

HADDUU ARKAY: In B. K. Dhumay oo Lambarkiisu ahaa 14191 lagana soo saaray Bankiga Ganacsiga iyo Keydka Soomaaliyeed laanta Saddexaad kuna qoran lacag dhan Sh.So. 97.434 uu iska lahaa Jaalle Axmed Ciise Maxamuud sida ku cad warqadda lambarkeedu yahay 000395 taariikhdeedu 13. .84 ee Bankiga Ganacsiga iyo Keydka Soomaaliyeed Laanta Saddexaad.—

WUXUU XEERIYEY

In la baabi iyo (Ammortamento) Buug Keyd Lambr 14191 oo ku qoran magaca Axmed Ciise Maxamuud ayna ku jirto Sh.So. 97.434

WUXUU FASAXAY

In Bankiga Ganacsiga iyo Keydka Soomaaliyeed Laanta Saddexaad u bedelo Axmed Ciise Maxamuud Buuga Keydka ee kor ku tilmaaman una sameeyo mid la mid ah ka dib markay ka soo wareegto muddo aan ka yarayn 30 maalmood maalinta Go'aanka lagu soo daabaco Faafinta Rasmiga ah ee J.D.S. Haddii inta ka hore ysa aan is hortaag laga keenin.—

Muqdisho, 15.6.85

GUDDOOMIYAHA MAXKAMADDA GOB. BANAADIR
Dr. Cabdulaahi Maxamed Maax

L. 153

MAXKAMADDA GOBOLKA BANAADIR

GARSOORAHA MAXKAMADDA GOB. BANAADIR

HADDUU ARKAY: DACWADDA KOR KU QORAN:

HADDUU ARKAY: J. War. Dhumay oo lambarkiisu ahaa 068434 lagana soo saaray Bankiga Ganacsiga iyo Keydka Soomaaliyeed laanta Saddexaad kuna qoran lacag dhan Sh.So. 14.000 uu iska lahaa Jaalle Cabdirisaaq Guuleed Jaamac sida ku cad warqadda lamabarkeedu yahay 000402 taariikhdeedu tahay 16.6.85 ee Bankiga Ganacsiga iyo Keydka Soomaali yeed laanta Saddexaad

HADDUU ARKAY: Qod. 69 sharciga lam. 2 ee 9.9.85

WUXUU XEERIYEY

In la baabi'iyo (Ammortamento) Jeegga War. Lam. 068434 ee ku qoran Cabdirisaaq Guuleed Jaamac ayna ku jirto Sh.So. 14.000

WUXUU FARAYAA

In Bankiga Ganacsiga iyo Keydka Laanta Sad/d ee kor ku tilmaaman una sameeyso mid la Mid ah ka dib markay ka soo wareegto muddo aan ka yarayn 15 maa lmood maalinta Go'aanka lagu daabaco Faafinta Rasmi ga ah ee J.D.S. Haddii inta ka horeysa aan wax is hort aag ah laga keenin.—

Muqdisho, 16.6.84

GARSOORAHA MAXKAMADDA GOB. BANAADIR
Dr. Cabdulaahi Maxamed Maax

L. 154

MAXKAMADDA GOBOLKA BANAADIR

MARKUU ARKAY: DACWADDA KOR KU QORAN

HADDUU ARKAY: In Jeeg War. Dhumay oo lambark iisu ahaa 340119 lagana soo saaray Bankiga Ganacsiga iyo Keydka Soomaaliyeed laanta Boosaaso kuna qoran lacag dhan Sh.So. 10.000 uu iska lahaa Cabdi raxmaan Yuusuf Barre sida ku cad warqadda lambarkeedu yahay 005195 taariikhdeedu 27.5.85 ee Bankiga Ganacsiga iyo Keydka Soomaaliyeed Laanta xisaabaadka.

WUXUU XEERIYEY

In la baabi'iyo (Ammortamento) Jeega War. Lamb. 340119 oo ku qoran magaca Cabduraxmaan Yuusuf Barre ayna ku jirto Sh.So. 10.000

WUXUU FASAXAI

In Bankiga Ganacsiga iyo Keydka Soomaaliyeed Laanta Bosaaso Jeega War. ee kor ku tilmaaman una sameeyso mid la mid ah ka dib markay ka soo wareegto muddo aan ka yarayn 15 maalmood maalinta Go'aanka lagu daabaco Faafinta Rasmiga ah ee J.D.S. Haddii inta ka horaysa aan is hortaag laga keenin

Muqdisho, 28.5.85

GUDDOOMIYAHA MAXKAMADDA GOB. BANAADIR
Cabdulaahi Maxamed Maax

L. 155

MABKAMADDA GOBOLKA TOGDHEER

KU: Xafiiska Faafinta Rasmiga ah ee Dawladda Xa/r

UJ: Baafin Xeegaga Wareega oo Lumay

HADDUU ARKAY: Dacwadda ku saabsan J. Wareega ee Lumay.

HADDUU ARKAY: Ogeysiinta Bankiga Ganacsiga iyo Keydka L. Burco.

HADDUU ARKAY: Qod. 69,65) Lumid Jeega War. ee Lam. 0231853 Sh.So. 100,000 kuna qoran Jaamac Ismaaciil Cali 2 J. Lam. 0031779 Sh.So. 50.000 kuna qo ran Maxamuud X. Xuseen Noor 3.J. 31800 Sh.So. 25.000 kuna qoran Jaamac Axmed Fahiye

WUXUU AMRAYAA

[illegible] cusboonaysiiyo Jeegaas kor ku xusan Jaalle Faarax Caamir Muuse markii ay ka soo wareegto 20 ca[illegible] shaaciyo X. Faafinta Rasmiga ah ee Daw/da [illegible]a codsanayaa in Jeegagaas Cusub ee la sameyn doono gacanta laga saaro Jaalle Faarax Caam ir Muuse iyadoo la sugayo mudada kor ku xusan.

[illegible]diyaha Maxkamadda Gob. Togdheer Burco

Xalimo X. Cabdi (Tanza'nia)

Maxkamadda Gobolka Togdheer Burco.

Dr, Abuukar Islaw Cumar

L. 156

MAXKAMADDA GOBOLKA BANAADIR

GARSOORAHA MGB

HADDUU ARKAY: Dacwadda kor ku qoran;

HADDUU ARKAY: In Jeeg Wareega dhumay uu lam-

HADUU ARKAY: In Jeeg Wareega dhumay uu lambarkiisu ahaa 0208595 lagana soo saaray Bankiga Ganacsiga iyo Kaydka Soomaaliyeed Laanta B/-weyne kuna qoran lacag dhan Sh.So. 100.000/= uu iska lahaa Jaalle Sheekh Cabdi Faarax sida ku cad warqadda lambarkeedu yahay 004824 taariikhdeeduna tahay 22.6.85 ee Bankiga Ganacsiga iyo Keydka Soomaaliyeed Laanta Xarunta;

HADDUU ARKAY: Qod. 69 sharciga Lam. 2 ee 9.9.65.

WUXUU XEERAYAA

In la baabi'iyo (Ammortamente) Jeegga Lam. 0208595 ee ku qoran Sheekh Cabdi Faarax ayna ku jirto Sh.So. 100.000/=.

WUXUU FARAYAA

In Bankiga Ganacsiga iyo Kaydka Laanta B/Weyne u badalo J/Wareega ee kor ku tilmaaman una sameyso mid la mid ah markay ka soo wareegto muddo aan ka yareyn 30 maalmood maalinta go'aanka lagu daabaco Faafinta Rasmiga ah ee JDD, haddii inta ka horeysa aan wax is-hortaag ah laga keenin.

Muqdisho, 23.6.1985

GARSOORAHA MGB
Dr. Cabdullaahi Maxamed Maax

L. 157

MAXKAMADD AGOBOLKA BANAADIR

GARSOORAHA MGB

HADDUU ARKAY: Dacwadda kor ku qoran;

HADDUU ARKAY: In Jeegga War. dhumay uu lambarkiisu ahaa 0208618 lagana soo saaray Bankiga Ganacsiga iyo Kaydka Soomaaliyeed Laanta B/weyne kuna qoran lacag dhan Sh.So. 100.000/= uu iska lahaa Sheekh Cabdi Faarax sida ku cad warqadda lambarkeedu yahay 005824 taariikhdeeduna tahay 22.6.85 ee Bankiga Ganacsiga iyo Keydka Soomaaliyeed Laanta Xarunta;

HADDUU ARKAY: Qod. 69 sharciga lam. 2 ee 9.9.65.

WUXU XERAYAA

In la baa'bi'iyo (Ammortamente) Jeegga Lam. 0208618 ee ku qoran Sheekh Cabdi Faarax ayna ku jirto lacag dhan Sh.So. 100.000/=.

WUXUU FARAAYAA

In Bankiga Ganacsiga iyo Kaydka Laanta B/weyne u bedelo Jeeg kor ku tilmaaman una sameeyo mid la mid ah markay ka soo wareegto muddo aan ka yareyn 30 maalmood maalinta go'aanka lagu daabaco Faafinta Rasmiga ah ee Jamhuuriyadda Dimoqraadiga Soomaaliya haddii inta ka horaysa aan wax is-hortaag ah laga keenin.

Muqdisho, 23.6.1985

GARSOORAHA MGB
Dr. Cabdullaahi Maxamed Maax

L. 158

MAXKAMADDA GOBOLKA BANAADIR

GARSOORAHA MGB

HADDUU ARKAY: Dacwadda kor ku qoran;

HADDUU ARKAY: In Jeeg War. dhumay uu lambarkiisu ahaa 581623 lagana soo saaray Bankiga Ganacsiga iyo Kaydka Soomaaliyeed Laanta Xaruunta kuna qoran lacag dhan Sh.So. 10.000/= uu iska lahaa Timiro Cilmi Gidir sida ku cad warqadda lambarkeedu yahay 005824 taariikhdeeduna tahay 22.6.85 ee Bankiga Ganacsiga iyo Kaydka Soomaaliyeed Laanta Xaruunta;

HADDUU ARKAY: Qod. 69 sharciga Lam. 2 ee 9.9.65.

WUXUU FARAYAA

In la baabi'iyo (Ammortamente) Jeegga War. Lam. 581623 ee ku qoran Timiro Cilmi Gidir ayna ku jirto lacag dhan Sh.So. 10.000/=.

WUXUU FARAYAA

In Bankiga Ganacsiga Kaydka Laanta Hargeysa u bedelo Jeegga kor ku tilmaaman una sameeyo mid la mid ah markay ka soo wareegto muddo aan ka yareyn 15 maalmood maalinta go'aanka lagu daabaco Faafinta Rasmiga ah ee JDS, haddii inat ka horaysa aan wax is-hortaag ah laga keenin.

Muqdisho, 26.6.1985

GARSOORAHA MGB
Dr. Cabdullaahi Maxamed Maax

L. 159

MAXKAMADDA GOBOLKA BANAADIR
GARSOORAHA MGB

HADDUU ARKAY: Dacwadda kor ku qoran;

HADDUU ARKAY: In Jeegga War. dhumay oo lambarkiisu ahaa 0208596 lagana soo saaray Bankiga Ganacsiga iyo Kaydka Soomaaliyeed Laanta B/-Wayne kuna qoran lacag dhan Sh.So. 100.000/= uu iska lahaa Sheekh Cabdi Faarax sida ku cad warqadda lambarkeedu yahay 005824 taariikhdeeduna tahay 22.6.84 ee Bankiga Ganacsiga iyo Kaydka Soomaaliyeed Laanta Xarunta;

HADDUU ARKAY: Qod. 69 sharciga Lam. 2 ee 9.9.65.

WUXUU FARAYAA

In la baa'bi'iyo (Ammortamento) Jeegga Lam. 0208596 ee ku qoran Sheekh Cabdi Faarax ayna ku jirto Sh.So. 100.000/=.

WUXUU FARAYAA

In Bankiga Ganacsiga iyo Kaydka Soomaaliyeed Laanta B/Weyne ubadalo Jeegga War. ee kor ku tilmaaman una sameeyo mid la mid ah markay ka soo wareegto muddo aan ka yareyn 30 maalmood maalinta go'aanka lagu daabaco Faafinta Rasmiga ah ee JDS, haddii inta ka horaysa aan wax is-hortaag ah laga keenin.

Muqdisho, 23.6.1985

GARSOORAHA MGB
Dr. Cabdullaahi Maxamed Maax

L. 160

MAXKAMADDA GOBOLKA BANAADIR

Garsooraha Maxkamadda Gobolka Banaadir

MARKUU ARKAY: DACWADDA KOR KU QORAN

HADDUU ARKAY: In J. W. Dhumay oo lambarkiisu ahaa 0356616 lagana soo saaray Bankiga Ganausiga iyo Keydka Soomaaliyeed laanta Shanaad kuna qoran lacag dhan Sh.So. 100.000 uu iska lahaa Maxamed Axmed Xersi sida ku cad warqadda lambarkeedu yahay 000075 taariikhdeeduna tahay 29.6.85 ee Bankiga Ganacsiga iyo Keydka Soomaaliyeed laanta shanaad

HADDUU ARKAY: Qod. 69 sharciga Lam. 2 ee 9.9.85

WUXUU XEERIYEY

In la baabi'iyo (Ammortamento) J ga War. Lamb. 0356616 ee ku qoran Maxamed Axmed Xersi ayna ku jirto Sh.So. 100.000

WUXUU FARAYAA

HADDUU ARKAY: Qod. 69,65-) Lumid Jeegga Wareega ee kor ku xusan ee Lam. yahay 0179389 ee Sh.So. 30,000/= kuna qoran yahay Axmed Siyaad Afrax.

WUXUU AMRAYAA

In loo cusboonaysiiyo Jeeggaas Wareega ee Lam. yahay 0179389 taariikh 12.8.85 lagana sameeyey Laanta Burco J.le Axmed Siyaad Afrax markii ay ka soo wareegto 20 casho laguna Shaaciyo X. Faafinta Rasmiga ah ee Dawladda.

WAXAA LAGA CODSANAYAA

In Jeegga cusub ee la samayndoono gacanta laga saaro J.le Axmed Siyaad Afrax .yadoo la sugayo mudada kor ku xusan.

Burco, 17.8.1985

Guddoomiyaha Maxkamadda G/Togdheer Burco
(Dr. Abuukar Isla wCumar)

Kaaliyaha Maxkamadda G/Togdheer Burco
(Jaamac C. Bille)

MAXKAMADDA GOBOLKA BANAADIR

GUDDOOMIYAHA MGB

HADDUU ARKAY: Dacwadda kor ku qoran;

HADDUU ARKAY: In Jeeg Wareega dhumay oo lam-barkiisu ahaa 314253 lagana soo saaray Bangiga Ganacsiga iyo Kaydka Soomaaliyeed Laanta B/-Weyne kuna qoran lacag dhan Sh.So. 8.000/= uu iska lahaa Jaalle Maxamed Faarax Cumar sida ku cad warqadda lambarkeedu ——— taariikhdeedu 3.4.84 ee Bangiga Ganacsiga iyo Kaydka Soomaaliyeed Laanta Xis-Guud;

HADDUU ARKAY: Qod. 69 sharciga lam. 2 ee 9.9.65.

WUXUU XEERIYEY

In la baabi'iyo (Ammortamento) Jeeg lam. 314253 oo ku qoran Jaalle Maxamed Faarax Cumar ayna ku jirto Sh. So. 8.000/=.

WUXUU FARAAYAA

In Bankiga Ganacsiga iyo Keydka Laanta B/Weyne u badalo Jeegga Wareega ee kor ku tilmaaman una sameeyo mi la mid ah markey ka soo wareegto muddo aan ka yarayn 15 maalmood maalinta go'aanka lagu daabaco Faafinta Rasmiga ah ee JDS, haddii inta ka horaysa aan wax ishortaag ah laga keenin.

Muqdisho, 29.9.1984

GUDDOOMIYAHA MGB

(Dr. Cabdullaahi Maxamed Maa

MAXKAMADDA G/TOGDHEER BURCO

Uj: Baafin Jeegagga Wareega Lam. 0181396, [illegible] 0181397.

MGT/139/85 Burco, [illegible]

(Guddoomiyaha Maxkamadda G/Togdheer Burco)

HADDUU ARKAY: Dauwadda ku saabsan [illegible] Jeegagga Wareega ee Lam. 1) 0181396 [illegible] ee Lumay;

HADDUU ARKAY: Ogaysiinta Bangiga Ganacsiga [illegible] Kaydka Laanta Burco;

HADDUU ARKAY: Qod. 69,65-) Lumid Jeegagga Wareega ee kala ah: 1) 0181396 Sh.So. 50,000/= 2) [illegible] War. Lam. 0181397 Sh.So. 30,000/= kuna [illegible] Shuun X. Maxamed Ibraahim lagana [illegible] Burco taariikh 2.9.85.

WUXUU AMRAYAA

In loo cusboonaysiiyo Jeeggagaas Wareega [illegible] ku xusan J.le Shuun X. Maxamed Ibraahim [illegible] ka soo wareegto muddo 20 casho ah laguna [illegible] X. Faafinta Rasmiga ah ee Dawladda.

WAXAA LA CODSANAYAA

In Jeegaggaas cusub ee la samayn doono [illegible] laga saaro J.le Shuun X. Maxamed Ibraahim [illegible] sugayo muddada kor ku xusan.

Guddoomiyaha Maxkamadda G/Togdheer Burco
(Dr. Abuukar Islaw Cumar)

Kaaliyaha Maxkamadda G/Togdheer Burco
(Jaamac C. Bille)

L. 401

MAXKAMADDA GOBOLKA BANAADIR

QAYBTA MADANIGA

GUDDOOMIYAHA MGB

HADDUU ARKAY: Dacwadda kor ku qoran;

HADDUU ARKAY: In uu dhumay Jeeg lam. 30711 lagana sameeyey Bangiga Dhexe ee Soomaaliyeed (Central Bank of Somalia)- qaybta Hawsha Bangiga kuna jirto lacag dhan Sh.So. 100.000/= kuna qoran magaca Maxamuud Faarax Xasan sida ku cad warqadda lam. 3585 taariikh 28.8.1985 kana soo baxday Qaybta hawsha Bangiga Dhexe ee Soomaaliyeed;

HADDUU ARKAY: Qod. 69 sharciga lam. 2 ee 9.9.65.

WUXUU XEERIYEY

In la qiimo tiro lana baabi'iyo (Ammortamento) Jeeg Lam. 30711 lagana sameeyay Bangiga Dhexe ee Soomaaliyeed — Qaybta Hawsha Bangiga kuna qoran magaca Maxamuud Faarax Xasan ayna ku jirto lacag dhan Sh.So. 100.000/=.

WAXAA LA AMRAYAA

Bangiga Dhexe ee Soomaaliyeed — QAYBTA HAWSHA BANGIGA in uu siiyo Jaalle Cabdillaahi Aw-Jaamac lacagta cadadkeedu yahay Sh. So. 100.000/= kuna qoran Jeegga Wareega ee kor ku tilmaaman kadib markay ka soo wareegto muddo aan ka yarayn15 maalmood laga bilaabo marka go'aanka lagu daabaco Faafinta Rasmiga ah ee JDS, haddii inta ka horaysa aan wax ishortaag ah laga keenin.

Muqdisho. 17.9.1985

GUDDOOMIYAHA MGB
(Dr. Cabdullaahi Maxamed Maax)

L. 402

MAXKAMADDA GOBOLKA BANAADIR

GUDDOOMIYAHA MGB

HADDUU ARKAY: Dacwadda kor ku qoran;

HADDUU ARKAY: In Buug Kayd dhumay oo lambarkiisu ahaa 18486 lagana soo saaray Banggiga Ganacsiga iyo Kaydka Soomaaliyeed Laanta Xarunta kuna qoran lacag dhan Sh.So. 33.655,99/= uu leeyahay Cabdulqaadir Maxamed Maxamuud sida ku cad warqadda Lam. 004535 taariikh 18.9.85 ee Banggiga Ganacsiga iyo Kaydka Soomaaliyeed Laanta Xarunta.

WUXUU XEERIYAY

In la baabi'iyo (Ammortamento) Buug Kayd Lam. 18486 oo ku qoran magaca Cabdulqaadir Maxamed Maxamuud ayna ku jirto Sh.So. 33.655,99/=.

WUXUU FASAXAY

In Banggiga Ganacsiga iyo Kaydka Soomaaliyeed Laanta Xarunta siiyo Jaalle Cabdulqaadir Maxamed Maxamuud lacagta cadadkeedu yahay 33.655,99/=, oo ku qoran Buugga Kaydka ee aan kor ku sheegnay mudo aan ka yarayn 30 maalmood laga bilaabo maalinta go'aanka lagu daabaco Faafinta Rasmiga ah ee JDS, haddii inta ka horaysa aan wax ishortaag ah laga keenin.

Muqdisho, 19.9.1985

GUDDOOMIYAHA MGB

(Dr. Cabdullaahi Maxamed Nuur)

L. 403

MAXKAMADDA GOBOLKA BANAADIR

QAYBTA MADANIGA

GUDDOOMIYAHA MGB

MAQDUUU ARKAY: Codsiga dusha ku qoran;

MAQDUUU TIXGELIYAY: In uu dhumay Jeeg Lam. 0120549 lagana sameeyay Bangiga Ganacsiga iyo Kaydka Soomaaliyeed Laanta Wardhiiglay kuna jirto lacag dhan Sh.So. 46.000/= kuna qoran magaca Cabdi-Naasir Xasan Maxamed sida ku cad warqadda Lam. 000434 taariikh 21.9.85 kana soo baxday Laanta Wardhiiglay ee Bangiga Ganacsiga iyo Kaydka Soomaaliyeed;

MAQDUUU ARKAY: Qod. 69 sharciga L. 2 ee 9.9.65.

WUXUU XEERIYAY

In la qiimo tiro lana baabi'iyo (Ammortamento) Jeegga Lam. 0120549 lagana sameeyay L. Wardhiiglay ee Bangiga Ganacsiga iyo Kaydka Soomaaliyeed kuna qoran magaca Cabdi-Naasir Xasan Maxamed ayna ku jirto lacag dhan Sh.So. 46.000/=.

WAXAA LA AMRAYAA

Laanta W/dhiiglay ee Bangiga Ganacsiga iyo Kaydka Soomaaliyeed in uu siiyo Jaalle Cabdi-Naasir Xasan lacagta cadadkeedu yahay Sh.So. 46.000/= ee ku qoran Jeegga kor ku tilmaaman kadib markay ka soo wareegto muddo aan ka yarayn 15 maalmood laga bilaabo marka go'aanka lagu daabaco Faafinta Rasmiga ah JDS, haddii inta ka horaysa aan wax ishortaag ah laga keenin.

Muqdisho, 21.9.1985

GUDDOOMIYAHA MGB
(Dr. Cabdullaahi Maxamed Maax)

L. 404

MAXKAMADDA GOBOLKA BANAADIR

QAYBTA MADANIGA

GARSOORAHA MGB

HADDUU ARKAY: Codsiga Dusha ku qoran;

HADDUU TIXGELIYAY: In uu dhumay Jeeg Lam. 0183538 lagana sameeyay Bangiga Ganacsiga iyo Kaydka Soomaaliyeed Laanta Hargaysa kuna jirto lacag dhan Sh.So. 50.000/= kuna qoran magaca Cabdi Yaasiin Jaamac sida ku cad warqadda Lam. 008914 taariikh 1[illegible].85 kana soo baxday Laanta Xis-Guud ee Bangiga Ganacsiga iyo Kaydka Soomaaliyeed;

HADDUU ARKAY: Qod. 69 sharciga Lam. 2 ee 9.9.65.

WUXUU XEERIYAY

In la qiimo tiro lana baabi'iyo (Ammortamento) Jeegga Lam. 0183538 lagana sameeyay Laanta Hargaysa ee Bangiga Ganacsiga iyo Kaydka Soomaaliyeed kuna qoran magaca Cabdi Yaasiin Jaamac ayna ku jirto lacag dhan Sh.So. 50.000/=.

UAXAA LA AMRAYAA

Laanta Hargaysa ee Bangiga Ganacsiga iyo Kaydka Soomaaliyeed in uu siiyo Jaalle Xaali Ismaaciil Maxamed lacagta cadadkeedu yahay Shs.50.000/= ee ku qornayd Jeegga kor ku tilmaaman kadib markay ka soo wareegto muddo aan ka yarayn 15 maalmood laga bilaabo marka go'aanka lagu daabaco Faafinta Rasmiga ah ee JDS, haddii inta ka horaysa aan was ishortaag ah laga keenin.

Muqdisho, 17.9.85

GUDDOOMIYAHA MGB
(Dr. Cabdullaahi Maxamed Maax)

## SHIRKADDA BALASTIKADA XAMAR

## O G E Y S I I S

Isugu yeerid Shir aan caadi aheyn, Dhammaan Saamileyda Shirkadda Warshadda Balastikada «Xamar» Haplas leysugu yeerayaa in la qabandoono shir aan caadi aheyn maalinta taariikhdu tahay 2da Okt. 1985ka, Saacaddu markey tamay (toddobada fiidnimo), haddii uu shirku suuroobi waayo waxaa mar labaad la qabandoonaa 7da Okt. 1985ka, isla saacadda kor ku qoran.

AJENDADA LAGA HADLI DOONO;

1) Kordhinta Saamiyada;

2) Dhiirrigelinta Shaqaalaha iyo wixii door la bido in laga hadlo.

GUDDIGA MAAMULKA

L. 405

IIB MA GALO

# FAAFINTA RASMIGA AH

الرسمية

الجريدة

Sannadka 13aad 1da Oktoobar 1985 L. 10

JAMHUURIYADDA DIMOQRAADIGA SOOMAALIYA

لجمهورية الصومال الديمقراطية

FAAFIN RASMI AH

جريدة رسمية

**QIIMADU**: waa 5 shilin lambar waliba — **RUKUNKA**: Sanadkii waa Sh. 100 Soomaaliya gudeheeda - dibaddedana waa Shs. 300. Rubunka la weydiisto waqtiga loo gooyey wuxuu ka bilabmaa 1 Janaayo. Qiimaha qortitaanku F. R. halkii sadar iyo waxii ka yar waa 2 laba Sh. Rukunka iyo qoritaanku waxaa la weydiistaa Laanta Maamulka Faafinta Rasmiga ah Lacagta waxaa lagu bixinayaa Xafiiska Canshuuraha ee Wasaaradda Lacagta.

K O O B N I I N

QAYBTA KOWAAD

SHARCI

SHARCI L. 19 ee 30 Sebt. 1935. Dhismaha Mashruuca Horumarinta Bombeelmada Bog; 709

SHARCI L. 20 ee 30 Sebt. 1985, Isbeddelka 1aad ee Miisaaniyadda 1985.— » 719

QAYBTA LABAAD

XEER

W. M.

QAYBTA SADDEXAAD

TALOOYIN ISGAARSIIN OGEYSIIS IWM MAXKAMADDA DEGMADA BERBERA, 27-7-85, Lumid 2ba Jeeg War. ku qoran Maxamed Cabdulqaadir Xamuud 721

MAXKAMADDA G. KISIMAAYO, 10.6.81, Lumid Jeeg. War. ku qoran Cabdiraxi-

## QAYBTA LABAAD

## QAABKA MAAMULKA

### Qod. 8aad

(Xubnaha Mashruuca)

— Guddi maamul;
— Guddoomiye;
— Maareeye Guud iyo
— Maareeyayaal waaxeed.

### Qod 9aad

(Guddiga Maamulka)

1. Guddiga Maamulka waxa uu ka kooban yahay Guddoomiyaha, Maareeyaha Guud iyo min hal xubnn oo darajadoodu aaney ka yareyn Agaasime Waax oo masila Wasaaradda Maaliyadda, Wasaaradda Qorsheynta Qarankа iyo Wasaaradda Arrimaha Dibedda.

2. Xubnaha kor ku tilmaaman waxaa lagu magacaabayaa Xeer Madaxweyne, yadoo la dhegeystay soojeedinta Wasaaradda ku shaqada leh.

### Qod 10aad

(Fadhiyada Guddiga Maamulka)

1. Guddiga Maamulku wuxuu kulmayaa saddexdii biloodba mar iyo marka ay timaaddo baahida ku tilmaaman Qod. 19aad.

2. Waxaa isugu yeeraya Guddoomiyaha 15 maalmood ka hor fadhiga. isagoo warqadda isugu yeeridda shirka ugu lifaaqaya ajendaha Shirka.

3. Guddiga Maamulku wuxuu isugu iman karaa fadhi aan caadi ahayn waxaana isugu yeeri kara, marka ay jirto baahi weyn, Wasiirka Beeraha ama Guddoomiyaha. Waxaa kaloo la isugu yeeri karaa marka ay codsadaan Saddex ka mid ah Xubnaha Guddiga.

4. Fadhiga Guddiga Maamulku waxa uu ku ansaxavaa marka ay ka soo qayb galaan aqlabiyadda Xub-

Qod 11aad

(Hawlaha Guddiga Maamulka)

Guddiga Maamulku waxa uu qabtaa hawlaha soo socda:

a) Oggolaanshaha qorshe sannadeedka hawlgalka Mashruuca iyo wax ka beddel ddiisa;

b) Qiimeynta hawlgalka Mashruuca iyo heerka fulinta qorshe waqtiyeedkiisa;

t) Dersidda iyo go'aan ka gaaridda arrimaha la soo gudboonaada Mashruuca ee ka baxsan awoodda Guddoomiyaha iyo Maareeyaha Guud;

j) Oggolaanshaha miisaaniyadda ku-talo-galka, wax ka beddelidddeeda iyo midda xisaabxirka;

x) Oggolaanshaha kharajyada Mashruuca ee qiimahoodu ka badan yahay Shs. 500.000/=;

kh) Oggolaanshaha deymanka Mashruucu u baahdo gudaha ama dibeddaba;

d) Oggolaanshaha qoridda, dalliacaadda, mushaarka iyo gunnooyinka Shaqaalaha iyo shaqo ka fariisintooda.

Qod. 12aad

(Guddoomiyaha Guddiga Maamulka)

1. Guddoomiyaha Guddiga Maamulka waxaa lagu magacaabayaa Xeer Madaxweyne iyadoo la dhegeystay soojeedinta Wasiirka Beeraha.

2. Guddoomiyaha Guddiga Maamulku wuxuu qabanayaa hawlaha soo socda:

a) Isugu yeeridda fadhiyada Guddiga Maamulka ee caadiga iyo kuwa caadiga ahaynba, isagoo shir guddoomiye u noqonaya;

b) Kormeeridda iyo ilaalinta dhaqangelinta himiloovinka Mashruuca:

Qod. 17aad

(Hantida Mashruuca)

Hantida Mashruucu waxa ay ka kooban tahay:

a) Lacagta laga siiyey miisaaniyadda Dawladda Dhexe, maalgelintana loogu talo galay;

b) Deymanka uu u qaato maalgelin ahaan;

t) Deeqaha uu ka helo dalka gudihiisa iyo dibeddiisa;

j) Dakhliga ka soo gala tacabka Mashruuca;

x) Hantida guurtada iyo kuwa maguurtada ah ee Mashruucu uu leeyahay.

Qod. 18aad

(Miisaaniyadda ku talo galka)

1. Sannad-miisaaniyadeedka Mashruucu wuxuu bilaabanayaa 1da Jennaayo, wuxuuna dhammaanayaa 31ka Disember ee Sannad walba.

2. Maareeyaha Guud ee Mashruucu, inta ka horreysa 31ka Oktoobar, wuxuu soo diyaarinayaa miisaaniyadda ku talo galka ee sannadka cusub, wuxuuna hordhigayaa Guddiga MaamulJa.

3. Guddiga Maamulku waa in uu go'aan ka gaaraa miisaaniyadda la soo hordhigay inta ka horreysa 15ka Nofember ee sannadka socda. kaddibna loo gudbiyaa Wasiirka Beeraha.

4. Ku dhaqanka miisaaniyadda Mashruuca waxaa ansixinaya Wasiirka Beeraha.

Qod. 19aad

(Miisaaniyadda Xisaabxirka)

1. Maareeyaha Guud ee Mashruucu, inta ka horreysa 31ka Maarso. wuxuu isku dubbaridayaa xiritaanka miisaaniyadda ee sannadka la soo dhaafay, wuxuuna u gudbinayaa Guddiga Maamulka isagoo

2. Guddiga Maamulku waa in uu go'aan ka gaaraa xisaabxirka Mashruuca ugu dambeyn 30ka Abriile.

3. Go'aanka Guddiga Maamulka oo Xisaabxirku la socdo waxaa loo gudbinayaa Wasiirka Beeraha si loo ansixiyo.

Qod. 20aad
(Hantidhawraka Mashruuca)

1. Mashruucu wuxuu yeelanayaa Guddi Hantidhawr ah oo ka kooban Guddoomiye iyo laba xubnood.

2. Hantidhowrayaasha waxaa magacaabaya Wasiirka Beeraha.

Qod. 21aad
(Xilalka Hantidhowrka)

1. Hantidhowrayaashu waxay wadaafir iyo kelikeliba u baari karaan xisaabaadka Mashruuca, iyagoo oggolaansho ka haysta Guddoomiyahooda.

2. Waxay warbixin ka jeedin karaan Guddiga Maamulka hortiisa.

3. Waxay warbixin raacinayaan xisaabxirka Mashruuca inta aan loo gudbin Guddiga Maamulka.

4. Waxay ka qaybgeli karaan doodaha Guddiga Maamulka, gaar ahaan fadhiyada lagu falanqaynayo miisaaniyadaha Mashruuca. waxayna ka qaadan karaan hadal, hase yeeshee cod ma laha.

QAYBTA AFARAAD
AXKAAM GABAGABO AH
Qod. 22aad

Madaxweynaha JDS. isagoo dhegeystay soojeedinta Wasiirka Beeraha iyo ra'yiga Golaha Wasiirrada, wuxuu soo saarayaa Xeer-nidaamiye faahfaahinaya qaabka hawlgalka Mashruuca, dhammeystirayana Shareigan

( B u r r i n )

Waxaa la burriyey sharci kasta oo ka soo horjeeda ama aan la socon karin Sharcigan.

Qod. 24aad

(Dhaqangal)

Sharcigan wuxuu dhaqan gelayaa marka uu saxiixo Madaxweynaha Jamhuuriyadda Dimoqraadiga Soomaaliya. waxaana lagu soo saarayaa Faafinta Rasmiga ah ee Jamhuuriyadda.

Muqdisho, 30 Sep. 1985

MADAXWEYNAHA J.D.S.

(Maxamed Siyaad Barre)

Sharci lambar 20. taariikh 30 Sebt. 1985, Isbeddelka 1aad ee Miisaaniyadda 1985.-

MADAXWEYNAHA JDS

ISAGOO TIXGELINAYA: Oggolaanshaha Guddiga Joogtada ah ee Golaha Shacbiga;

WUXUU SOO SARAYAA

Sharciga soo socda:

Qod. 1aad

Waxaa la oggolaaday isbeddelka 1aad ee Miisaaniyadda 1985. sida ku muuqato lifaaqyada A iyo B ee Sharcigan.

Qod. 2aad

Sharcigani horay ayuu ka dhaqan gelayaa marka uu saxiixo Madaxweynaha JDS, waxaana lagu soo saari doonaa Faafinta Rasmiga ah ee Jamhuuriyadda.

Muqdisho, 30 Sep. 1985

MADAXWEYNAHA J.D.S.

(Maxamed Siyaad Barre)

L I F A A Q A « A »

— DAKHLIGA —

| MADAX — XIGE | TILMAAN | Qiyaasta hore | Is-beddelka | Qiyaasta cusub |
|---|---|---|---|---|
| 1.1.1 | Canshuurta keenidda alaabta | 2.276.000.000 | 300.000.000 | 2.576.000.000 |
| 1.1.2 | » diridda alaabta | 100.000.000 | 20.000.000 | 120.000.000 |
| 1.1.3 | » maamul iyo tirada | 420.000.000 | 180.000.000 | 600.000.000 |
| 1.1.4 | » diiwaan gelinta | 130.000.000 | 10.000.000 | 140.000.000 |
| 1.1.5 | » moorka | 200.000.000 | 40.000.000 | 240.000.000 |
| 4.1.1 | Ganaaxa iyo waraabinta kale khasabka | 15.000.000 | 50.000.000 | 65.000.000 |
| 7.1.1 | Dakhliga dibadda | 1.600.000.000 | 600.000.000 | 2.200.000.000 |
| | Total | 4.741.000.000 | 1.200.000.000 | 5.941.000.000 |

L I F A A Q A « B »

— KHARAJKA —

| Madax | Madax xige | Tilmaan | Qiyaasta hare | Isbeddelka | Qiyaasta cusub |
|---|---|---|---|---|---|
| .4.0 | 1.2.8 (D) | Kaalmada Kaydka | 150.000.000 | 100.000.000 | 250.000.000 |
| | 1.2.8 (R) | Kharajyada kala duwan | 835.382.743 | 600.000.000 | 1.435.382.743 |
| | 1.3.0 (T) | Korsaarka deynta dibadda | 713.951.280 | 120.000.000 | 833.951.280 |
| | 1.4.1 | Deeqda iyo qaaraanka joogtada ah | 14.700.000 | 50.000.000 | 64.700.000 |
| | 3.2.1 | Bibinta deynta gudaha | 100.000.000 | 50.000.000 | 150.000.000 |
| | 3.2.2 | bixinta deynta dibadda | 937.604.600 | 280.000.000 | 1.217.604.600 |
| | | Total | 2.751.638.623 | 1.200.000.000 | 3.951.638.623 |

MAXKAMADDA DEGMADA/GOBOLKA BERBERA

Guddoomiyaha Maxkamadda Gob/Degmada Berbera

MARKUU ARKAY: Dacwadda hore ku qoran;

MARKUU OGAADEY: Waxa ay ku saabsan tahay Arkayna Baafinta Bangiga Ganacsiga iyo Kaydka Soomaaliyeed Laanta Berbera L. yahay Ibir lana qoray 10.12.84. Wuxuu Ogaadey inay tahay Shaqadiisa:-

MARKUU ARKAY: Qod. 69 D.L. 8.9.65 n. 2

WUXUU CADDAYNAYAA

Lumidda Jeegagga Wareega Lamb. kala yihiin Jeeg L. 495079 ee la qoray 15.11.84. kuna qoran tahay Lacag dhan 20.000/= Labaatan kun Sh.So. iyo Jeegga L. 495080 lana qoray 15.11.84, kuna qoran tahay Lacag dhan 20,000/= Labaatan kun Sh.So. kuwaasi oo ku qornaa Maxamed Cabdilqaadir Maxamuud iskana lahaa Abokor Cige Xasan.

WUXUU AMRAYAA

In loo sameeyo Jeegagga Wareega ee cusub ninka kor ku magacaaban (30) beri kaddib markii Amarkan lagu soo saaro Faafinta Rasmiga ah ee Dawladda.

WAKAA LA CODSANAYAA

In Jeegagga cusub ee la samayn doono gacanta laga saaro Abokor Cige Xasan ama qof isaga ka sita Wakaalad Sharci ah iyadoo la sugayo (30) soddonka cisho ee kor lagu soo sheegay.

BERBERA, 27.7.1985

Guddoomiyaha Maxkamadda G. Degmada Berbera
(Jaalle Maxamed Axmed Wardheere)

Kaaliyaha Maxkamadda
(Sahal Dayax Weerar)

## MAXKAMADDA GOBOLKA J/HOOSE

Guddoomiyaha Maxkamadda G. J/Hoose

MARKUU AKHRIYAY: Dacwadda kor ku qoran;

HADDUU HUBSADAY: In Buugga Kaydka Bangiga ee lumay ee lambarkiisu yahay 5538, laguna soo saaray Bangiga Ganacsiga iyo Kaydka Laanta Kismaayo, kuna qorneyd lacag dhan Sh.So. 2.000/= (Labakun) uu iska leeyahay Jaalle Cabdiraxmaan Cali Maxamed.

HADDUU ARKAY: Qodobka 69aad sharciga lamb. 2 ee 9.9.1965;

### WUXUU XEERIYEY

In la baabi'iyo (Ammortamento) Buugga Kaydka lamb. 5538 oo ku qoran magaca Cabdiraxmaan Cali Maxamed ayna ku jirto lacag dhan Sh.So. 2.000/= (Labakun).

### WUXUU XEERIYEY

In Bangiga Ganacsiga iyo Kaydka Laanta Kismaayo u beddelo Cabdiraxmaan Cali Maxamed, Buugga Kaydka ee Bangiga ee kor ku tilmaaman, una sameeyo mid la mid ah, kaddib markay ka soo wareegto muddo aan ka yareyn 15 (Tobaniyoshan) maalmood, maalinta go'aanka lagu daabaco Faafinta Rasmiga ah ee Jamhuuriyadda Dimoqraadiga Soomaaliya, haddii inta ka horeysa aan ishortaag laga keenin.

Kismaayo, 10.6.1981

Guddiimiyaha Maxkamadda G. J/Hoose
(Dr. Cumar Yuusuf Faarax)

IIB MA GALE

# FAAFINTA RASMIGA AH

الرسميـة  الجريـدة

Sannadka 13aad 17ka Okt. 1985 L. 1 r 10

JAMHUURIYADDA DIMOQRAADIGA SOOMAALIYA

لجمهورية الصومال الديمقراطية

FAAFIN BIL SOO BAXA جريدة شهرية

**QIIMADU: waa** 5 shilin lambar waliba — **RUKUNKA:** Sanadii **waa** Sh. 100 Soomaaliya gudeheeda - dibaddedana **waa Shs. 300. Rubunka la weydiisto** waqtiga loo gooyey wuxuu **ka** bilabmaa 1 Janaayo. **Qiimaha** qortitaanku F. R. halkii sadar iyo waxii **ka** yar **waa** 2 laba Sh. Rukunka iyo qoritaanku **waxaa** la weydiistaa **Laanta Maamulka Faafinta** Rasmiga ah **Lacagta** waxaa lagu bixinayaa **Xafiiska** Canshuuraha ee **Wasaaradda Lacagta.**

K O O B N I I N

QAYBTA KOWAAD

SHARCI

W. M.

QAYBTA LABAAD

XEER

XEER MADAXWEYNAHA JDS, L. 35 ee 12 Sebt. 1985, Wax ka beddelid Xeerka MJDA ee Lamb. 93 ee 7.9.1977. BOG. 725

XEER MADAXWEYNAHA JDS, L. 36 ee 24 Agoosto 1985, Dhismaha Golaha Samafalka Qaranka. » 729

XEER WASIIRKA W/SHAQADA IYO ISBOORTIGA L. 7 ee 5 Sebt. 1985, Ilaalinta Anshaxa iyo Garoomada Cay. ka-

QAYBTA SAD/XAAD

TALOOYIN ISGAARSIIN OGEYSIIS IWM.

MAXKAMADDA G. BANAADIR, 25.7.85, Lumid Buug-Kayd L. 22548 ku qoran Yuusuf Xasan Caddow L. 407 » 743

MAXKAMADDA G. TOGDHEER, 1.8.1985, Lumid Jeeg.War. L. 533215 ku qoran Cali Xuseen Axmed L. 408 » 744

MAXKAMADDA G, HARGEYSA, 17.8.85, Lumid Jeeg War. L. 530739 ku qoran Axmed Muxumed Maxamuud L. 499 » 745

MAXKAMADDA G. BANAADIR, 8.9.85, Lumid Jeeg.War. L. 096034 ku qoran Xersi Xaaji Jaamac L. 410 » 746

MAXKAMADDA G. BANAADIR, 14.9.85, Lumid Jeeg.War. L. 619444 ku qoran Kormeere Dhaqaalaha Gurlga L. 411 » 747

MAXKAMADDA G. BANAADIR, 17.9.85, Lumid Buug-Kayd L. 2345 ku qoran Jaamac Aadan Maxamed L. 412 » 748

MAXKAMADDA G. BANAADIR, 8.9.85, Lumid Jeeg.War. L. 614198 ku qoran Cabdiraxmaan Xaaji Diiriye L. 413 » 749

MAXKAMADDA G. BANAADIR, 8.9.85, Lumid Jeeg.War. L. 614199 ku qoran Cabdiraxmaan Xaaji Diiriye L. 414 » 750

MAXKAMADDA G. TOGDHEER, 14.9.85, Lumid Jeeg.War. L. 618796 ku qoran Jaamac Cali Carab L. 415 » 751

MAXKAMADDA G. BANAADIR, 30.9.85, Lumid Jeeg War. L. 0439021 ku qoran Cabdi Cali Xasan L. 416 » 752

MAXKAMADDA G. TOGDHEER 3.10.85 Lumid Jeegag War. L. 0178406, 0181660,-

MAXKAMADDA G. BANAADIR, 7.10.1985, Lumid Jeeg. War. L. 017713 ku qoran Khadiija Cabdullaahi Cali L. 418 » 721

MAXKAMADDA G. BANAADIR, 7.10.1985, Lumid Jeeg.War. L. 0180470 ku qoran Khadiija Cabdullaahi Cali L. 419 » 722

MAXKAMADDA G. BANAADIR, 7.10.1985, Lumid Jeeg.War. L. 534562 ku qoran Khadiija Cabdullaahi Cali L. 420 » 723

MAXKAMADDA G. BANAADIR, 7.10.1985, Lumid Buug-Kayd L. 432/85 ku qoran Isaaq Ibraahim Macallin L. 421 » 724

MAXKAMADDA G. TOGDHEER, 15.8.85, Lumid Jeeg. War. L. 0235431 ku qoran Muuse AxmedSamatar L. 422 » 725

MAXKAMADDA G. BANAADIR, 7.10.85, Lumid Jeeg. War. L. 662770 ku qoran Caasho Jaamac Cabdi L. 423 » 726

MAXKAMADDA G. BANAADIR, 7.10.85, Lumid Jeeg.War. L. 018179 ku qoran Caasho Jaamac Cabdi L. 424 » 727

MAXKAMADDA G. BANAADIR, 7.10.85, Lumid Jeeg.War. L. 0177832 ku qoran Caasho Jaamac Cabdi L. 425 » 728

MAXKAMADDA G. BANAADIR, 7.10.85, Lumid Jeeg.War. L. 544281 ku qoran Caasho Jaamac Cabdi L. 426 » 729

MAXKAMADDA G. TOGDHEER 16.6.85, Lumid Jeeg.War. L. 023126 ku qoran Cali Saciid Axmed L. 427 » 730

MAXKAMADDA G. W/G. HARGEYSA, 2.10.85. Lumid Jeegag War. 454305, 454306, 188142 ku qoran Maxamed Ismaaciil Dirir L. 428 » 731

QAYBTA LABAAL

XEER

XEER MADAXWEYNAHA JDS, L. 35 ee 12 Sebt. 1985, Wax ka beddelid Xeerkar MJDS ee Lr. 93 ee 7.9.1977

MADAXWEYAAHA JDS

MARKUU ARKAY: Qod. 82 ee Dastuurka Dalka;

MARKUU AQOONSADAY: Inay tahay lagama maarmaan in Xeerka JUS Lr. 93 wax laga beddelo;

ISAGOO TIXGELIYEY: Taladii uu soo jeediyey Wasiirka Wasaaradda H.T.S.;

ISAGOO DHAGEYSTAY: Golaha Wasiirrada.

WUXUU SOO SAARAYAA

Xeerka soo socda:

QODOBKA 1AAD

Qodobada 22/2, 27, 28, 59, 60, 61 iyo 62 ee Xeerka Jaamacadda Ummadda Lr. 93, waxa loo beddelay sida hoos ku qoran:

Qodobka 22/2: Imtixaannada kor ku tilmaaman ka sokow, ardayga waxa laga qaadi doonaa intii uu xilliga socdo, ugu yaraan laba imtixaan oo tijaabo ah ( Tests ). Natiijada Imtixaannadaas waxa ardayga loogu tixgelinayaa markii loo qiimaynaayo Imtixaannada Xilliga.

Qodobka 27aad: MAGUDBAYAASHA IMTIXAANNADA XILLIGA

Ardaygii ku dhaca Imtixaannada xilliga hal maado, ama wax ka badan waxa loo oggol yahay in imtixaankaas ama imtixaannadaas mar labaad uu dhiibo nasashada xilligaas dhammaadkiisa. Hadday markaas dambena uu suuro geli weydo inuu gudbo waxa la raacayaa nidaamka soo socda:

1) Ardayga ku qoran xilliga 1aad iyo ardayga dhigta xilliga ka horreeya midka ugu dambeeya (pen-

ultimo Semestro), haddii uu ku dhaco hal ilaa laba maado, waxa loo oggol yahay inuu u gudbo xilliga kaa ka sarreeya.

Haddii ardaygaasi uu ku dhaco laba maaddo wax ka badan waa laga tirtirayaa Jaamacadda.

2) Ardayga ku qoran xilliyada kale (oo aan ahayn xilliga ugu dambeeya), haddii uu ku dhaco hal maaddo keliya, waxa loo oggol yahay inuu u gudbo xilliga kaa ka sarreeya (Semetro Avanzato). Haddii ardaygaasi uu ku dhaco hal maaddo wax ka badan, waa laga tirtirayaa Jaamacadda.

3) Ardayga dhigta xilliga ugu dambeeya (Ultima Semestro), haddii uu ku dhaco hal maaddo wax ka badan, waxa la siinayaa fursan hal xilli ah si uu ku dhammaystiro Waxbarashadiisa.

Qodobka 28aad: FURSADDA NAQTIINKA IMTIXAANKA XILLIGA

Ardayga ku tilmaanan Qod. 27aad lambarka 1aad, 2aad iyo 3aad, waa inuu dhiibaa imtixaanka ama imtixaannada lagu leeyahay xilliga cusub dhammaadkiisa.

Haddii xilliga loo oggolaaday uga faa'iideysan waayo inuu ka gudbo imtixaankaas ama imtixaannadaas, waa laga tirtirayaa Jaamacadda.

Qodobka 59aad: 1. Bare Kaaliyannimo waxa loogu soo wareejin karaa ama loogu qaadan karaa Jaamacadda, qofkii wata Shahaadada loo yaqaan «Bachelor's «Masters» ama kuwa u dhigma.

2. Heerka Shahaadadu waa inuu ahaadaa «aad u fiican» oo u dhiganta darajada 99/110 — 90/110.

Qodobka 60aad: Bare waxa Jaamacadda loogu qaadan karaa ama loou soo wareejin karaa ama loo dallacsiin karaa:

1. Qofkii haysta shahaadada loo yaqaan «Bachelors» ama mid u dhiganta oo ay weheliso dhan (5) sano taclooneed oo uu wax ka dhigay Jaamacad, kuna guuleystay hawl cilmi baarid ah.

2. Qof kii haysta shahaadada loo yaqaan «Masters» ama mid u dhiganta oo ay u raacdo afar (4) sano tacliineed oo uu wax ka dhigay Jaamacad kuna guuleystay hawl cilmi baaris oo qiimo u leh takhasuskiisa.

3. Qof kii haysta Shahaadada loo yaqaan Ph. D. ama mid u dhiganta oo ay weheliso hal (1) Sano Tacliineed oo uu wax ka dhigay Jaamacad kuna guuleystay Hawl cilmi baaris ah oo qiimo u leh takhasuskiisa.

Qodobka Shaad: Bare Sare waxa Jaamacadda loogu qaadan karaa ama loogu soo wareejin karaa ama loo dallacsiin karaa:

1. Qof kii haysta shahaadada loo yaqaan «Bachelor's» ama mid u dhiganta ku guuleystay hawl cilmi baaris oo qiimo gaar ahaaneed u leh takhasuskiisa, lana yimaado waayo aragnimo inuu Jaamacad wax ka dhigay muddo aan ka yarayn Sagaal (9) sano tacliineed.

2. Qof kii haysta shahaadada loo yaqaan «Master's» ama mid u dhiganta kuna guuleystay hawl cilmi baarineed oo qiimo gaar ahaaneed u leh takhasuskiisa, lana yimaado waayo aragnimo inuu Jaamacad wax ka dhigay muddo laddoba (sano) tacliineed.

3. Qof kii haysta shahaadada loo yaqaan «Ph.D.» ama mid u dhiganta oo ay u raacdo waayo aragnimo inuu Jaamacad wax ka dhigay muddo aan ka yarayn saddex (3) sano tacliineed, kuna guuleystay hawl cilmi baarineed oo qiimo u leh Takhasuskiisa.

Qodobka Toddobaad: Barfasoor waxa loogu qaadan karaa, loogu soo wareejin karaa, ama loo dallacsiin karaa:

1. Qof kii haysta shahaadada loo yaqaan «Master's» ama mid u dhiganta, kuna guuleystay hawl cilmi baarineed oo uu ku heysa biseyl heer sare ah, lana yimaado waayo aragnimo inuu Jaamacad wax ka dhigay muddo Saddex iyo toban (13) sano tacliineed.

2. Qof kii haysta shahaadada loo yaqaan «Ph.D.»

need oo muujinaysa bisayl heer sare [illegible] waado waayo aragnimo inuu Jaamacad wa[illegible]ddo sagaal (9) sano ah.

QODOBKA 2AAD

Xeerka lr. 93 oo 7-9-1977, wuxuu [illegible] qodobka 65 Bis ee soo socda:

Qodobka 65 bis: [illegible] haddii ay [illegible] uuna wax soo saarin muhiim [illegible] xiriira (qoraallo cilm. baaris, [illegible] waxa lagu wareejinayaa hawsha uu ku hay[illegible].

QODOBKA 3AAD

Xeer kasta oo ka soo horjeeda xeer[illegible] waa la baabi'iyey.

QODOBKA 4AAD

Xeerkani wuxuu dhaqan gelayaa [illegible] dixo Madaxweynaha Jamhuuriyadda [illegible] maliya.

Muqdisho, 12 Sep. 1985

MADAXWEYNAHA [illegible]

(Jaalle Maxamed [illegible])

XEER MADAXWEYNAHA JDS, L. 36 ee 24 Agoosto 1985, Dhismaha Golaha Samafalka Qaranka.

MADAXWEYNAHA JDS

MARKUU ARKAY: Dastuurka Jamhuuriyadda Dimoqraadiga Soomaaliya siiba qodobada 53aad, 56aad iyo 82aad;

MARKUU ARKAY: Sharciyada Lamb. 11 ee 3.2.1977, L. 24 ee 18.11.1963, Lamb. 13 ee 26.5.1962 iyo Xeer-Madaxweynaha L. 130 ee 3.6.1962 oo saameeyaan dhismo hay'ado ama Gole iyo arrimaha saameeyo Samafalka la xiriira bulshada iyo Nidaamka ay howlahooda si Madax-bannaani ku gutaan iyadoo ay Dawladda ka qayb-qaadaneyso isla markaasna ku taakuleyso sidii ay hay'adahaasi hawlahooda ku gudan lahaayeen;

ISAGOO AQOONSADAY: Inay tahay lagama maarmaan in la dhiso Gole lagu magacaabo Golaha Samafalka Qaranka oo gacan weyn ka geysan doonaan hay'adaha gaarka ah iyo kuwa Dawladda oo ku hawlan arrimaha Samafalka;

MARKUU TIXGELIYEY: Talo soo-jeedinta Wasiirka Wasaaradda Shaqada iyo Ispoortiga.

WUXUU SOO SAARAYAA

DEKREETADAN:

Qod. 1aad

1. Waxaa Xeerkan lagu dhisey Gole lagu magacaabo Golaha Samafalka Qaranka.

2. Golaha waxaa loo aqoonsaday inuu yahay Hay'ad Madax Bannaan oo aan faa'iido doon ahayn, wuxuuna leeyahay qofnimo sharci ah.

3. Goluhuwuxuu ka kooban yahay qeybaha soo socda:

i) Shirweynaha

iii) Guddoomiyaha

iv) Xoghaynta.

Qod. 2aad

1. Ujeeddada Golaha Samafalka Qaranka waa sida soo socota:

a) Horumarinta iyo isuduwidda hawlaha Samafalka Bulshada Guud ahaan,

b) Hawlaha gar-gaarka ah iyo gurmadyada lagaga hor-tegayo ama wax lagaga qabanayo masaa'ibka dabiiciga ah,

t) Daryeelka, Taakuleynta iyo dhaqan celinta Kooxaha Bulshada tabarta yar sida Naafada, Dhallaanka iyo Dadka Da'da ah iwm.

2. Goluhu si uu Ujeeddooyinkaas wax uga qabto wuxuu dejinayaa Barnaamijyo iyo Mashaariic kala duwan isagoo mar kasta iskaashi la yeelanaya Hey'adaha Dawladda oo ku hawl leh Samafalka iyo arrimaha horumarinta Bulshada, Ururrada Samafalka ee gaarka ah, Dadweynaha Soomaaliyeed iyo Hey'adaha Caalamiga ah ee ka jira Dunida oo ujeedooyinkoodu yihiin Samafalka Dadweynaha. Sidaa awgeedna xilalka Goluhu qabanayo waa sida soo socota:

a) Isku-duwidda hawlaha la xiriira Samafalka iyo xiriirinta dhammaan Hey'adaha Samafalka ee ka jira dalka gudihiisa iyo kuwa la mid ah ee dibedda ka jira.

b) Soo Uruurinta iyo isku-duwidda xogta iyo tirokoobyada la xiriirta kooxaha kor ku tilmaaman,

t) Abaabulidda, Taakuleynta, Abuuridda iyo dhiiri-gelinta dhismo Ururro Samafal,

j) Ku-buraarujinta dadweynaha baahida loo qabo iskaashiga iyo isu samafalka,

x) Gacan ku siinta aqoosiga Ururrada Samafalka oo ka dhismi kara Dalka iyo gacan ku siinta

kh) Dejinta barnaamijyada mashaariicda, sameynta cilmi baarista loo baahan yahay iyo siinta mudnaanshaha ay kala leeyihiin,

r) Sare u qaadidda dareenka dadweynaha, Ururrada samafalka siay qeyb uga qaataan hawlaha samafalka,

s) Abaabulidda, Uruurinta iyo dhiirri-gelinta Kaalmooyinka Qaranka iyo kuwa Caalamiga ah ee la xiriira hawlaha samafalka.

Qod. 3aad

Xilka Shirweynaha waa sida soo socota:

1. Dejinta Siyaasadda Guud, Qorshaha iyo barnaamijka lagu fulinayo Ujeeddooyinka Golaha Samafalka Qaranka.

2. Oggolaanshaha hab-raaca Lacagta, Xisaab-xirka sannad Maaliyadeedka iyo Miisaaniyadda Sannadka soo socoda:-

t) Ansaxinta howlaha Guddiga Fulinta iyo Xoghaynta Golahu soo qabtay muddada u dhexeeya labada shir-weyne.

j) Doorashada Guddoomiyaha Golaha, Guddoomiye ku-xigeenada, Xoghayaha iyo xubnaha Guddiga fulinta.

x) Go'aan ka gaaridda arrimihii kale oo Guddiga fulintu u arko lagama maarmaan in uu hordhigo shirweynaha.

3. Shirweynaha Golaha wuxuu ka koobmaa:

a) Qof kasta oo howlaha samafalka doonayaa inuu taakuleeyo lagana oggolaado codsigiisa,

b) Wakiilo ka kala socda Hay'adaha ku howl leh samafalka bulshadda,

t) Ururrada Samafalka Waddaniga ah iyo kuwo ka dhismi kara.

4. Goluhu wuxuu isu imaanayaa sannadkiiba hal mar, hase yeeshee Guddoomiyahu wuxuu isugu yeeri karaa golaha shir aan caadi ahayn marka ay jirto baahi deg-deg ah, shirweynaha aan caadi ahayn waxaa looga doodi karaa arrimaha soo socda:

a) Wax ka beddelka xeerka Golaha hase yeeshee Ujeeddooyinkiisa asaasiga ah waxba kama beddeli karo,

b) Haddii ay jirto dhibaato weyn oo keenta baahi loo qabo abaabul iyo gurmad aan caadi ahayn,

t) Haddii ay istiqaala keenaan xubnaha Guddiga fulinta qaarkood ama jagadoodu bannaanaato jirro ama geeri awgeed loona baahdo in jagadooda xubno kale loo doorto.

5. Fadhiga Golaha wuxuu ansaxayaa marka ay ka soo qeyb-galaan Wakiiladda ka socda Hay'adaha Dawladda iyo Ururrada samafalka intooda badan iyo xubnaha golaha badidooda go'aanadana waxaa lagu ansixinayaa cod hal dheeri ah tirada ka soo qeyb gasha.

Qod. 4aad

1. Guddiga fulinta ee Golahu wuxuu ka kooban yahay:

a) Guddoomiye

b) Guddoomiye ku-xigeeno

t) Xoghaye

j) Affar xubnood oo ka socoda hay'adaha samafalka ama dadweynaha xubnaha ka ah Golaha Samafalka Qaranka.

2. Guddiga Fulintu wuxuu wakiil ka yahay Shirweynaha wuxuuna sii wad aafulinta hawlaha Golaha muddada u dhexeysa labada Shirweyne.

Guddigu wuxuu leeyahay xilalka soo socda:

a) Talo ka soo jeedinta Mashaariicda iyo Barnaamijyada la xiriira Ujeeddooyinka Golaha,

b) Kormeerka iyo hubsashada fulinta go'aamada

iyo talooyinka ka soo fula Shirweynaha,

t) Go'aan ka gaaridda arrimaha deg-degga ah oo lagu fulinayo Ujeeddooyinka Golaha ka dibna ka ansaxiyo Shirweynaha,

j) Magacaabidda Hantidhowraha iyo Saraakiisha Xoghaynta,

x) Talo ka soo jeedinta Xisaab-Xirka, iyo Miisaaniyadda Sannadka soo socda,

kh) Xadidaadda Mushaarooyinka iyo Gunnooyinka Xoghayaha iyo Saraakiisha Xoghaynta.

3. Guddiga Fulinta oo doorashadiisa Shirweynuhu leeyahay wuxuu xilka haynayaa Saddex Sano, wuxuuna isu imaanayaa Saddexdii Biloodba hal mar iyo mar allaalemarkii uu Guddoomiyaha Goluhu u arko lagama-mraa-maan waxaana go'aannadiisu ku ansaxayaan Xubnihiisa intooda badan.

Qod. 5aad

1. Xilka Guddoomiyaha Golaha:

a) Guddoominta shirarka, Shirweynaha iyo fadhiyada Guddiga Fulinta, wuxuuna u adeegsanayaa xilkaasi Xoghayntiisa,

b) Wuxuu mas'uul ka yahay fulinta go'aannada ka soo fula Shirweynaha iyo Guddiga Maamulka,

t) Soo saaridda awaamiirta arrimaha la xiriira fulinta Ujeeddooyinka Golaha iyo kuwa hawlmaalmeedka.

2. Guddoomiyaha waa matilaha Golaha xagga Hay'adaha Qaranka, Dawladda iyo Dadweynaha.

3. Guddoomiyaha wuxuu xilkiisa qaar ka mid ah u wakiilan karaa Guddoomiye ku-xigeennada.

Qod. 6aad

1. Xoghaynta waa qeybta fulisa hawl-maalmeed-

2. Xoghayntu waxay u xil-saaran tahay hawlaha la xiriira Shirweynaha iyo kan Guddiga Fulinta oo uu Madax ka yahay Guddoomiyaha, waxayna qabataa:

a) Diyaarinta qoraalada fadhiyada Shirweynaha iyo fadhiyada Guddiga fulinta,

b) Abaabulidda qorshaha xilliga iyo meesha la isugu imaanayo iyo gaarsiinta Xubnaha Shirweynaha iyo Guddiga Fulinta shirarka iyo fadhiyada jira iyadoo mar walba raaceysa talada Guddoomiyaha,

t) Xiriirinta hey'adaha Dawladda iyo Ururrada Samafalka,

j) Waxay mas'uul ka tahay maamulka Xisaabaadka keydinta iyo hantida Golaha,

x) U diyaarinta Golaha talooyinka farsamo, daraasadaha iyo Warbixinada la xiriira Ujeeddooyinka Golaha,

kh) La socodsiinta Ururrada Bulshada iyo Dadweynaha natiijooyinka muhiimka ah ee laga gaaray wax-qabadka Golaha Samafalka Qaranka,

r) Diyaarinta Miisaaniyadda ku tala-galka, Xisaab xirka waxeyna u gudbiyaan xubnaha ku shaqada leh si loo ansixiyo,

s) Diyaarinta Ajendada Shirweynaha iyo kan Guddiga fulinta iyadoo ku shaqeynaysa tilmaamaha Guddoomiyaha.

Qod. 7aad

1. Goluhu wuxuu leeyahay Miisaaniyad u gaar ah,

2. Hantida Golaha waxay ka kooban tahay:

a) Deeq ay ka hesho Dawladda,

b) Lacagta ka soo xerooda xubnaha ka mid ah Golaha,

t) Deeq kasta oo uga yimaada Dalka Gudihiisa ama dibeddiisa ha noqdeen Dadweyne ama Hay'ado oo ay ku jiraan Hay'ado Dawli iyo Caalamiba.

3. Canshuur dhaaf ay yeelan karto Hay'addu (GOLAHA SAMAFALKA QARANKA) wuxuu la mid noqonayaa kuwo loo oggolaaday Ururrada Samafalka ee Dalka ka jira sida Ururka Bisha Cas.

Qod. 8aad

Xeerkan wuxuu dhaqan galayaa marka uu saxiixo Madaxweynaha Jamhuuriyadda Dimoqraadiga Soomaaliya.

Ilaa iyo inta Shirweyne lagu abaabulaayo, Xubnaha leh abaabulka Golaha Samafalka Qaranka waxay noqonayaan kuwo si ku meel gaar ah xilka Guddiga Fulinta u qabta.

Xeerkan waxaa lagu soo saarayaa Faafinta Rasmiga ah ee Jamhuuriyadda.

Muqdisho, 24.8.85

MADAXWEYNAHA JDS
(Jaalle Maxamed Siyaad Barre)

WASIIRKA WASAARADDA MAALIYADDA
(S.Guuto Maxamed Sheekh Cismaan)

WASIIRKA W. SHAQADA IYO ISPOORTIGA
(G.Sare Mire Awaare Jaamac)

Waan aragnay ee Diiwaangelinnay
Diiwaanka lam. 1 Bog. lam. 49
Muqdisho, 9 Sebt. 1985,
Hanti dhawraha Guud
Dr. Xuseen Cabdulle Cali

XEER WASIIRKA W.SHAQADA IYO ISBOORTIGA 7 ee 5 Sept. 1985, Ilaalinta Anshaxa iyo Garoomada Cay. kala duwan.

WASIIRKA

Wasiirka Shaqada Isboortiga iyo Arrimaha Bulshada

MARKUU ARKAY: Sharciga L.3 ee 15 Disember 1976 Qodobka 15aad

MARKUU ARKAY: Xeerka L. 22 ee 20 Abriil 1982

MARKUU ARKAY: Falxumida Anshax iyo Asluub xumida ay Tababaradayaasha Kaaliyayaasha iyo Cayaaraha ku sameeyaan Garoomada Cayaaraha.

MARKUU TIXGELIYEY: Baahida loo qabo in Maam ulka Cayaaraha u noqodo mid ku dhisan anshax iyo Asluub wanaag isla markaana raali geliya dad weynaha u soo daawasha taga.

WUXUU SOO SAARAYAA XEERKA SOO SOCDA

QAYBTA 1aad

TABABARAYAASHA IYO KAALIYEyAASHA

Ka mid noqoshada Tababarayaasha iyo Kaaliyeyaasha Isboortiga Noocyadiisa kala duwan ee dalka JDS

Qodobka 1aad

Waxaa tababare Isboorti ama Kaaliye tababare loo qaadan karaa qof kasta oo Soomaali ah da'diisuna tahay 30 ilaa 60 sano haddii uu buuxiyo shuruudaha Xeer kani tilmaamayo.

Qodobka 2aad

Qofka Tababare ama Kaaliye tababare loo qaadana yo waa in uu yahay qof lixaadkiisu u dhan yahay kana fiyow Cudurada la is qaadsiiyo Caafimaadkiisuna guud na Wanaagsan yahay.

Qodobka 3aad

Qofka tababare ama Kaaliye tababare noqonaaya waa in haystaa Shahaadada Dugsiga Dhexe, isla ma

Qodobka 4aad

Naadiyada Isboortiga dalku qof Ajnebi ah tababare ama Kaaliye tababare waa u qaadan karaan, waase haddii lala galo heshiis rasmi ah oo waqti yeysan.

Qodobka 5aad

Qof kasta oo Naadi Isboorti tababare ama Kaaliye tababare u noqonaya waa in marka hore laga keenaa warbixin tifaf tiran oo koobeysa Taariikh nololeedkiisa, aqoontiisa xirfadeed iyo tacliineed ka dibna hadduu buuxiyo shuruudaha laga doonayo waa in ogolaansho qoraal ah uu siiyaa Xiriirka uu khuseeyo nooca Cayaar ta loo qaadanayo isaga oo la tashaday Xoghaynta Olim bikada.

Qodobka 6aad

Qof kasta oo tababare ama Kaaliye tababare loo qaadanayo haddii uu buuxiyo shuruudaha Xeerkaanu tilmaamayo waa in lala galaa heshiis qoraal ah oo labo da dhinac isla ogolaadeen wada saxiixeena.

Qodobka 7aad

Heshiiska dhexmaraya labada dhinac waa in lagu cadeeyo waqtiga uu dhaqan gelayo, waqtiga uu dham aanayo, nooca cayaarta loo qaatay iyo wixi ququuq ah oo uu leeyaha sida Mushaarka, Gunnada, Guriga, Gaadiidka iyo wixii la mid ah.

Qodobka 8aad

Haddii labada dhinac midkood ka baxayo heshiiska waa in uu ogeysiiyo qoraal ah siiyaa dhinaca kale mud do 30 casho ka hor.

QAYBTA 2AAD

Waajibaadka Tababaraha Ama Kaaliyaha

Qodobka 9aad

Tababar kasta ama Kaaliyihiisa waxaa waajib mu qadas ku ah in uu Kooxdiisa tababaro kana dhiso xag

Qodobka 10aad

Waxaa xil weyni ka saaran yahay ilaalinta iyo adk eynta anshaxa iyo asluubta wanaagsa kooxdiisa.

Qodobka 11aad

Wixii anshax iyo asluub xumi ah oo Kooxdiisu si wada jir an Garoonka Cayaaraha Gudihiisa ama dibed diisa ku sameyso isga ayaa mas'uul ka ah waana lagu ciqaabayaa.

Qodobka 12aad

Haddii ruux cayaartooy ahi falxumo ula kac ah ku sameeyo Garoomaha ama Cayaartooyda ka soo horjeed da mas'uul kama ah tababaruhu haddii aan la helin xog cadeyneysa in uu lug ku leeyahay Ciqaabtana waxaa lagu qaadayaa Cayaartoyda falxumada sameeyey.

QAYBTA 3AAD

Falalka ka Reeban Tababaraha iyo Kaaliyihiisa

Qodobka 13aad

— Waxaa ka reeban in uu kooxdiisa ka saaro garoon ka iyadoo Cayaar rasmi ahi socoto nooc kasta ha ahate
— In uu Cayaartoydiisa ku dhiirri geliyo dagaal ama falxumo kale goob kasta ha joogeenee.

— In uu Cayaar u soo safo Cayaartoy ayaan u lahay yn qalabkii Cayaarta ee Sharciyeysanaa.
— In uu Aflagaado ama hanjabaad u geysto dhaqdhaqaaqa ayaasha Cayaaraha dhexdhexaadinaya Saacadaha Cayaartu socoto ama marka ay dhamaato

— In uu Miiska keydka ka tanaggado hala Cayaarta socoto

— In uu khayaamo garoonka ku soo galiyo Cayaarto aan sharcigu u ogoleyn ama aan rasmi ahaan Diivaan ka ugu jirin.

— In uu is hortaago hawlaha Garsoorka ama si qalad can uga turjumo shuruucda iyo Xeerarka u degsan maa

QAYBTA 4AAD

Ciqaabaadka Tababaraha iyo Kaaliyihiisa

Qodobka 14aad

Haddii Tababaraha iyo Kaaliyihiisu ay ku cadaadaan mid ka mid ah falalka ku xusan qodobka 3aad qaybta 1aad ee Xeerkaani waxay mid mid ama wadajir u mudanayaan Ciqaabaha soo socda mid ka mid ah ama laba ka mid ah:

b) In Canaan Oraah ah la siiyo

t) In Canaan qoraal ah la siiyo ama digniin la siiyo

j) In Tababaranimada laga fariisiyo muddo ugu badnaan 6 Bilood

x) In Tababaranimada laga qaado muddo laba sano ah ugu yaraan

kh) In laga qaado aqoonsiga xirfadda Tababaranimo

d) In laga joojiyo gebi ahaan Tababaranimada Ispoortiga dalka gudihiisa iyo Debeddiisa.

QAYBTA 5AAD

Tababaraha iyo Kaaliyihiisu waxaa loo Ogolyyahay.

Qodobka 15aad

— In uu dacwo qoraal ah u soo gudbiyo xiriirka ay Cayaartu khuseyso haddii xad gudub ama cadaalad xumo uu ka tirsado Garsoorayaasha Cayaarta dhexdhexaadinaya kolka Cayaartu dhamaato isaga oo soo marinaya Naadiga uu hoos yimaado soona raacinaya 5CO. Sh.So.
— Waa loo ogol yahay isku bedelida Cayaartoydooda iyaga oo dhowraya shuruucda iyo Xeerarka u degsan Maamulka Cayaaraha waqtiga Cayaartu socoto.

QAYBTA 6AAD

ANSHAXA IYO ASLUUBTA CAYAARTOYADA

Qodobka 16aad

Cayaartoy Ispoorti waxaa noqon kara qof kasta oo Soomaali ah haddii da'diisa iyo Caafimaadkiisa u ogol yiiiiin.

Qodobka 17aad

Qaadashada Cayaartoyda waxaa awood u leh Naa kale ma qaadan karo xiriiraduna uma diiwaangelin

Qodobka 18aad

Cayaartoy asluub xumi Naadi lagaga eryay Naadi kale ma qaadan karo xiriirkaduna uma diiwaangelin karo, waase marka la hubsado lana cadeeyo in Cayaar toygaas anshax xumo lagaga eryay Naadigiisii

Qodobka 19aad

Xiriiradu waxay awood sharci u leey.hiin in ay baa ritaan ku sameeyaan hubiyaan in iyofalka Cayaartoyga lagu eedeeyey ee ku xusan qod. 3aad ee qaybta 6aad ay tahay mid jirta waase marka Cayaaroygu soo qorto dacwo ama cabasho la xiriirta falka lagu eedeeyey.

Qodobka 20aad

Haddii Cayaartoyga lagu cadeyn waayo falalka la gu eedeeyey wuxuu xaq u leeyahay in uu ku biiro Nadi ga uu doono xiriiraduna u fasaxaan

Qodobka 21aad

Cayaartoy Naadi ama Gobol u Ciyaara Xiriiradu ma diiwaan-gelin karaan haddii uusan la imaan Null' osta uu soo saxiixay Guddoomiyaha Naadiga ama Gud diga Maamulka ee Gobolka ama cid uu rasmi ahaan hawshaas Ispoortiga u wakiishay.

QAYBTA 7AAD

QAADASHADA CAYAARTOOYADA AJNABIGA AH IYO KALA ERGEYSIGA CAYAARTOOYADA

Qodobka 22aad

Waxaa loo oggol yahay Naadiyadu in ay ergeysi u kala qaataan Cayaartoyda hase ahaatee waa in oggo laansho laga helaa Xiriirada ay kuseyso iyo Xoghayn ta Olimbikada Qaranka.

raa oo keli ah waqtiga Cayaaruhu taagan yihiin waxaana ansixinaya Xiriirka ay khuseyso oo qoraal u kaja qaada labada dhinac. Oggolaanshana ka helay Xoghaynta G.O.S.

Qodobka 24aad

Lama oggola in Cayaartooy Naadi u diiwaan-gareysan uu u Cayaaro Naadi kale ilaa uu tartanka socdaa ka dhammaado.

Qodobka 25aad

Heshiiska ergeysiga waa in lagu caddeeyaa muddada uu soconayo iyo nooca Cayaarta loo ergeystey Cayaartoyga iyo waqtiga uu dhammaanayo.

Qodobka 26aad

Ergeysigu waa in uusan laheyn Ulajeedo baabi'in Naadi ama ku taageerid mid kale.

Qodobka 27aad

Qofka Ajnebiga ah ee dalka gudihiisa ku dhashay ama labadiisa waalid midkood Soomaali yahay Ispoorti dalka waa ka qayb-geli karaa, wuxuuna la xuquuq yahay Cayaartoyda Soomaaliyeed muddada uu rasmi ahaan u safanayo.

Qodobka 28aad

Qofka Cayaartoyga Soomaaliga ah oo ka yimaada dalka dibeddiisa wuxuu la xuquuq Ispoorti yahay Muwaadin kasta oo Soomaali ah oo Ispoorti Cayaara haddii uusan Qaranka ka gelin dembi u diidaya.

QAYBTA 8aad

FALALKA KA REEBAN CAYAARTOYDA ISBOORTIGA.

Qodobka 29aad

Waxaa ka reeban Cayaartoyda in uu Garoonka ga lo isaga oo ay ka kala dhiman yihiin qalabkii Cayaarta — In uu si toos ah ama si dadban ula murmo ama ula dagaalo Garsoorayaasha

ta ama dhamaatay uga sameeyaan Garoonka gudihiisa ama dibaddiisa.
— Waxaa la reeban in uu dadweynaha hortiisa ka muu jiyo anshax xumo dagaal ama aflagaado waqtiga uu Garoonka ku jiro ama kursiga Keydka fadhiyo.
— Waxaa ka reeban in uu diido ama ka murmo go'aanada Garsoorayaasha, Cayaaraha dhexdhexaadinaya.
— Waxaa ka reeban in uu si ula kac ah wax u yeelo Cayaartoy ka soo hoorjeeda ama saxiibadiisa la safan.

QAYBTA 9AAD

Ciqaabaadka Cayaartoy ama Koox Mudan Karto

Qodobka 30aad

Cayaartoyga ku kaca falalka ku xusan qabta 8aad wuxuu mudanayaa Ciqaabaha soo sosocda mid ka mid ah:

b) In lagu ciqaabo ganaax xiriirka ka sokow, ganaax lacageed oo gaaraya ilaa 1000-2000 sh.so, oo uu ku bixinayo muddo 10 casho gudahood ah.

t) In Ciyaaraha dalka laga joojiyo muddo aan ka yarayn 6 bilood

j) Sharciga ciqaabta (codice penale) ayaa nidaa minaya falal dembiyeedka.

x) In laga joojiyo Cayaaraha dalka gebi ahaanba

kh) Hadii Cayaartoygu bixin waayo lacagta lagu ganaaxo ee ku xusan xarafka B waxaa loogu bedelayaa Ciqaabta xarafka T ee isla qobodkaan.

Sharcigaani ma burinayo sharci hoosaadyada anshaxmarinta ee Xiriirada kala duwan.

Sharcigaani wuxuu dhaqan gelayaa 15 beri ka dib marka lagu soo saaro faafinta rasmiga ee Dawladda.

WASIIRKA W. SHAQADA IYO ISBOORTIGA
G. Sare Mire Anware Jaamac

Waan aragnay ee Diiwaangelinnay
Diiwaanka lam. 1 Bog. lam. 50,
Muqdisho, 9 Sebt. 2985,

MAXKAMADDA GOBOLKA BANAADIR

GUDDOOMIYAHA MGB

HADDUU ARKAY: Dacwadda kor ku qoran;

HADDUU ARKAY: In Buug Kayd dhumay lambarkiisuna ahaa 22548 lagana soo saaray Bangiga Ganacsiga iyo Kaydka Soomaaliyeed Laanta Xaruntа kuna qoran lacag dhan Sh.So. 3.315,69/= uu iska lahaa Yuusuf Xasan Caddow sida ku cad warqadda lam. 004178 taariikh 17.7.85 ee Bangiga Ganacsiga iyo Kaydka Soomaaliyeed Laanta Xaruntа;

WUXUU XEERIYEY

In la baabi'iyo (Ammortamento) Buug Kayd Lam. 22548 oo ku qoran magaca Yuusuf Xasan Caddow, ayna ku jirto Sh.So. 3,315,69/=.

WUXUU FASAXAYAA

In Bangiga Ganacsiga iyo Kaydka Soomaaliyeed Laanta Saddexaad u badalo Buugga Kaydka ee kor ku tilmaaman, una sameeyo mid la mid ah kadib markay ka soo wareegto muddo aan ka yarayn 30 maalmood, laga bilaabo maalinta lagu daabaco Faafinta Rasmiga ah ee JDS, haddii inta ka horaysa aan wax ishortaag ah laga keenin.

Muqdisho, 25.7.85

GUDDOOMIYAHA MGB
(Dr. Cabdullaahi Maxamed Maax)

L. 407

MAXKAMADDA GOBOLKA TOGDHEER BURCO

Ku: Xafiiska Faafinta Rasmiga ah ee Dawladda X'ar
UJ: Baafin Jeegga W. Lam. 533215 ee Lumay
Guddoomiyaha Maxkamadda Gobolka Togdheer Burco.

HADDU ARKAY: Dacwadda ku habaysan Baafin J.W. Lam. 533215 ee uu soo qortay Calanle Muuse Maxamed Tr. tahay 1.8.85;

HADDUU ARKAY: Ogeysiinta Bankiga Ganacsiga iyoKeydka L. Burco 1.8,85

HADDUU ARKAY: Qod. 69.65, Lumid Jeega War. ee Lam. 533215 ee Tr. 25,7,85 kuna qoran Xuseen Cal. Axmed kuna jirtay Sh,So,20,000 laguna sameeyey Laanta Burco.

WUXUU AMRAYAA

In loo cusboonaysiiya Jaagaas kor ku xusan Jaale Calanle Muuse Maxamed Markii ay ku soo wareegato 20 Casho Gudahood laguna baafiyo Faafinta Rasmiga ah ee Dawladda.

Waxaa lagaa Codsanayaa: In Jeega Cusub ee la sameeyn doono Gacanta laga saaro Jaalle Calanle Muuse Maxamed iyadoo la sugayo mudada kor kuxusan,
L. 408
Burco, 1.8.1985

GUDDOOMIYAHA M.G.TOGDHEER
(Dr. Abuukar Islow Cumar)

Kaaliyaha Max. G. Togdheer
(J. Ibraahim Bille)

MAXKAMADDA GOB. W/GALBEED HARGEYSA
TIRSI/MGH/17/85 TAARIIKHDA 17-8-85
UJ: DIGIREETO CUSBOONAYSIIN JEEG WAR. OO LUMAY LAMBAR YAHAY 530739.

Guddoomiyaha Maxkamadda Gob. W/Galbeed ee H/sa

MARKUU ARKAY: Arliga uu soo qortay J/le Axmed Muxumed Maxamuud ee ku taariikheysan 3-8-85 uuna ku Codsanaayo Cusboonaysiinta J. War. ee sare ku qoran oo Lumay.

MARKUU ARKAY: Cadaynta Bankiga ee Lambarkedu yahay 1236 ee 11,8,85 ayna ku cadeeyeen in Jeg. Lambarkiisu sax yahay lana sameeyey taariikhdu markay ahayd 23,6,85 Lacagtiisuna tahay 16,000 ku na qoran Maxamed Amir Ducaale, la aqoon laanta laga sameeyey.

MARKUU ARKAY: Taarka Faafinta ahaa ee Bangigu Laamihiisa u wada diray taariikhdu markay ahayd 17,7,85

MARKUU ARKAY: Qod. 69-70 ee X,L,Y, 2 ee soo baxay 9,9,65kii.

MARKAY: ARAGTAY: In Lacagta Jeegaas ku qoran iska leeyahay Axmed Muxumed Maxamuud oo uu ka lumay.

2. Gaar ahaan, Xoghayaha Joogtada ah waxaa uu masuul ka yahay xafiisyada Rugta iyo xaqiijinta habsami u fulinta hawlaha ay qabtaan xafiisyadu. Wuxuu ka qayb galaa fadhiyada Golaha Guud iyo Guddiga Maambulka isagoo Xoghayn ka noqonaya. Wuxuu xaq u leeyahay in uu hadal ka qaato doodaha fadhiyada, hase yeeshee cod ma laha.

3. Xoghayaha Joogtada ah waa Madaxa Shaqaalaha Rugta, isagaana ka masuul ah hawlgelintooda iyo qiimeyntooda.

4. Waxaa kale oo Xoghayaha Joogtada ah diyaarinayaa Ajendayaasha shirka Guddiga Maamulka iyo kan Golaha Guud ee Rugta, isagoo ka tilmaan qaadanaya Guddoomiyaha Rugta.

Qod. 20aad

Shaqaalaha Rugta

1. Rugtu waxay yeelaneysaa shaqaale u gaar ah.

2. Habka magacaabidda iyo dallacaadda Shaqaalaha, mushaarka, gunnooyinka, fasaxyada. anshaxmarinta, go'idda xiriirka shaqo iyo arrimaha kale ee saameeya Shaqaalaha waxaa go'aaminaya Guddiga Maamulka.

3. Go'aanka faqradda hore ku tilmaaman waxaa lagu meelmarinayaa Xeer uu soo saaro Wasiirka Warshadaha iyo Ganacsigu.

XUBINTA SADDEXAAD

HAWLGALKA RUGTA IYO ILAALINTA HANTIDA

MADAXA KOOWAAD

MAALIYADDA RUGTA

Qod. 21aad

Hantida Rugta

Hantida Rugtu waxa ay ka kooban tahay:

a) Dhigaalka ka mid noqoshada xubnaha Rugta;

b) Dhigaal sannadeedka Xubnaha Rugta;

t) Dakhliga ka soo gala qoraallada iyo shahaa-

gyada guud ay qabato dartood;

kh) Dakhliga ku soo gala hibo, deeq ama dardaaran;

d) Khidmadda ay ku leedahay shatiyada ganacsiga.

Qod. 22aad

Dhigaalka bilowga ah

1. Qof kasta oo xubin ka ah Rugta, wuxuu bixinayaa dhigaal lagu tilmaamo dhigaalka soo gelitaanka Rugta. Qiimaha dhigaalka waxaa xaddidaya Guddiga Maamulka isagoo tixgelinaaya awoodda dhaqaale ee Xubnaha kala duwan ee Rugta.

2. Dhigaalku marna kama yaraan karo Shs. 1.000/= (kun).

Qod. 23aad

Dhigaal sannadeedka

1. Qof kasta, ha ahaado shakhsi dabeeci ah ama qaanuuni ah, oo Xubin ka ah Rugta wuxuu bixinayaa dhigaal sannadeed.

2. Qiimaha dhigaalka waxaa xaddidaya Guddiga Maamulka isagoo tixgelinaaya awoodda dhaqaale ee Xubnaha kala duwan iyo qaybta uu ka tirsan yahay.

3. Dhigaal sannadeedku kama yaraan karo Shs. 300/= (saddexboqol) kamana badnaan karo Shs. 1000 (kun).

4. Go'aannada Guddiga Maamulka oo ku saabsan qiimaha dhigaallada waxaa Xeer ku ansixinaaya Wasiirka Warshadaha iyo Ganacsiga.

Qod. 24aad

Diiwaangelinta

Diiwaangelintu waxaa weeye Shs. 1000 (kun) wixii leh shatiga koowaad iyo kan labaad, wixii ka hooseeyana Shs. 300 (saddexboqol).

Qod. 25aad

Bixinta dhigaal sannadeedka

naayo ee sannad kasta waana in la bixiyaa ugu dambeysta dahmmaadba bisha Juun ee sannad walba.

Haddii taariikhdaas dib looga dhaco, dhigaalku waa laba jibbaarmayaa.

Qod. 26aad

Kharajka

1. Kharajka Rugta ee lagu fulinayo hawlaha ay u xilsaaran tahay waxaa laga bixinayaa dakhliga soo gala.

2. Waxaa bannaan Rugtu in ay maalgelin ku sameyso lacagteeda.

3. Maalgelinta waxaa shardi u ah oggolaanshaha Wasiirka Warshadaha iyo Ganacsiga.

MADAXA LABAAD

MIISAANIYADDA RUGTA

Qod. 27aad

Diyaarinta Miisaaniyadda

1. Guddiga Maamulka ee Rugtu wuxuu diyaarinayaa miisaaniyad koobeysa dakhliga iyo kharajka saddex bilood ka hor dhammaadka sannad miisaaniyadeedka wuxuuna soo hordhigayaa Golaha Guud si loo oggolaado.

2. Sannad miisaaniyadeedka Rugtu wuxuu billaabanayaa 1da Jennaayo wuxuuna dhammaanayaa 31ka Disember ee sannad kasta.

3. Miisaaniyaddu waa in ay ka koobnaataa lacagta lagu fulinayo gudashada xilka Rugta, bixinta kharajyada maamulka iyo dayactirka hantida Rugta.

Qod. 28aad

Isku koobidda Miisaaniyadda

1. Rugta iyo Xubnaha Guddiga Maamulka uma bannaana inay galaan kharaj aan miisaaniyadda lacag loogu qoondeyn ama kharaj ka badan lacagta loo qoondeeyey.

2. Sidoo kale uma bannaana inay isku wareejiyaan madaxyada miisaaniyadda ama inay u isticmaalaan lacagta miisaaniyadda ujeeddo ka duwan middii loogu talo galay.

3. Isku wareejinta Madaxyada Miisaaniyadda waxaa ansixin kara Golaha Guud ee Rugta.

4. Go'aan kasta oo khilaafsan tilmaamaha faqradda hore ee Qodobkan waa wax kama jiraan; soo celinta lacagaha habkaas ku baxay waxaa wadajir ahaan masuul uga noqonaya Xubnaha Rugta ee ka qayb qaatay xad-gudubkaas, waana in ay ku soo celiyaan 7 maalmood gudahood laga billaabo marka Wasaaradda Warshadaha iyo Ganacsigu ay soo celinta weydiisato.

Qod. 29aad

Xisaab-xirka

1. Guddiga Maamulku wuxuu diyaarinayaa, saddexda bilood ee ugu horreysa sannad kasta gudahooda, miisaaniyadda xisaab-xirka ee sannadkii la soo dhaafay wuxuuna u gudbinayaa Golaha Guud, isagoo raacinaya warbixin.

2. Golaha Guud, markuu dhegeysto Hantidhowrayaasha Rugta, wuxuu oggolaanayaa miisaaniyadda Xisaab-xirka.

3. Miisaaniyadda ku talo galka iyo Xisaab-xirkaba waxaa lagu soo saarayaa Faafinta Rasmiga ah ee

## MADAXA SADDEXAAD
## ILAALINTA HANTIDA

### Qodobka 30aad
### Guddiga Hantidhowrka

1. Rugtu waxay yeelanaysaa Guddi Hantidhowr oo ka kooban Guddoomiye iyo laba xubnood.

2. Guddiga Hantidhowrka waxaa magacaabaya Golaha Guud ee Rugta Isagoo dhegeysanaya sco joediata Guddiga Maamulka.

3) Muddada xilka ee xubnaha Guddiga Hantidhowrka waa laba sano dibna waa loo magacaabi karaa.

4. Jagada ka banaanaata Guddiga Hantidhowrka waxaa buuxinaya inta ka horreysa shirka Golaha Guud, xubin uu magacaabo Guddiga Maamulka.

5. Xubinta ama xubnaha lagu magacaabay habka ku tilmaaman faqradda hore ee qodobkan waa in laga nasixiyaa Golaha Guud, shirkii ugu sco horreeya. Haddii magacaabidaas Golahu uu nasixi waayo, wuxuu magacaabayaa xubin buuxisa jagada bannaan.

### Qodobka 31aad

### Shuruudaha Xubnaha Guddiga Hantidhowrka

1. Xubnaha Guddiga Hantidowrku waa in ay ahaa daan aqoonyahanno ku xeeldheer xisaabaadka.

2. Xubnaha Guddiga Hantidhowrka kama mid noqon karaan Guddiga Maamulka ee Rugta.

### Qodobka 32aad

### Awoodda Guddiga Hantidhowrka

1. Guddoomiyaha iyo xubnaha kale ee Guddiga Hantidhowrku waxay awood u leeyihiin, wadajir ahaan iyo mid midba, in ay baaraan diiwaannada xisaabaha Rugta iyo qoraallada kaleba.

3. Sidoo kale waxay hubin karaan hantida Rugta iyo ballanqaadyadeeda.

4 Guddoomiyaha Guddiga Maamulka ee Rugta waa in uu u suurta geliyaa Hantidhowrayaasha gudashada xilkooda.

5. Haddii Hantidhowrayaasha loo diido in ay gutaan waajibaadka faqradda hore ee qodobkan ku tilmaamaan, waa in ay arrintaas ku sugaan warbixin loo gudbiyo Guddiga Maamulka.

6. Sidoo kale haddii Guddiga Maamulku uu fududeyn waayo hawlgalka Hantidhowrayaasha waa in loo gudbiyaa Wasiirka Warshadaha iyo Ganacsiga nuqul Warbixinta faqradda hore ee qodobkan ku tilmaaman arrintana loo bandhigaa Golaha Guud ee Rugta.

Qodobka 33aad

Hubinta dhawridda shuruucda

1. Guddoomiyaha Guddiga Maamulku waa inuu u gudbiyaa Hantidhowrka nuqul ah qoraallada loogu yeerayo Xubnaha Rugta in ay ka soo qayb galaan shirka Golaha Guud, ugu yaraan 15 maalmood ka hor maalinta shirka.

2. Hantidhorku waa in uu ka soo qayb galaa shirka Golaha Guud, hubiyaana waafaqsanaanta sharciga habka loo maray isugu yeeridda Golaha Guud, kana dhiibaa Golaha hortiisa wixii ra'yi ah ee la xiriira hawlahooda.

Qodobka 34aad
Warbixinno kala duwan

Haddii Xubnaha Guddiga Hantidhowrku ay isku khilaafaan warbixinadooda la hor dhigayo Golaha Guud, Hantidhowre kasta wuxuu diyaarinayaa warbixin u gaar ah, warbixinnada oo idilna waxaa laga hor akhrinayaa shirka Golaha Guud.

Hantidhowrayaashu si wadajir ah ayay masuul uga yihiin magdhowga khasaaraha Rugta kala soo gudboonaada gefka ka dhacay Hantidhowrayaasha ee la xiriira gudashada xilkooda.

XUBINTA AFRAAD
ILAALINTA SARE

Qodobka 36aad
Awoodda Wasiirka

1. Wasiirka Warshadaha iyo Ganacsigu wuxuu ku leeyahay Rugta awood ilaalin iyo toosin ah.

2. Wuxuu kaloo ku leeyahay awoodaha ku tilmaaman Sharcigan.

Qodobka 37aad
Wakiilka Wasiirka

1. Xoghayaha Joogtada ah ee rugtu, isagoo ka wakiil ah wasiirka warshadaha iyo ganacsiga, wuxuu masuul ka yahay fulinta iyo dhowridda shuruucda iyo xeerarka Dalka.

2. Xadgudubyada Xoghayaha Joogtada ah uu ku arko Maamulka Rugta wuxuu u gudbinayaa Wasiirka si loo saxo.

XUBINTA SHANAAD
AXKAAN GUUD

Qodobka 38aad
Hoggaamin ku meel gaar ah

1. Ilaa iyo inta laga dooranayo Guddiga Maamulka ee ku tilmaaman sharcigan, qodobkiisa 10aad, hawlaha Rugta waxaa hoggaaminaya Guddi ka kooban Guddoomiye, Guddoomiye ku xigeen iyo saddex xubnood ee uu magacaabo Madaxweynaha J.D.S. Isagoo dhegeysay soo jeedinta Wasiirka Warshadaha iyo Ganacsiga.

2. Xubnaha faqradda kore ku tilmaaman waxaa laga dhex xulayaa xubnaha Rugta.

3. Guddiga waxaa xoghaye u noqonaya xoghayaha joogtada ah ee Rugta

4. Guddigu waxa uu qabanayaa xilalka gelal

5. Sidoo kale Guddoomiyuhu wuxuu qabanayaa xilalka Guddoomiyaha Guddiga Maamulka ee sharci gan ku tilmaaman.

Qodobka 39aad
Xeerka Rugta

Madaxweynaha J.D.S. Isagoo arkay soo jeedinta Wasiirka Warshadaha iyo Ganacsiga, dhegeystayna go laha Wasiirrada, wuxuu soo saarayaa Xeer hoosaad dhammeystiraya sharcigan, gaar ahaanna tilmaamaya

a) Habka loo marayo doorashada Xubnaha Guddiga Maamulka, nidaamka duridda qaabka ama natiija da doorashada, ka dhicididda ama ka saaridda xubinnimada iyo baabi'inta doorashada.

b) Dhismaha Guddiyada dhexdhexaadinta iyo tilmaamidda awoodda iyo qaabka hawlgalkooda.

c) Qaabka dhismaha iyo hawlaha ururrada ganacsiga, warshadaha, xoolaha, kalluumeysiga & farsha/ka.

Qodobka 40aad
Aqoonsi

Xubnaha Guddiyada iyo Shaqaalaha Rugta waxaa loo aqoonsanayaa, marka ay arrintu taagan tahay shuruucda ciqaabta Saraakiil guud, haddida Rugtana waxaa loo aqoonsanayaa hanti guud.

Qodobka 41aad
Burin

Waxaa la biriyey sharci lambar 38 ee 30.7.70 Bedde laadyadii ka dambeeyey iyo sharci iyo xeer kasta ee ka soo horjeeda ama aan la socon karin sharcigan.

Qodobka 42aad
Dhaqangal

Sharcigan wuxuu dhaqan gelayaa 15 maalmood kaddib marka lagu soo saaro faafinta rasmiga ah ee Jamhuuriyadda.

Muqdisho, 2 Nov. 198g

MADAXWEYNAHA J.D.S.

QAYBTA LABAAD

XEaaR MADAXWEYNAHA J.D.S. L. 39 ee 20 Seb. 1985 Garand Stella oo Lagu Maamusay S.E. On. Bettino Craxi Guddoomiyaha Golaha Wasiiradaha ee Dawladda Talyaaniga

MADAXWEYNAHA JDS

MARKUU ARKAY: Qodobka 82aad ee Dastuurka JDS

MARKUU ARKAY: Sharciga lam. 65aad ee 19ka Oktoobar 1970 ee Abaalmarinta

MARKUU TIXGELIYEY: Qoraallada iyo warbixinta Wasaaradda Arrimaha Dibedda.

MARKUU TIXGELIYEY: Kaalinta weyn uu ka geys tay adkeynta iyo sii xoojinta xiriirka labada wad dan Soomaaliya iyo Talyaaniga.

MARKUU TIXGELIYEY: Inay lagama maarmaan tahay in dadka ku shaqeeyey miyad Sami, iskaashi iyo horumarin labada Umadood la guddoonsiiyo aqoonsiga uu ka mudanyahay ummadda Soomaali yeed iyo dawladeedaba, loogana reebo raad wax ku ool ah.

MARKUU TI XGELIYEY: Talada Guddiga Abaalmarinta M.J.D.S.

WUXUU SOO SAARAY
Qodobka Kelliya

Xeerka Soo Socda:

Waxaa lagu maamusay Billadda (Cavaliere di Grand Stella) ee Xiddigta Soomaaliya S.E On, Bettino Craxi, Guddoomiyaha Golaha Wasaaradaha Dawladda Talyaaniga.

Xeerkan wuxuu dhaqan gelayaa markuu Madaxweynuhu J.D.S. Soo saxiixo.

Muqdisho, 20.9.1985.

MADAXWEYNAHA J.D.S.
S/Gaas Maxamed Siyaad Barre

XEER MADAXWEYNAHA J.D.S. L. 40 ee 9 Nof. 1985 Billad Qalin ah oo Waddaninnimo oo lagu Maamu say L/X/le Cusmaan Yuusuf Xaaji

MADAXWEYNAHA JDS

MARKUU ARKAY: Qod. 82aad ee Dastuurka J.D.S.

MARKUU ARKAY: Sharciga lam. 65aad ee 19 Okto. 1970 ee Abaalmarinta

MARKUU TIXGELIYEY: Qoraallada iyo warbixinta Taliyaha Nabad sugidda Soomaaliyeed.

MARKUU TIXGELIYEY: Sida Waddaninimada, Kacaanimada, Geesinimada iyo Biseyl Siyaasadeed uu muujiyey intii uu ka shaqeynayey Taliska Nssta la guna xiray Jigjiga muddo dhan 11 sano halisna u noqday dil toogasho ah, J/le L/X/le Cusmaan Yuu suf Xaaji.

MARKUU TIXGELIYEY: Inay lagama maarmaan ta hay in dadka ku shaqeeyey niyad sami, waddanini mo, geesinimo iyo isagoo si hagar l'aanta ah u soo gutay waajibaadkii ka saarnaa waddankiisa la gud doonsiiyo aqoonsiga uu ka mudanyahay ummadda Soomaaliyeed, looguna reebo raad wax ku ool ah.

MARKUU TIXGELIYEY: Talada Guddiga Abaalma rinta M.J.D.S.

WUXUU SOO SAARAYA

QODOBKA KELIYA

XEERKA SOO SOCDA:

Waxaa lagu maamusay Billad Qalin ah oo Wadani nimo J/le L/X/le Cusmaan Yuusuf Xaaji oo ka tirsan NSSTA.

Xeerkan wuxuu dhaqan gelayaa markuu Madaxwe ynuhu J.D.S. soo saxiixo.

Muqdisho, 9.11.85

MADAXWEYNAHA J.D.S.

XEER MADAXWEYNAHA JDS, L. 41 ee 14 Nof. 1985 Magacaabid Guddiga Ku-Meel gaarka ee Rugta Ganacsiga.

MADAXWEYNAHA JDS

ISAGOO ARKAY: Qod. 82aad ee Dastuurka JDS;

ISAGOO ARKAY: Sharciga dib loogu habeeyey Rugta Ganacsiga;

ISAGOO TIXGELIYAY: Baahida loo qabo in la magacaabo Guddi ku-meel gaar ah ee Rugta Ganacsiga;

WUXUU SOO SAARAYAA

Xeerka soo socda:

Qod. 1aad

Waxaa la magacaabay Guddi ku-meel gaar ah ee Rugta Ganacsiga, kana kooban xubnaha soo socda:-

1. Maxamed Ibraahim Cigaal — GUDDOOMIYE
2. Cusmaan Axmed Rooble — Guddoomiye ku-xigeen
3. Maxamuud Maxamed Khaawi — Xubin
4. Maxamuud Khaliif Shire — Xubin
5. Jacfar Maxamed Badar — Xubin

Qod. 2aad

Dekreetadani waxay dhaqan gelaysaa marka uu saxiixo Madaxweynaha JDS, waxaana lagu soo saarayaa Faafinta Rasmiga ah ee Dawladda.

Muqdisho, 14 Nof. 1985

MADAXWEYNAHA JDS
(S/Gaas Maxamed Siyaad Barre)

MAXKAMADDA GOBOLKA BANAADIR

QAYBTA MADANIGA

GARSOORAHA MGB

HADDUU ARKAY: Codsiga dusha ku qoran;

HADDUU TIXGELIYAY: In uu dhumay Jeeg Wareega Lam. 535546 lagana sameeyay Bangiga Ganacsiga iyo Kaydka Soomaaliyeed Laanta Burco kuna jirto lacag dhan Sh.So. 20.000/= kuna qoran magaca Cabdullaahi Aadan Xayle sida ku cad warqadda Lam. 009546 taariikh 4.11.85 kana soo baxday Bangiga Ganacsiga iyo Kaydka Laanta Xis-Guud;

HADDUU ARKAY: Qod. 69 sharciga L. 2 ee 9.9.1962.

WUXUU XEERIYAY

In la qiimo tiro lana baabi'iyo (Ammortamento) Jeegga Lam. 535546 lagana sameeyay Laanta Burco ee Bangiga Ganacsiga iyo Kaydka Soomaaliyeed ayna ku jirto lacag dhan Sh.So. 20.000/= kuna qoran magaca Cabdullaahi Aadan Xayle.

WAXAA LA AMRAYAA

Laanta Burco ee Bangiga Ganacsiga iyo Kaydka Soomaaliyeed in uu siiyo Jaalle Maxamuud Axmed Xasan lacagta cadadkeedu yahay Sh.So. 20.000/= ee ku qornayd Jeegga kor ku tilmaaman markay ka soo wareegto muddo aan ka yarayn 15 maalmood laga bilaabo marka go'aanka lagu daabaco Faafinta Rasmiga ah ee JDS, haddii inta ka horaysa aan wax ishortaag ah laga keenin.

Muqdisho, 5.11.85

GUDDOOMIYAHA MGB
Dr. Cabdullaahi Maxamed Maax

L. 484

MAXKAMADDA GOBOLKA BAY BAYDHABO

Guddoomiyaha Max. G. Bay ee Baydhabo

HADDUU ARKAY: Arjiga codsiga ah ee ay soo qoratay Jaalle Cambaro Cismaan Axmed;

HADDUU ARKAY: Waxay ku saabsan tahay iyo Ogeysiiska Bangiga Ganacsiga Laanta Baydhabo;

HADDUU ARKAY: Qod. 69 D.T. 8 9.65, N. 2 Lumidda Buugga Lam. 4607, kuna qorneyd 7.000/= (Toddoba Kun Shillin Soomaali).

WUXUU SOO SAARAY SIDAAN:-

In loo cusboonaysiiyo Buuggaas ka dib markii ay ka soo wareegto 15 cisho, maalinta Dekereetada lagu shaaciyo Faafinta Rasmiga ah ee Dawladda.

HADDABA WAXAA LA CODSANAYAA

In Buugga cusub ee loo sameyn doono gacanta laga saaro Jaalle Cambaro Cismaan Axmed, iyadoo la cuskanayo muddo 15 Shan iyo Toban maalmood.

Baydhabo, 12.9.85

Guddoomiyaha Max. G. Bay ee Baydhabo
Sheekh Xuseen Macaliin Aadan

L. 485

Maxkamadda Gobolka Togdheer Burco

Ku: Xafiiska Faafinta Rasmiga ah ee D/Xamar.

UJ: Baafin Jeegaga Lumay

Guddoomiyaha Maxkamadda Gob. Togdheer Burco

HADDUU ARKAY: Dacwadda ku saabsan Baafin J. War. ee Lumay

HADDUU ARKAY: Ogaysiinta Bankiga Ganacsiga & Keydka L. Burco Tr. 7.1185

HADDUU ARKAY: Qod. 69,65, Lumid Jeegaga War. Ee Lambar yahay:

1— 0180522 ee 20.8.85 Sh.Si. 21.000 kuna qoran Nuur Axmed Maxamed.

2— 0199080 ee 15.10.85 Sh.So. 50.000 kuna qoran Maxamed Cali Jaamac.

3— 0033255 ee 18.5.85 Sh.So. 30.000 kuna qoran Saciid Cilmi Yuusuf

4— 0198631 ee 9.10.85 Sh.So. 25.000 kuna qoran Cismaan Qaasim Qodax

5— 536773 ee 26.9.85 Sh.So. 20.000 kuna qoran Cabdi Axmed X. Maxamed.

WUXUU AMRAYAA

In loo Cusboonaysiiyo Jeegaga War. J/le Cumar Buraale Axmed ee Lambaradoodu kor ku xusan yihiin Markii ay ka soo wareegto 20 Casho lagana shaaciyo X. Faafinta Rasmiga ah ee Dawladda.

Waxaa Lagaa Codsanayaa

In Jeegaga Cusub ee la sameyndoono Gacanta laga Saaro J/le Cumar Buraale Axmed iyadoo la Sugayo Muddada kor ku Xusan.

Kaaliyaha Maxkamadda G/Togdheer Burco

Jaamac Cabdullaahi Bille

MAXKAMADDA GOBOLKA BANAADIR

QAYBTA MADANIGA

HADDUU ARKAY: Codsiga Dusha Ku Qoran:

HADDUU TIXGELIYEY: In uu dhumay J. War· Lam· B0141310 lagana sameeyey Bankiga Ganacsiga iyo Keydka Soomaaliyeed Laanta Garoowe kuna jirto Lacag dhan Sh,So, 50·000 kuna qaran magaca Xaliima Maxamed Cali sida ku iad warqadda Lambar 09963 Tr· 19,11,85 kana soo baxday Bankiga Ganacsiga iyo Keydka Soomaaliyeed Laanta Xis-Guud·

HADDUU ARKAY: Qod· 69 Sharciga L. 2 ee 9,9·1962.

WUXUU XEERIYEY

In la Qiimo tiro lana baabi'iyo (Ammortamento) Jeegga Lam· B0141310 lagana sameeyey Laanta Garowe ee Bankiga Ganacsiga iyo Keydka Soomaaliyeed ayna ku jirto Lacag dhan Sh·So. 50·000·—

MAXAA LA AMRAYAA

Laanta Garoowe ee Bankiga Ganacsiga iyo Keydka Soomaaliyeed in uu siiyo J/le Xaliima Maxamed Cali Lacagta Cadadkeedu yahay Sh,So· 50.000 ee ku qornayd Jeegaga kor ku tilmaaman markay ka soo wareegto Muddo aan ka yarayn 15 Maalmood laga bilaabo marka Go'aanka lagu daabaco Faafinta Rasmiga ah ee J·D.S· Haddii inta ka horaysa aan wax is hortag ah la keenin·

Muqdisho, 19·11·84

GUDDOOMIYAHA MAXKAMADDA GOB. BANAADIR
Dr· Cabdullaahi Maxamed Maax

L. 487

MAXKAMADDA GOBOLKA BANAADIR

QAYBTA MADANIGA

HADDUU ARKAY: Codsiga Dusha Ku Qoran:

HADDUU TIXGELIYEY: In uu dhumay J. War. Lam. 684557 lagana sameeyey Bankiga Ganacsiga iyo Keydka Soomaaliyeed Laanta Garoowe kuna jirto Lacag dhan Sh.So. 20.000 kuna qoran magaca Xaliima Maxamed Cali sida ku cad warqadda Lambar Tr. 19.11.85 kana soo baxday Bankiga Ganacsiga & Keydka Soomaaliyeed Laanta Xis-Guud.

HADDUU ARKAY: Qod. 69 Sharciga L. 2 ee 9.9.1962.

WUXUU XEERIYEY

In la Qiimo tiro lana baabi'iyo (Ammortamento) Jeegga Lam. 684557 lagana sameeyey Laanta Garoowe ee Bankiga Ganacsiga iyo Keydka Soomaaliyeed ayna ku jirto Lacag dhan Sh.So. 20.000.—

MAXAA LA AMRAYAA

Laanta Garoowe ee Bankiga Ganacsiga iyo Keydka Soomaaliyeed in uu siiyo J/le Xaliima Maxamed Cali Lacagta Cadadkeedu yahay Sh.So. 20.000 ee ku qornayd Jeegaga kor ku tilmaaman markay ka soo wareegto Muddo aan ka yarayn 15 Maalmood laga bilaabo marka Go'aanka lagu daabaco Faafinta Rasmiga ah ee J.D.S. Haddii inta ka horaysa aan wax is hortag ah la keenin.

Muqdisho, 19.1185

GUDDOOMIYAHA MAXKAMADDA GOB. BANAADIR
Dr. Cabdullaahi Maxamed Maax

L. 488

MAXKAMADDA GOBOLKA BANAADIR

HADDUU ARKAY: Codsiga Dusha Ku Qoran:

HADDUU TIXGELIYEY: In uu dhumay Buug Kayd Lam. 22367 lagana sameeyey Bankiga Ganacsiga Iyo Keydka Soomaaliyeed Laanta Xaruntа kuna jirto Lacag dhan Sh.So. 22.758 kuna qoran magaca Xasan Cali Faarax sida ku cad warqadda Lambar 004882 Tr. 20.11.85 kana soo baxday Bankiga Ganacsiga iyo Keydka Soomaaliyeed Xaruntа.

HADDUU ARKAY: Qod. 69 Sharciga L. 2 ee 9.9 1962.

WUXUU XEERIYEY

In la Qiimo tiro lana baabi'iyo (Ammortamento) Buug Keyd Lam. 22367 lagana sameeyey Laanta Xaruntа ee Bankiga Ganacsiga iyo Keydka Soomaaliyeed, ayna ku jirto Lacag dhan Sh.So. 22.758/3, kuna qoran magaca Xasan Cali Faarax.

WAXAA LA FASAXAYAA

Laanta Xaruntа ee Bankiga Ganacsiga iyo Keydka Soomaaliyeed in ay siiso J/le Xasan Cali Faarax Lacag ta Cadadkeedu yahay Sh.So. 22.758/3 ee ku qornayd Buug Kaydka ee aan kor ku soo sheegnay markay ka soo Wareegto muuddo aan ka yarayn 30 maalmood laga bi laabo maalinta Go'aanka lagu daabaco Faafinta Rasmiga ah ee J.D.S. Haddii inta ka horaysa aan wax is hortaa ahlaga keenin.—

Muqdisho. 21.11.85

GUDDOOMIYAHA MAXKAMADDA GOB. BANAADIR
Dr. Cabdullaahi Maxamed Maax

L. 489

## MAXKAMADDA G. W/GALBEED HARGEYSA

Ujeeddo: Decereeto Cusboonaysiin Jeegga Wareega ee lumay lambar yahay 400779 ee taariikhdiisu tahay 22.2.84 Lacagtiisuna dhan tahay 20,000/= Shillin uuna leeyahay Yuusuf Ismaaciil Axmed, kuna qoraa Caasha Maxamed Cawad.

Guddoomiyaha Max. G. W/Galbeed ee Hargeysa

MARKUU ARKAY: Arjiga uu soo qortay Yuusuf Ismaacii Axmed, kuna codsanaayey in loo cusboonaysiiyo Jeegga Wareega Lambarkiisu yahay kan kor ku xusan;

MARKUU ARKAY: Caddaynta Bangiga Ganacsiga iyo Kaydka Laanta Hargeysa, kuna taariikheysan 6.5.84 lagu caddeeyey in laga sameeyey Jeeggaas Bangiga Ganacsiga iyo Kaydka Laanta Burco, uuna lumay lagana faafiyey Laanta Bangiga Hargeysa;

MARKUU ARKAY: Qod. 69-70 ee X.L.Y. 2 ee soo baʻbay 9.9.1965.

## WUXUU GO'AAMIYEY

In la kansal gareeyo Jeeggii lumay loona cusboonaysiiyo Jaallaha magaciisa la yiraahdo Yuusuf Ismaaciil Axmed, cusboonaysiintana gacanta aga saaro Jaallahaas kor ku qoran ama ciddii awood ka haysata muddo 15 maalmood gudahood ah kaddib maalinta Go'aanka laga soo saaro Faafinta Rasmiga ah Laanta Madaxtooyada J. D. Soomaaliya.

## WAXAA LA FARAYAA

Bangiga Ganacsiga iyo Kaydka Laanta Hargeysa, in lagu dhejiyo Nuqulka Go'aankan Bangiga Irdihiisa si ciddii haysataa Jeeggaasi lumay ee kor lagu kansal gareeyey uga soo qortaan cabasho haddii ay doonaan.

Hargeysa, 25.8.1984

Guddoomiyaha Max. G. W/Ga beed Hargeysa
(Ibraahim Faarax Maxamed)

Kaaliyaha Max. G. W/Galbeed Hargeysa
(Maxamuud Jaamac Cigaal)

MAXKAMADDA GOBOLKA BANAADIR

QAYBTA MADANIGA

HADDUU ARKAY: CODSIGA DUSHA KU QORAN:

HADDUU TIXGELIYEY: In uu dhumay Jeeg War. Lam. 634153 lagana sameeyey Bankiga Ganacsiga& Keydka Soomaaliyeed Laanta H/Geysa kuna jirtay Lacag dhan Sh,So, 10.000,00 kuna qoran magaca Xaawo Askar Cige sida ku cad warqadda Lambar 10161 Tr. 24,11,85 kana soo baxday Bankiga Ganac siga iyo keydka Soomaaliyeed Laanta H/Geysa.

HADDUU ARKAY: Qod. 69 sharciga L. 2 ee 9,9,1962.

WUXUU XEERIYEY

In la qiimo tiro lana baabi'iyo (Ammortamento) Jeegga Lam. 634153 lagana sameeyey Laanta H/Geysa ee Bankiga Ganacsiga iyo Keydka Soomaaliyeed ayna ku jirto Lacag dhan Sh,So, 10.000.00

WAXAA LA AMRAYAA

Laanta H/Geysa ee Bankiga Ganacsiga iyo Kaydka Soomaaliyeed in uu siiyo J/le Xaawo Askar Cige Lacag ta Cadadkeedu yahay Sh,So, 10.000.00 ee ku qornayd Jeegga kor ku tilmaaman markay ka soo wareegto mu do aan ka yarayn 15 maa mood laga bilaabo marka Go' aanka lagu daabaco Faafinta Rasmiga ah ee J.D.S. Had dii inta ka horaysa aan wax is hortaag ah laga keenin.

Muqdisho, 26,11,85

GUDDOOMIYAHA MAXKAMADDA GOB. BANAADIR
Dr. Cabdullaahi Maxamed Maax

MAXKAMADDA G. TOGDHEER BURCO

UJ:- Baafin Jeeg. War. ee Lam. 0093745

GUDDOOMIYAHA MAX. G. TOGDHEER BURCO

HADDUU ARKAY: Dacwada ku saabsan Baafin Jeegga Wareega ee Lumay;

HADDUU ARKAY: Ogaysiinta Bangiga Ganacsiga iyo Kaydka Laanta Burco, ee taariikh 9.11.85;

HADDUU ARKAY: Qod. 69, 85, -(Lumid Jeegga Wareega ee Lam. 0093745, kuna qoran lahay Sh. So. 25,000/=, kuna qoran Axmed Maxamuud Nuur lagana sameeyey Laanta Saddexaad ee Muqdisho taariikh 1.10.85.

WUXUU AMRAYAA

In loo cusboonaysiiyo Jeeggaas Wareega ee Lam. yahay 0093745 taariikh 1.10.85 lagana sameeyey Laanta Saddexaad Muqdisho Jaalle Axmed Maxamuud Nuur markii ay ka soo wareegto muddo 20 casho ah laguna shaaciyo X. Faafinta Rasmiga ah ee Dawladda.

WAXAA LAGA CODSANAYAA

In Jeegga cusub ee la samayn doono gacanta laga saaro J.le Axmed Maxamuud Nuur iyadoo la sugaayo muddada kor ku xusan.

BURCO, 9.11.1985

Guddoomiyaha Max. G. Togdheer Burco
(Dr. Abuukar Islaw Cumar)

Kaaliyaha Max. G. Togdheer Burco
(Jaamac C. Bile)

L. 492

Maxkamadda Gobolka W/Galbeed Hargeysa

TIRS MG/22,85 Taariikhda 14.11.85

Ujeeddo: Dikreeto Cusboonaysiin Jeegga Wareega Lambar yahay 0186921 ee Lacagtiisuna dhan tahay 49,650 lana sameeyey 7,9,85 kuna qoran Axmed Xuseen Jaamac.

MARKUU ARKAY: Arjiga uu soo qortay Cabdi Maxamuud Jibriil, kuna taariikhaysan 6,11,85 kuna Codsanaayo in loo Cusboonaysiiyo Jeegga War. ee Lam barkiisu kor ku qoran yahay.

MARKUU ARKAY: Cadaynta Bankiga Ganacsiga Laanta Hargeysa Lambar yahay 1579 kuna taariikheysan 9,11,85 laguna soo cadeeyey in laga samee yey Bankiga Ganacsiga iyo Keydka Soomaaliyeed Laanta Hargeysa, uuna lumay lagana Baafiyey Laanta Hargeysa, iyadoo Jeegaasu ku qornaa Axmed Xuseen Jaamac.

MARKUU ARKAY: Qod. 69-70 ee Xeerka Lambarkiisu yahay 2 ee soo baxay 9,9,65kii.

Wuxuu Go'aamiyey in la kansal gareeyo Jeega War. ee lumay Lambarkiisu yahay 0186921. Taariikhdiisu ta hay 7,9,85 loona Cusboonaysiiyo J/leha Magaciisu yahay Cabdi Maxamuud Jibriil, Cusboonaysiinta Gacanta laga saaro J/laha magaciisu sare ku qoran yahay ama Ciddii awood ka haysata muddo 15 maalmood Gudahood ah, ka dib maalinta Go'aanka laga soo saaro Faafinta Rasmiga ah ee Laanta Madaxtooyada J.D.S.

Waxaa la farayaa Maamulaha Bankiga Ganacsiga iyo Keydka Laanta Hargeysa in lagu dhejiyo Nuqulka Go'aanka Bankiga Iridkiisa si Ciddii haysata Jeegaas Lumay ee kor lagu kansal gareeyey uga soo qortaan Cabasho haddii ay doonaan.

Maxamuud Jaamac Cigaal

Kaaliyaha Maxkamadda Gobolka W. G. ee Har/sa

MAXKAMADDA GOB. SANAAG C/GAABO

MGS/106-327.85 CEERAGAABO.

Ujeeddo: Bedelaad Jeeg Wareega Lr. 417175

MARKUU ARKAY: Dacwadda kor ku xusan.

MARKUU ARKAY: In Jeega Lumay oo lambarkiisu yahay 417175 ee Tr. 119.5.85 kana soo baxday Bankiga Ganacsiga iyo Keydka Soomaaliyeed Laanta Burco, ee Gobolka Togdheer kuna qoran tahay Lacag dhan 10.000 ayna leedahay J/le Khadiija Axmed Faarax.

Sida ku cad Xaashida Lambarkeedu yahay 000293 ee 1,9,85 kana soo baxday Bankiga Ganacsiga iyo Keydka Laanta Ceerigaabo.

MARKII UU ARKAY: Qod. 69 ee taariikh 29,9,55.

WUXUU XEERAYAA SIDAN.

In la baabi'iyo (Ammortamento) Jeega Lam. 417175 laguna qoray magaca J/le Khadiijo Axmed Faarax ayna ku taal Lacag dhan 10.000 waxaa la Ogolaaday in Bankiga Ganacsiga iyo Keydka Laanta Burco u bedesho J/le Khadiijo Axmed Faafax Jeega kor ku qoran una sameeyso mid la mid ah, markii ay ka soo wareegto muddo aan ka yarayn shan iyo tobon maalmood 15 Go'aanka lagu daabaco Faafinta Rasmiga ah ee J.D.S.

Ceergaabo 1. 10. 1985

GUDDOOMIYAHA MAXKAMADDA GOB. SANAAG
Dr. Maxamuud Maxamed Ismaaciil

MAXKAMADDA GOBOLKA TOGDHEER BURCO

MGT·182/85 Burco 12.11·85

Ku: Xafiiska Faafinta Rasmiga ah ee Dawladda X/ar

Uj: Baafin J/W· Lam· 0180880

HADDUU ARKAY: Codsiga ku saabsan Baafin J/W· ee Lumay·

HADDUU ARKAY: Ogaysiinta Bankiga Ganacsiga & Keydka Laanta Burco ee Tr· 31.10.85

HADDUU ARKAY: Qod· 69,65, Lumid Jeega Wareega ee Lam. 0180880 ee 24,8,85 kuna jirtay sh,so, 27,000 kuna qoraa Cabdullaahi Cali Dirir Lagana sameeyey Laanta Burco·

WUXUU AMRAYAA

In loo Cusboonaysiiyo Jeegaas War· Ee Lam· 0180880 Tr· 24,8,85 lagana sameeyey Laanta Burco J/le Cabdul laahi Cali Dirir Markii ay ka soo wareegto 20 Casho Laguna Shaaciyo X· Faafinta Rasmiga ah ee Dawladda

Waxaa Laga Codsanayaa

In Jeega Cusub ee la sameeyndoono Gacanta laga Saaro J/le Cabdullaahi Cali Dirir iyadoo la sugayo mu dada kor ku Xusan.

Kaaliyaha Maxkamadda Gobolka Togdheer Burco·
Jaamac Cabdullaahi Bille

Maxkamadda Gobolka Togdheer Burco
Dr· Abuukar Islaw Cumar

MAXKAMADDA GOBOLKA BANAADIR

— QAYBTA MADANIGA —

GARSOORAHA MGB

HADDUU ARKAY: Codsiga dusha ku qoran;

HADDUU TIXGELIYAY: In uu dhumay Jeeg Wareegga Lam. 0181283 lagana sameeyay Bangiga Ganacsiga iyo Kaydka Soomaaliyeed Laanta Burco, kuna jirto lacag dhan Sh.So. 50.000/= kuna qoran magaca Faadumo Faarax Jaamac sida ku cad warqadda Lam. ——— taariikh 13.11.85 kana soo baxday Bangiga Ganacsiga iyo Kaydka Soomaaliyeed Laanta Xis-Guud;

HADDUU ARKAY: Qod. 69 sharciga L. 2 ee 9.9.1962.

WUXUU XEERIYAY

In la qiimo tiro lana baabi'iyo (Ammortamento) Jeegga Lam. 0181283 lagana sameeyay Laanta Burco ee Bangiga Ganacsiga iyo Kaydka Soomaaliyeed ayna ku jirto lacag dhan Sh.So. 50.000/= kuna qoran magaca Faadumo Faarax Jaamac.

WAXAA LA AMRAYAA

Laanta Burco ee Bangiga Ganacsiga iyo Kaydka Soomaaliyeed in uu siiyo Jaalle Faadumo Faarax Jaamac lacagta cadadkeedu yahay Sh.So. 50.000/= ee ku qornayd Jeegga kor ku tilmaaman markay ka soo wareegto muddo aan ka yarayn 15 maalmood laga bilaabo marka go'aanka lagu daabaco Faafinta Rasmiga ah ee JDS, haddii inta ka horaysa aan wax ishortaag ah laga keenin.

Muqdisho, 14.11.85

GUDDOOMIYAHA MGB
Dr. Cabdullaahi Maxamed Maax

MAXKAMADDA GOBOLKA BANAADIR

— QAYBTA MADANIGA —

GARSOORAHA MGB

HADDUU ARKAY: Codsiga dusha ku qoran;

HADDUU TIXGELIYAY: In uu dhumay Jeeg Wareegga Lam. 0663415 lagana sameeyay Bangiga Ganacsiga iyo Kaydka Soomaaliyeed Laanta Burco, kuna jirto lacag dhan Sh.So. 5.000/= kuna qoran magaca Faadumo Faarax Jaamac sida ku cad warqadda Lam. ——— taariikh 13.11.85 kana soo baxday Bangiga Ganacsiga iyo Kaydka Soomaaliyeed Laanta Xis-Guud;

HADDUU ARKAY: Qod. 69 sharciga L. 2 ee 9.9.1962.

WUXUU XEERIYAY

In la qiimo tiro lana baabi'iyo (Ammortamento) Jeegga Lam. 0663415 lagana sameeyay Laanta Burco, ee Bangiga Ganacsiga iyo Kaydka Soomaaliyeed ayna ku jirto lacag dhan Sh.So. 5.000/= kuna qoran magaca Faadumo Faarax Jaamac.

WAXAA LA AMRAYAA

Laanta Burco ee Bangiga Ganacsiga iyo Kaydka Soomaaliyeed in uu siiyo Jaalle Faadumo Faarax Jaamac lacagta cadadkeedu yahay Sh.So. 5.000/= ee ku qornayd Jeegga kor ku tilmaaman markay ka soo wareegto muddo aan ka yarayn 15 maalmood laga bilaabo marka go'aanka lagu daabaco Faafinta Rasmiga ah ee JDS, haddii inta ka horaysa aan wax ishortaag ah laga keenin.

Muqdisho, 14.11.85

GUDDOOMIYAHA MGB
Dr. Cabdullaahi Maxamed Maax

MAXKAMADDA GOBOLKA BANAADIR

QAYBTA MADANIGA

GARSOORAHA MGB

HADDUU ARKAY: Codsiga dusha ku qoran;

HADDUU TIXGELIYAY: In uu dhumay Buug Kayd Lam. 16726 lagana sameeyay Bangiga Ganacsiga iyo Kaydka Soomaaliyeed Laanta Saddexaad kuna jirto lacag dhan Sh.So. 520.000.00/= kuna qoran magaca Xasan Maxamed Siyaad sida ku cad warqadda Lam. 715 taariikh 30.11.85, kana soo baxday Bangiga Ganacsiga iyo Kaydka Soomaaliyeed Laanta Saddexaad;

HADDUU ARKAY: Qod. 69 sharciga L. 2 ee 9.9.1962.

WUXUU XEERIYAY

In la qiimo tiro lana baabi'iyo (Ammortamento) Buug Kayd Lam. 16726 lagana sameeyay Laanta Saddexaad ee Bangiga Ganacsiga iyo Kaydka Soomaaliyeed ayna ku jirto lacag dhan Sh.So. 520.000.00/=, kuna qoran magaca Xasan Maxamed Siyaad.

WAXAA LA FASAXAYAA

Laanta Saddexaad ee Bangiga Ganacsiga iyo Kaydka Soomaaliyeed in ay siiso Jaalle Xasan Maxamed Siyaad lacagta cadadkeedu yahay Sh.So. 520.000.00/= ee ku qoran Buugga Kaydka ee aan kor ku soo tilmaanay, markay ka soo wareegto muddo aan ka yarayn 30 maalmood laga bilaabo maalinta lagu daabaco Faafinta Rasmiga ah ee JDS, haddii inta ka horaysa aan wax ishortaag ah laga keenin.

Muqdisho, 30.11.85

GUDDOOMIYAHA MGB
Dr. Cabdullaahi Maxamed Maax

MAXKAMADDA GOBOLKA TOGDHEER

Ujeeddo:- Baafin Jeegga War. ee Lam. 0034159

(Garsooraha Maxkamadda G. Togdheer Burco)

HADDUU ARKAY: Dacwadda ku saabsan Baafin Jeeg. War. Lam. 0034159 ee Lumay;

HADDUU ARKAY: Ogeysiinta Bangiga Ganacsiga iyo Kaydka Laanta Burco;

HADDUU ARKAY: Qod. 69-65-Lumid Jeegga Wareega Lam. yahay 0034159 kuna qorneyd Sh.So. 50.000/= kuna qoran yahay Maxamed Cabdi Caateeye iagana sameeyey Laanta Berbera taariikh bishii Labaad ee Febrayo 85.

WUXUU AMRAYAA

In loo Cusboonaysiiyo Jeeggaas kor ku xusan Jaalle Maxamed Cabdi Caateeye markii ay ka soo wareegto muddo (20) casho ah laguna shaaciyo Xafiiska Faafinta Rasmiga ah ee Dawladda.

WAXAA LAGA CODSANAYAA

In Jeeggaas cusub ee la sameyn doono gacanta laga saaro Jaalle Maxamed Cabdi Caateeye iyadoo la sugayo muddada kor ku xusan.

BURCO, 22.8.1985

Garsooraha Max. G. Togdheer Burco
(Maxamed Xaaji Cabdulqaadir)

Kaaliyaha Max. G. Togdheer Burco
(X. X. Sugulle)

IIB MA GALO

# F'AAFINTA RASMIGA AH

الرسميـــة  الجريـــدة

Snanadka 13aad Muqdisho 1da Disember 1985 L. 12

JAMHUURIYADDA DIMUQRAADIGA SOOMAALIYA

الجمهورية الصومالية الديمقراطية

جريدة شهرية

QIIMADU: waa 5 shilin lambar waliba — RUKUNKA: Sanadii waa Sh. 100 Soomaaliya gudeheeda - dibaddedana waa Shs. 300. Rubunka la weydiisto waqtiga loo gooyey wuxuu ka bilabmaa 1 Janaayo. Qiimaha qoraallaanku F. R. hakki sadar iyo waxii ka yar waa 2 laba Sh. Rukunka iyo qoritaanku waxaa la weydiisaa Laanta Maamulka Faafinta Rasmiga ah Lacagta waxaa lagu bixinayaa Xafiiska Canshuuraha ee Warshadda Lacagta.

## K O O B N I I N

QAYBTA KOWAAD

SHARCI

SHARCI L. 23 ee 3 Nof. 1985, Sharciga Kalluumeysiga Soomaaliyeed.— Bog; 767

SHARCI L. 24 ee 1da Dis. 1985, Oggolaasha ha Heshiiska Fududeysi iyo Horumarinta is dhaafsiga Ganacsiga ee ka dhexeeya Dawladaha Carbeed.— » 775

QAYBTA LABAAD

XEER

XEER MADAXWEYNAHA J.D.S. L. 42 ee 1da Dis. 1985, Meelmarinta Heshiiska Fududeynta iyo horumarinta is dhaafsiga ee ka dhexeeya Daw. J. Carabta » 776

مرسوم رئيس الجمهورية رقم ٤٢ بتاريـــخ ١ ديسمبـــر ١٩٨٥ .

XEER WASAARADDA GAADIIDKA DH. iyo Cirka L. 8 ee 1 Jen. 1985, Abuurista Qaybta Ilaalinta Duulista Hawada » 778

QAYBTA SADDEXAAD

TALOOYIN ISGAARSIIN OGEYYSIIS IWM.

MAXKAMADDA GOBOLKA W/GALBEED, 12.10.85, Lumid Jeeg War. L. 631823 ku qoran C/maan Ibraahim Faarax L. 500 » 779

MAXKAMADDA G. W/GALBEED, 12.8.85, Lumid Jeeg War. L. 593281 ku qoran Yaasiin Maxamed Boqore L. 501 » 780

MAXKAMADDA G. W/GALBEED, 12.8.85, Lumid Jeeg War. L. 0157482 ku qoran Cabdi/kariin Siciid L. 502 » 781

MAXKAMADDA G. TOGDHEER BURCO, 28.11.85, Lumid 5 Jeeg War. ee Lambarradoodu kala yihiin 0000396-0000397-0196982-0439473 iyo 0197089. » 786

MAXKAMADDA G. SANAAG, 14.10.85, Lumid 2 Jeeg War. L. 0023263-0023262 ku qoran Maryan Faarax iyo Shamis Faarax » 787

SHARCI Lambar 23 Taariikh 30 Nof. 1985 Sharciga Kalluumeysiga Soomaaliyeed.

MADDAXWEYNAHA J.D.S.

ISAGOO TIXGELINAAYA: Oggolaanshaha Guddiga Joogtada ah ee Golaha Shacbiga.

WUXUU SOO SAARAYAA

Sharciga Soo Socda:

Qodobka 1aád

Micnayn iyo fasiraad

Ereyada hoos ku qoran haddii aan si kale loo micnayn waxaa loola Jeedaa:

1. NAFLEY BIYOOD: Waa Dhammaan Nafleyda ku nool Badda iyo Biyo Dhuleedka oo ay ku jiraan lohodka (oyster) qolofleyda (crustacean) Plankton & Aljgiga.—

2. RUQSAD: Waa Oggolaashaha loo fidiyey cid soo codsatay in ay Kalluumeysato, habeyso, ama ka Ganacsato Kalluunka iyo Nafley Biyood.—

3. KALLUUMEYSI: Waa qaab ama habab lagu daba yo Nafleyda Biyo ku noolka.—

4. KALLUUMEYSIGA HIDDAHA AH: Waa Kalluumeysiga Xeebaha dhow oo loo adeegsado Doonyaha yaryar (Huuriyada IWM).—

5. KALLUUMEYSIGA CASRIGA AH: Waa Kalluumeysiga Badda Sare oo loo adeegsado Maraakiib iyo Farsamo Casri ah sida trawlka, Purseinka, IWM.—

6. XALLINTA IDAARIGA: Waa hab kasta oo lagu xalliyo dhibaato ama gef la galay oo Maamulka Wasaaraddu Go'aan ka gaaro.—

7. WASIIRKA: Waxaa loola Jeedaa Wasiirka Wasaaradda Kalluumeysiga iyo Kheyraadka Badda.

8. ROYALIY: Waxaa loola jeedaa Qaybta Lacageed ama Badeeco oo uu bixinayo Milkiile Markab si uu uga Kalluumeysto Biyaha Dalka Soomaaliyeed.—

isla Qodobkan, Faqraddiisa Koowaad.

Qodobka 2aad

Maamulka

1. Waajibaadka dhowridda, ilaalinta, Horumarinta kalluumeysiga J.D.S. iyo Kontoroolka Guud ee Maamulka Sharcigan waxaa Mas'uul ka ah Wasaaradda Kalluumeysiga iyo Khayraadka Badda.

2. Wasiirku wuxuu si qoraal ah u wakiilan karaa awood kasta oo Sharcigan siinayo Sarkaal kasta ama Shaqaale ka tirsan Wasaaradda Kalluumeysiga iyo Kheyraadka Badda.

Qodobka 3aad

Xogta Kalluumeysiga

Wasaaradda Kalluumeysiga iyo Kheyraadka Badda waxay Ururineysaa tirakoobyada iyo xogta kale, isku duwidda, habeysaa soona saartaa Macluumaadka la xiriira Kalluumeysiga Soomaaliyeed.

Qodobka 4aad

Horumarinta Kalluumeysiga

Wasaaradda Kalluumeysiga iyo Kheyraadka Badda waxay qaadeysaa tillaabo kasta oo lagu horumarinayo Kalluumeysiga Dalka Soomaaliyeed.

Qodobka 5aad

Hababka Reeban

1. Cid kasta waxaa ka reeban in ay isticmaasho hab ama qalab waxyeello gaarsiin kara Nafleyda Biyo ku noolka sida Dilka, suuxinta, wasakheynta iyo Naafeynta oo ka imaan kara waxyaabaha qarxa Iwm.

2. Waxaa kaloo reeban in lagu haysto qalabkaas isaga ah goob Kalluumeysi.

3. Waxaa reeban in laga ganacsado ama lala kala

Qodobka 6aad

Xiridda Biyaha iyo Xilliyada

Wasiirku wuxuu soo saari karaa amar qoraal ah oo lagu xirayo xilli Kalluumeysi, goob nooc qalab iyo nooc Kalluun ama Nafley Biyood, amarkaasi waa in lagu sheegayo muddada bilowgeeda iyo dhammaadkeeda. Waxaa kale Wasiirku wax ku dari karaa ama ka dhimi karaa muddadaas iyada ah mar kasta oo ay noqoto lagama maarmaan.

Qodobka 7aad

Nidaamka Guud ee Ruqsadaha Kalluumeysiga

1. Wasaaradda Kalluumeysigu waxay ruqsad Kalluumeysi ku bixin kartaa Badda Dalka iyo Biyaha Gudaha Intaba.

2. Cid kasta oo dooneysa in ay ka Kalluumeysato ama ku beerto Kalluun Biyaha Soomaaliyeed waa in ay haysataa ruqsad Kalluumeysi iyo ruqsadda soo gelitaanka Dalka. Ruqsaddaasi ma quseyso dadka aan isticmaalin Gaadiid Badeedka.

3. Wasaaradda Kalluumeysiga iyo Kheyraadka Badda markay sugto shuruudaha ruqso bixinta, codsadaha waxay siinaysaa ruqsad Kalluumeysi waxayna u sameyneysaa ruqsadaha Sharcigan lagu bixinayo Diiwaan gaar ah.—

4. Ruqsadaha Kalluumeysiga waxaa lagu weydiisanayaa codsi qoraal ah oo lagu tilmaamayo arrimaha Soo Socda:

b) Magaca, Faahfaahinta Markabka, Calanka iyo Dekedda laga Diiwaangeliyey.
t) Magaca Milkilaha, Ijaartaha, haddii uu jiro, Kabtanka Markabka (Naakhuude).
j) Lambarka Markabka.—
x) Faahfaahinta Kalluumeysiga uu soo codsaday Arjiluhu sida:

I) Nooca uu doonayo in uu Kalluumeysto.

III. Goobaha wax soo saarka lagu dejinayo iyo Faahfaahinta suuqeynta, meesha ugu dambeysa uu aadayo iyo isticmaalka wax soo saarka.

IV. Goobaha uu ka Kalluumeysanayo.

V. Cadadda Kalluunka ama biyo ku noolka kale oo la qaban doono.

VI. Waqtiga lagu talo gelayo in ruqsaddu ansax ahaato.

VII. Faahfaahinta Kaaliyaha, Xannaaneynta, habeynta iyo magaca iyo ruqsadda Maraakiibta oo la hawlan.

kh) Faahfaahinta isla wadaag ama siyaabo kale oo dan Soomaaliyeed u soo gali karo howsha Kalluumeysiga.—

d) Xog kasta oo Wasaaraddu warsato si uu ku caddeeyo ama ku Faahfaahiyo Muraadkiisa.

r) In uu wato Damaanad Banki (Bank Guarantee).

5. Isbeddel kasta oo ku dhaca Markab la siiyey ruqsad, sida Milkiyad la wareejiyey ama la sii ijaartay waa in lagu soo wargeliya Wasaaradda Kalluumeysiga muddo soddon (30) beri gudahood ah.—

6. Markab kasta oo la siiyo ruqsad Kalluumeysi waa in lagu qoraa Markabka dushiisa iyo dhinacyadiisaba Lambarka ruqsadda, magaca Markabka iyo Dekadda uu ka Diiwaan gashan yahay.

Qodobka 8aad

Waajibaadka Kalluumeystaha

Cid kasta oo la siiyo ruqsad Kalluumeysi waxaa ku Waajib ah:

b) Inuu dhowro Shuruucda Dalka iyo Xeerarka Wasaaradda.

t) Inuu keeno warbixin joogto ah oo ku saabsan Arrimaha Kalluumeysiga sida tirada, noocyada oo ay ku jiraan haraaga (bycatch) wax soo saarka, mee-

Qodobka 9aad

Cilmi Baaris

Wasiirka Kalluumeysigu wuxuu qoraal ahaan ugu oggolaan karaa cid kasta ama Markab kasta inuu sameeyo cilmi baaris iyo hawlo kale oo la xiriira macluumaadka Khayraadka Biyaha, isagoo haysta ruqsadda soo gelitaanka Dalka.

Qodobka 10aad

Kormeerka iyo Baarista

1. Cid kasta oo Kalluumeysanaysa waa la kormeerayaa iana baari karaa marka ay timaaddo baahi, ka sokow Hay'adaha Baarista, waxaa fulin kara hawshaas Gob. Deg. iyo ciddii kale oo loo xilsaaro, iyada oo markasta Wasaaradda laga haysto oggolaansho.

2. Marka ay sugnaato in loo gefay Sharcigan, eedeysanaha iyo Markabkiisa waa in la geeyo Dekedda ugu dhow ee Dalka.

3. Haddii Markab ku galo dambi biyaha Soomaaliyeed kana tillaabo Xuduudda Biyaha Soomaaliyeed waxaa lagala xaajoonayaa Dalka uu galay iyadoo la raacayo shuruucda Caalamiga ah.

Qodobka 11aad

Kalluumeysiga Hiddaha iyo Casriga

Wasaaradda Kalluumeysigu waa in ay dhiirri gelisaa Horumarinta Kalluumeysiga Hiddaha (traditional) iyo kan Casriga (industrial) iyo dhammaan amuuraha la xiriira, iyada oo la kaashaneysa Hay'adaha Dawladda ee ku haboon. Waxaa kale oo ay xaqiijinaysaa in aan Kalluumeysiga Casriga ahi dhibaato u geysan ama hakinin horumarinta Kalluumeysiga Hiddaha, iyada oo la qaadayo tallaabooyinka ku haboon oo isu dheellitiraya.

Qodobka 12aad

cigan wuxuu muteysanayaa Ganaax Ciqaabtiisu u Dhexeeyso.

b) Sh.So. 1000 ilaa Sh.So. 10.000 (tobankun) Huuriyada iyo Doonyaha Shiraaca leh ee aan Motoorka lahayn.

t) 1. Sh.Sh. 10.000 ilaa Sh.So. 15.000 Doonyaha Motoorka leh ee quwaddoodu u dhexeyso 6 HP ilaa 30 HP.

2. Sh.So. 16.000 ilaa Sh.So. 30,000 Doonyaha Motoorka leh ee quwaddoodu u dhexeyso 31 HP ilaa 60 HP.

3. Sh.So. 31.000 ilaa Sh.So. 50.000 Doonyaha Motoorka leh ee quwaddoodu u dhexeyso 61 HP ilaa 100 HP.

j) Sh.So. 1.700.000 ilaa Sh.So. 4.000.000 ama Lacag u dhiganta ee Ajnabi ah Maraakiibta 101 HP iyo ka Sarreeya.

Haddii Dembiga uu galay intaa ka cuslaado ama uu ku noqdo isla falkaas waxaa lala tiigsanayaa Xeerka Habka Ciqaabta Soomaaliyeed.

2. Cid kasta oo adeegsata ama ku isticmaasha waxyaabaha soo socda, waxay muteysanaysaa Xarig u dhexeeya 3 ilaa 10 sano ama ganaax ah Sh.So. 5.000,000 ilaa Sh.So. 50.000,000 ama labada Ciqaab oo wada jira.

b) U adeegsado waxyaabaha qarxa, Sunta, IWM.

t) Ka Kalluumeysta ama ku haysta qalab goob laga Mamnuucay.

j) Kalluumeysta Xilli Xir.

x) Kalluumeysta Nooc Kalluun ama Nafley Biyood kale oo la reebay in laga Kalluumeysto.

kh) Ku Kalluumeysato qalab aan loo ruqsayn.

3. Cid kasta oo iska indha tirta ama diidda inay keento Xogwaranka laga doonayey ama fulin weyda waajibaadkii Sharci ahaan looga reebay waxay mu-

baadkeeda iyo heshiisyada lala galay waxaa lagala noqonayaa ruqsaddii horey loo siiyey.

Qodobka 13aad

Awoodda Xoojinta Shraciga

Awoodda Xoojinta Sharcigan waxaa u xilsaaran in fuliyaan Ciidamada Badda ee Dalka.

Qodobka14aad

La Wareegid

Qof kasta oo lagu helo dambi lid ku ah Sharcigan Ciqaab kasta oo lagu qaaday ka sokow waxaa lagala wareegi karaa qalabka, Motoorka iyo shey kale oo kasta loo adeegsaday in lagu galo Dambiga.

Waxaa kale oo lagala wareegi karaa dhammaan Kalluunka ama Nafley biyood kale oo laga helo Markab kasta oo dambiga lagu galay dushiisa.

Qaadista dambiyada ku xusan Sharcigan waxaa awood u leh Maxkamadda Badbaadada Dalka.

Qodobka 15aad

Xallinta Idaariga

Haddii gefka la galay uusan saas u cusleyn, Wasaaradda Kalluumeysiga iyo Khayraadka Baddu waxay ku xallin kartaa gefka iyadoo kala xaajooneysa ciddii ay Khuseyso Arrintu.

Qodobka 16aad

Xeerarka

1. Madaxweynuhu marka uu dhegeysto talo soo jeedinta Wasiirka Wasaaradda Kalluumeysiga iyo Kheyraadka Badda, wuxuu soo saari karaa Xeer hoosaad lagu fulinayo Sharcigan.

2. Wasiirka Wasaaradda Kalluumeysiga iyo Kheyraadka Baddu wuxuu soo saari karaa Xeer Nidaamiye ku saabsan habsami u maareynta iyo horumarinta Kalluumeysiga.

Qodobka 17aad

Dhaqangelinta iyo Tirtirid

1. Dhammaan Sharciyada ka hor imaanaya ama aan la socon karin Sharcigan waa la tirtiray.

2. Sharcigani wuxuu dhaqan gelayaa 15 maalmood ka dib marka lagu soo saaro Faafinta Rasmiga ah.

Muqdisho, 30 Nov. 1985

MADAXWEYNAHA J.D.S.
(Maxamed Siyaad Barre)

Sharci Lambar 24 Taariikh 1 Dec. 1985 Oggolaasha ha Heshiiska fududeynta iyo horumarinta isdhaafsiga Ganacsiga ee ka dhexeeya Dawladaha Jaa/da Carabta.

ISAGOO TIXGELINAAYA: Oggolaashaha Guddiga Joogtada ah ee Golaha Shacbiga.

WUXUU SOO SAARAYAA

Sharciga Soo Socda:

Qodobka 1aad

1. Waxaa la oggolaaday Meelmarinta Heshiiska Fudu deynta iyo Horumarinta isdhaafsiga Ganacsi ee ka dhexeeya Dawladaha Jaamacadda Carabta.
2. Heshiiskan waxaa lagu kala saxiixday magaalada Tuunis ee Dalka Tuunisiya taariikhdu markey aha yd 17 Febraayo 1981.
3. Heshiiskan wuxuu ka mid yahay Sharcigan isagoo Lifaaq u ah.

Qodobka 2aad

Shuruudaha iyo Xaaladaha ay qorayaan Heshiiska ku tilmaaman qodobka 1aad ee Sharcigan waxaa dhaqangelintooda la waafajinayaa Dastuurka Jamhuuriyad da Dimoqoraadiga Soomaaliya iyo Heshiiska.

Qodobka 3aad

Madaxweynaha J.D.S. waxaa Awood loo siiyey inuu Meelmariyo Heshiiska Sharcigan ku Tilmaaman.

Qodobka 4aad

Sharcigani wuxuu dhaqan gelayaa isla marka uu saxiixo Madaxweynaha J.D.S. Waxaana lagu soo saara yaa Faafinta Rasmiga ah ee Jamhuuriyadda.

Muqdisho, 1da Disember 1985

MADAXWEYNAHA J.D.S.

Maxamed Siyaad Barre

QAYBTA LABAAD

X E E R

UJEEDDO: Xeerka Madaxweynaha J.D.S. Lambar 42 Taariikh 1 Dec. 1985 Meelmarinta Heshiiska Fududeynta iyo Horumarinta Isdhaafsiga Ganacsiga ee ka dhexeeya Dawladaha Jaamacadda Carabta.

MADAXWEYNAHA JDS

MARKUU ARKAY: Qod. 67aad, Faqraddiisa 5aad iyo Qod. 82aad, Faqraddiisa 4aad ee Dastuurka.

MARKUU ARKAY: Sharciga Lambar 49 ee 23ka Dis. 1984, kuna saabsan wax ka beddelidda Dastuurka.

MARKUU ARKAY: Sharciga Tirsigiisu yahay ee 1da Dis. 1985 oo Golaha Shacbigu ku oggolaaday Heshiiska Ujeeddada ku tilmaaman.

MARKUU TIXGELIYEY: In ay lagama maarmaan tahay in Heshiiskan la Meelmariyo.

WUXUU SOO SAARAYAA

Sharciga Soo Socda:

Qodobka 1aad

Waxaa la Meelmariyey Heshiiska lagu kala saxiix day magaalada Tuunis ee Dalka Tuunisiya taariikhdu markay ahayd 17ka Febraayo 1981, kuna saabsan Fudu deynta iyo Horumarinta Iskaashiga Ganacsi ee ka dhe xeeya Dawladaha Jaamacadda Carabta.

Qodobka 2aad

Heshiiskani wuxuu Dalka Jamhuuriyadda Dimoqo raadiga Soomaaliya ku yeelanayaa Awood Sharci.

Qodobka 3aad

Xeerkani wuxuu dhaqan gelayaa isla marka uu sa xiixo Madaxweynaha J.D.S. Waxaana lagu soo saarayaa Faafinta Rasmiga ah ee Jamhuuriyadda.

Muqdisho, 1da Disember 1985

MADAXWEYNAHA J.D.S.

مرسوم رئيس الجمهورية رقم ٤٢ بتاريخ ١ ديسمبر ١٩٨٥
التصديق على الاتفاقية الخاصة بتيسير وتنمية التبادل التجارى
بين الدول العربية . .

رئيس الجمهورية

بعد الاطلاع على الفقرة الخامسة من المادة ٦٧ والفقرة الرابعة من المادة ٨٢ من الدستور . .

وعلى القانون رقم ٩ بتاريخ ٢٣ ديسمبر ١٩٨٤ الخاص بتعديل الدستور.

وعلى القانون رقم ١٤ بتاريخ ١ ديسمبر ١٩٨٥ بشأن موافقة مجلس الشعب على الاتفاقية المبينة أعلاه . .

ونظرا للضرورة الداعية الى التصديق على هذه الاتفاقية . .

بما هو آت

برسم

المادة الاولى

تم التصديق على اتفاقية تيسير وتنمية التبادل التجارى بين الدول العربية المبرمة فى مدينة تونس بتاريخ ١٧ فبراير ١٩٨١م . . .

المادة الثانية

تكون للاتفاقية قوة القانون فى قطر جمهورية الصومال الديمقراطية.

المادة الثالثة

يسرى مفعول هذا المرسوم اعتبارا من تاريخ التوقيع عليه من قبل رئيس الجمهورية ويلتزم فى الجريدة الرسمية . .

مقديشو فى ١ ديسمبر ١٩٨٥م . .

رئيس جمهورية الصومال الديمقراطية

— محمد سياد برى

XEER: Wasaaradda Gaadiidka Dhulka iyo Cirka L. 8 Abuurista Qaybta Ilaalinta Duulista Hawada.

## WASIIRKA

Wasaaradda Gaadiidka Dhulka iyo Cirka

MARKUU ARKAY: Qod. 1 (a) (b) (d) (e) ee Dekree to 9,9,65 Lam. 13 lana Sharciyeeyay 21,11 65 lam. 18
